

# SIRTA GUUSHA



QOF HAN YAR MA HANAQAADO

XASAN MUDANE

# **SIRTA GUUSHA**

*Qof han yar ma hanaqaado!*

**Xasan Mudane**

Xuquuqda buuggan waxay u dhowrsan tahay ©Xasan Mudane  
Xuquuqda buuggan way dhowrsan tahay. Lama daabacan  
karo, lama guurin karo, lama badin karo, lama yarayn  
karo, lama beddeli karo, lama sheegan karo xogta ku jirta  
buuggan iyada oo aan oggolaansho laga haysan qoraaga  
buugga.

Copyright © by Xasan mudane

All rights reserved. Without limiting the rights under  
copyrights reserved above, no part of this publication  
may be reproduced, stored in or introduced into a  
retrieval system, or transmitted, in any form or by any  
means (electronic, mechanical, photocopying, recording  
or otherwise), without the prior written permission of the  
copyright owner.

First published in 2016

Second published in 2018

Daabacaddii 1aad 2016

Daabacaddii 2aad 2018

Published in Istanbul, Turkey

Xasan Mudane

Telephone: +252615827852

E-Mail: [Mudanep5@gmail.com](mailto:Mudanep5@gmail.com)

<https://bilyoneer.wordpress.com>

## **MAHADNAQ**

Ugu horayn mahad oo dhami waxay u sugnaatay Allah subhannahu watacaalaa oo fursad lama hilmaamaan ah ii siiyay soosaarista Buuggan Sirta Guusha. Buuggan ma aha mid ka arradan waxqabadka dad badan oo talo iyo tusaale ku biiriyay. Waxaan si guud ugu mahadcelinayaa shakhsiyaad xusid mudan oo iga caawiyay tifaftirka soosaaristii koowaad. Waxaa ka mida: Dr. Ahmed Yusuf Jama, Cumar Sheikh Abukar, Abdulqadir Hoshes, Abdiasis Mohamed. Sidoo kale, waxaan si gaar ah ugu mahadcelinayaa Abwaan, Qoraa Cabdiraxiin H. Galayr oo iga caawiyay tifaftirka soosaaristan labaad.

## **U HIBAYN**

Buuggan Sirta Guusha waxaan u hibeeyay hooyo  
Nasro Harbi Magan.

## **AFEEF**

*“Ninkii tiin tallaaliyo ninkii timir abuuraba  
taariikhdu way werin”*

*Abwaan Abdulqaadir X. Yamyam*

Taasi waxaa uga gol-leeyahay in taariikhda aysan iga werin wax xun, balse iga weelayso wax fiican oo dhaxalreeb ah. Waana sababta aan u doortay in aan bulshada Soomaaliyeed gaar ahaan dhallinyarada la wadaago buuggan *Sirta Guusha*. Waxaan ka afeefanayaa wixii khalad ah ama gaf ah ee aad ku dhex aragtaan buugga, uguma talaggalin in aan ku xumeeyo cid gaar ah iyo koox gaar ah ee waa khalad aniga iga dhacay.

## **TUSMADA BUUGGA**

Mahadnaq.....	iv
U hibeyn.....	v
Afeef.....	vi
Tusmada Buugga.....	vii
Hordhac.....	x

### **CUTUBKA KOOWAAD**

#### **GARASHADA GUUSHA**

Waa Maxay Guul.....	14
Aragtiyada Guusha.....	16
Guushu waa sida baadi kaa maqan.....	18
Nuxurka Guusha.....	23

### **CUTUBKA LABAAD**

#### **XEERARKA GUUSHA**

Xeerka Jamashada.....	27
Jamasho iyo Hiyi.....	31
Xeerka Rumaynta.....	36
Xeerka Maaminta.....	37
Xeerka Sababta iyo Saameynta.....	44
Xeerka Joogtaynta.....	47
Xeerka Yoolka iyo Qorshaynta.....	49

### **CUTUBKA SADDEXAAD**

#### **FIKIR OO DHIS GUUSHA**

Yeelo dareen xooggan oo ku dhisan guul jacayl.....	56
Ha ka cabsan Guuldarro.....	58
Mala-awaal.....	67
Shaqo Adag.....	76

**CUTUBKA AFARAAD**  
**QAACIDDADA GUUSHA**

Kalsoonida Nafta.....	83
Macluumaad Raadin.....	85
Dhaqangelinta Macluumaadka.....	86
Qaaciddada Guusha.....	87
Yeelo Tab ama Farsamo.....	89
Shaxda Guusha.....	92

**CUTUBKA SHANAAD**  
**HA CUDURDAARAN**

Garo Sacaaga.....	98
Sidee u dilay Sacayga.....	103
Qorshe-fulineed ku dhisan is-xilqaan .....	106

**CUTUBKA LIXAAD**  
**YOOL DHIGASHO**

Waxaa jira laba Yool.....	108
Maxaad Doonaysaa.....	110
Ka Baaraandeg Yoolkaaga.....	111
Garashada Yoolka.....	116
Xeel dhigashada Yoolka.....	117
Qorshe-faleed.....	120

**CUTUBKA TODDOBAAD**  
**WAX KA BARO TAARIIKH NOLOLEEDKA**  
**SHAKHSIYAAD KA GUUL GAARAY**  
**GANACSIGA**

William Henry Gates.....	124
Asaaskii shirkadda Microsoft.....	125
Warren Edward Buffett.....	128



Carlos Slim Helu.....	130
Mark Elliot Zuckerberg.....	132
Asaaskii shirkadda Facebook.....	133
Alhaji Aliko Dangote.....	135
Zhou Qunfei.....	137
Tixraac.....	139
Qoraaga.....	141

## Hordhac

Waxaan booqday degelka (mareegta) Dr. John Maxwell uu ku leeyahay barta internetka, wixii ugu horreeyay ay indhahayga qabtayn wuxuu ahaa oraahtan “Guushu ma aha wax iska dhaca balse waa la bartaa.” Waxaan kuugu hambalyeenayaa in aad heshay fursaddii aad ku baran lahayd guusha, maadaama aad bilowday akhrinta buuggan.

Markaad akhrinayso waxaad ku dhex arki doontaa weyddiimooyiin maangal ah, kuwaas oo tilmaamaya muhiimmadda ay leedahay barashada guusha ka hor inta aan la isku hawlin u halgamiddeeda. Buuggu, wuxuu sahminayaa garashada guusha, wuxuu kaloo ku doodayaa in qofku uu barto guusha. Si kale u dhig, in qofku uu garasho u yeesho moorada ay dhacdo guusha, taas oo ka caawinaysa in uu xoogga saaro barta ay ka birqanayso.

Buuggani, waxaan ugu talaggalay in uu qofka u noqdo bare tusiya sida loo baran karo guusha, marjac uu u laaban karo goor walba, in uu tilmaamo hab ugaarsiga guusha, in uu taabto noloshiisa iyo in uu wax ka ogaado sirta guusha.

Cutubka koowaad: Wuxuu ku saabsan yahay barashada guusha, aragtiyada kala duwan ee ku aaddan macnaha iyo qeexitaanka guusha. Halka

cutubka labaad uu la xiriirto xeerarka kala duwan ee guusha.

Cutubka saddexaad: Wuxuu tilmaamayaa muhiimadda ay leedahay in uu qofka ka fikiro guusha iyo gaaristeeda. Halka cutubka afaraad uu khuseeyo mid ka mida aaladaha ugu horreeya, ee qofka u horseedi kara in uu hiigsado guul sida qaaciddada guusha.

Cutubka shanaad: Wuxuu ka digayaa mid ka mida waxyaabaha halista ku ah guusha sida cudurdaarka. Halka cutubka lixaad uu ka sheekeynayo waddada ugu macquulsan ee uu qofku u sii mari karo guusha. Cutubka toddobaad: Waa hidde sidaha buuggan! Wuxuu tusmaynayaa taariikh nololeedka toddoba shakhsi oo ka guul gaaray ganacsiga. Waxaa ka mida: Bill Gates, Zhou Qunfei, Aliko Dangote iwm.

Ugu dambayn, buuggan *Sirta Guusha* waxaa saldhig u ah labo ujeedo:

1. In aad hesho macluumaad muhiim ah oo la xiriira guusha.
2. Dhaqangelinta macluumaadkaas adiga oo raacaya qaaciddada guusha.

Xasan Mudane  
Turkiga, Istanbul, 2018

# 1

## GARASHADA GUUSHA

*“Intuu maanku gaajaysan yahay guuli waa weli”*

Abwaan Hadraawi

**G**uushu way macne badan tahay, mana laha qeexitaan u gaar ah oo la isku raacay, waxayna dhacdaa xayndaabyada kala duwan ee nolosha sida qoyska, waxbarashada, ganacsiga, siyaasadda, shaqada, xiriirka bulshada, diinta iyo dhaqanka. Taasi waxay keentay in qof walba guusha uu u arko hadba sida ay ula muuqatay. Tusaale, qofka ganacsadaha ah guushu wuxuu u arkaa marka uu faa’iido badan sameeyo; qofka siyaasiga ah guushu wuxuu u arkaa marka uu ku

guulaysto kursi madaxtinnimo; qofka ciyaartooyda ah guushu wuxuu u arkaa marka uu goolka dhaliyo. Iyada oo sidaas ah, haddana dhammaan waxaa biyodhac u ah xaqiijin arrin la tiigsanaayay.

Marka ay timaaddo qeexitaanka kelmedda ‘guul’ waxaad arkaysaa in qof walba uu ku bees gareynayo aragtidiisa, waana arrin dib ugu laabanaya kala duwanaanshaha bini’aadamka. *Si kale u dhig, sida ay wejiyadeenu u kala duwan yihiin ayay maskaxdeennuna u kala duwan tahay; sida ay maskaxdeenu u kala duwan tahay ayay aragtideennuna u kala duwan yihiin; sida ay aragtideenu u kala duwan yihiin ayay qeexitaankeena guushana u kala duwan yihiin.*

Waxaa la sheegaa Bill gates in uu yahay ninka ugu taajirsan dunida, isagana wuxuu isku arkaa in uu yahay guulayste liibaanay, laakiin aniga iyo adiga waxaan u aragnaa in uu yahay qof aan weli ku guulaysan guusha dhabta ah ee waaraysa. Dhanka kale, saxaabiga Cumar Binu Khadaab, annaga waxaan u aragnaa in uu yahay qof adduunyo iyo aakhiraba ku guulaystay, balse waxaa jira dad u arka in uusan guulaysan. Sababtu maxay tahay? Waxa adiga guul kuu ah dadka kale guul uma aha!

Haddaba, si aan wax badan uga ogaado sida ay dhallinyarada u arkaan macnaha guusha ayaan weyddiin la xiriirta guusha ku qoray bogga aan ku leeyahay barta xiriirka bulshada ee faysbuug (Facebook). Weyddiintu waxay u qorneed sidan: Waa Maxay guul? Dadka intooda badan waxay

kaga soo warceliyeen siyaabo kala duwan, balse waxaan ka soo dhex xushay shan jawaabood oo kala ah:

1. Guushu waa hadafkaaga oo aad gaarto.
2. Guushu waa gaarista yoolkaaga; waa helitaanka nolol dhammaystiran, adduunyo iyo aakhiraba ku anfacaysa.
3. Guushu waa in shakhsi ama ummad yeelato yool, kuna dadaasho yoolkooda, kana mirodhaliso.
4. Guushu waa hadafkaaga oo aad ka run sheegto.
5. Guushu waa kelmed soo koobaysa wax si wanaagsan u qabsoomay, ugu dambeyntiina ku dhammaaday heer sare.

## **Waa Maxay Guul?**

Waxaa jirta su'aal ahayd waa maxay guul oo la weyddiiyay akhristayaasha wargeyska *The Dreamer's Guide Motivation Newsletter.* Bal aan kuu soo gudbiyo jawaabaha ay ka soo kala bixiyeen.

### **Isaac Alex Phiri:**

Ma sheegi karo macnaha dhabta ah ee guusha, balse waxaan ku soo koobi lahaa hab fudud oo ah:

- In aad gaarto barta ay riyadaada kuu tilmaamayso.
- Markaad hesho wixii aad u baahnayd.
- Markaad ka salgaarto duruufaha iyo caqabadaha nolosha.

**Geoffrey Nkhoma:**

“Guushu waxaan u arkaa farxadda, farxaddaas oo ka imaanaysa markii aynu aragno dadka aynu jecelnahay.”

**Janett Kalale:**

“Guusha macnaheedu waa in aad gaarto natiijada ugu sarrayso, uguna macquulsan hiigsigeeda.”

**Mary Masumbuko:**

Guushu waa in aad isku dhiibto Alle-waa bixiyaha nolosha dhabta ah ee aadanuhu raadiyo. Guushu waa xakamaynta nolosha, in aad qaabayso qorsheha nolosha iyo in aad xaqiijiso [Sidiid aad ku gaari lahayd yoolkaaga]...taas ayaan guul u arkaa.

**Humphery:**

“Waxaan guul u garanayaa sida soosocota: Farxadda qoyska, xiriirka aad la leedahay Alle iyo ku kalsoonaanta nafta.”

Haddii aad u fiirsato qeexitaanadaas kor ku xusan iyo kuwa soosocda, dhammaantood waxay ka mideysan yihiin in wax la gaaro.

Si aan wax badan uga sii ogaado macnaha guusha ayaan ka dhex baaray saddexdan qaamuus:

**Qaamuuska Af-Soomaaliga:**

1. Guul libin laga gaaro dagaal ama tartan laba qof ama laba kooxood u dhaxeeyey.
2. Cid haddadid ama xoolo aroor oo wabax ah meel; Ceelka u dhow habeen u hoyasho. Xoolo iwm dhaan isugu keenid. Tusaale “Geelii wuxuu isugu guulmay gasada.”

## **Qaamuuska Webster's:**

1. In aad hesho ama aad gaarto hodantinimo, caannimo.
2. In aad ka mirodhaliso iskudday aad jamatay.

## **Qaamuuska Oxford:**

1. In aad gaarto himilo ama ujeeddo.
2. In aad hesho caannimo, hodantinnimo ama aqoonsi bulsho.

Islaamku siduu u arkaa guusha? Wuxuu u arkaa si ka duwan sida ay u arkaan dadka caadiga ah, waxa uuna ku soo koobay afar qaybood<sup>1</sup> oo kala ah:

- Iimaan toosan.
- Dhaqan suubban.
- U dardaaranka xaqa ama towxiidka dadka kale.
- U dardaaranka dulqaadka ama samirka dadka kale.

Guusha dhabta ah ee lagu waarayo waa ku guulaysashada jannada iyo raalliggelinta Alle. Sida uu Alle inoogu sheegay kitaabka quraanka “Qofkii la dhaafiyo naar jannaduna hoy u noqotay kaas ayaa liibanay.”

## **Aragtiyada Guusha**

Marka aynu ka soo gudubno qeexitaanadaas kala duwan, waxaa kaloo jira laba aragti, labaduba waxay sharaxayaan macnaha guusha. Stephen Covey<sup>2</sup> ayaa buuggiisa ku xusay labadaas aragti, waxayna kala yihiin aragtida tixgelisa astaamaha iyo dabeecadaha qofka iyo aragtida diiradda saarta anshax shakhsiyeedka qofka. Tan hore, waxay

---

<sup>1</sup>Fiiri suuradda wal-casri

<sup>2</sup> Qoraaga buugga: The 7 habits of highly effective people.



leedahay guushu waxay timaaddaa marka qofku uu dhaqangeliyo qawaaniinta nolosha.

Si kale u dhig, waxaa jirta qawaaniin aasaas u ah nolosha suubban, qofkii bartaa qawaaniintaas; sidoo kale ku dhaqmaa, ugu dambayn waxay ku hoggaamiyaan guul. Aragtidani, waxay leedahay guushu waxay u martisaa qofka leh astaamo dabeecadeed ku fadhiya qawaaniinta aan isbeddelin sida caddaalad, daacadnimo, dulqaad, naxariis, dhiirranaan iyo in aad tahay qof u adeega bulshada.

Aragtida kale iyaduna waxay liddi ku tahay tan hore, waxayna ku dulwareeganaysaa anshaxa shakhsiyadda qofka. Aragtidani, waxay qabtaa in macnaha guushu ay tahay dhisidda xiriirka suubban ee aad la leedahay bini'aadamka, sumcad qofeedka iyo mawqifyada samasheega ah. Si taa loo gaaro, waa in qofku uu la yimaadaa afgobaadsi, dhoorkaqosol (ilka caddayn), niyadsami, dhiirranaan iyo firfircooni. Intaas waxaa sii dheer, in aad noqoto shakhsi ku xeeldheer sasabashada dadka ama macaamiisha si aad u xoojiso xirirkooda wanaagsan.

Haddaba, markaad u fiirsato qeexitaanadii aynu kor ku soo xusnay iyo aragtiyada kala duwan ee khuseeya guusha, waxaad ogaanaysa in guushu tahay mid laga helo xerooyinka kala duwan ee nolosha, dadkuna ay ku kala aragti duwan yihiin meelaha ay kaga sii jirto xerooyinkaas. Tusaale, dadka qaar guushu waxay u arkaan in ay tahay hanti badan oo aad haysato, awood madaxtinnimo, magac iyo maamuus halka dadka

kale ay u arkaan caafimaadka, farxadda, xasiloonida nafta iwm.

Marka ay timaaddo mowduucyada la xiriira guul iyo farxad, wax badan baa laga qoray. Culummada ugu magaca dheer ee guusha wax ka yiri waxaa ka mida *Zig Ziglar*<sup>3</sup> oo ah qoraaga buugga '*Guul u dhalad*,' waana shakhsi lagu tixgeliyo aqoonta guusha, dhiirriggelinta iyo hoggaamminta. Wuxuu rumaysan yahay in guusha aan lagu soo koobi karin hal qeex, balse u baahan tahay in dhinacyo badan laga eego.

## **Guushu waa sida baadi maqan!**

Guushu, waxaan ku meteli lahaa in ay tahay sida baadi kaa maqan oo kale. Abwaan Qamaan Bulxan, wuxuu yiri "Baadida ninbaa kula deydeyi daalna kaa badane, oo aan doonahayn in aad heshana daayin abidkaaye." Guushu, dad baa kula deydeyi daalna kaa badane, oo aan doonayn in aad gaarto daayin abidkaa!

Haddii aad isleedahay jaamacadda ka qalinjebi, dad baa kula deydeyi daalna kaa badane. Haddii aad qorshaynayso in aad buug qorto si aad u noqoto qoraa magac reebay, dad baa kula deydeyi daalna kaa badane oo weliba aan doonayn in aad gaarto daayin abidkaa. Haddii aad isku diyaarinayso in aad noqoto madaxweynaha Soomaaliya, dad baa kula deydeyi daalna kaa badane oo aan daanayn in aad gaarto daayin abidkaaye.

---

<sup>3</sup>Qoraa, ganacsade, khudbad-jeediye, wuxuu u dhashay dalka maraykanka.

Haddaba, taladu waxay kuu suubban tahay subaxaad joogtaaye, waxaan talo kugu siinayaa in guusha aad usoo sahay qaadato, boorkana iska soo jafto waayo guuli laguma gaaro meel fadhi ama xaglo laaban.

Waxaad ku dhex nooshahay qarni nolosha adduunyo lagu jaan gooyo maaddo. Bal eeg! Haddaad sabool tahay ama aadan ahayn guulayste magac leh waxaad arki doontaa in aan la tixgelin doonin qofnimadaada iyo milgahaaga, laakiin haddaad tahay qof hantiile ah ama magac iyo muuno u saaxiib ah waxaad arki doontaa iyada oo ay dadku kuu sacbinayaan, kuuna adeegayaan. Haddase, sababtu maxay tahay?

Nin hal-abuur ah ayaa isaga oo ka hadlaya bulshada iyo sida ay u qiimeeyaan qofka taajirka ah, wuxuu yiri:

*“Hobeey lacageey hobeey lacag  
Ninkii haya wey u hadashaa  
Waa hoobal hadduu hantaataco  
Hed uu jaro waa u hawl yari”*

Bal adiguba garo sirta ku jirta guushii *Michael Jordan*<sup>4</sup> oo ahaa shakhsigii ugu haldoorsanaa ciyaaraha kubadda kolayga ee dalka maraykanka. Wuxuu bilgoosad (mushaar) ahaan u qaadan jiray sannadkii in kabadan 15 milyan oo doollar. Ma kula tahay in uu ku gaaray heerkaas meel fadhi? Michael Jordan wuxuu yiri “In badan ayaan ku fashilmay oo aan ku fashilmay geeddiggii

---

<sup>4</sup>C iyaaryahan hore ee ciyaarta kubadda kolayga, waana milkiilaha shirkadda Charlotte Bobcats, wuxuu u dhashay dalka maraykanka.

noloshayda, taasina waa sababta aan u guulaystay.”

Bal eeg! *Mo farah*<sup>5</sup> waa shakhsi ku soo caan baxay ciyaaraha oroddada, kuna guulaystay billado badan. Wuxuu nolosha ka soo billaabay meel hoose ilaa uu ka gaaray heer sare, kana noqday xiddig magac weyn usoo jiiday dalka ingiriiska. Balse adiga iyo Mo farah maxaad ku kala duwan tihii?

“

**Guusha waa abaalmarinta halgamaaga**

**balse waxay filasho u tahay kan aan**

**jamasho lahayn”**

\* \* \*

Ma isleedahay meel fadhi ama xaglo laaban ayuu ku gaaray guusha? Ma u malaynaysaa in guushu ay iska timaaddo iyada oo aan loo halgamin? Kolaytaba waad dhiman doontaaye, ha dhiman adiga oo sabool ah, gaajaysan, sidoo kale guuldarraystay. Balse taa caksigeeda ku dhimo gobannimo iyo guul. Ahmed shawqi, wuxuu leeyahay xikmad qiima badan, taas oo oranaysa “Himiladaada laguma gaaro filasho keli ah balse waa loo halgamaa.”

Iga hoo farsamo yar, oo haddii aad adeegsato ugu yaraan aad ku liibaanayso. Soo qaado buug yarowgaaga, ka dibna ku qor warcelinada weyddiintan: Maxay tahay waxa aan doonayo in

---

<sup>5</sup>Maxamed Faarax waa orodyahan Somaali ah, oo orda oroddada 1500m 3,000m 10,000 5,000m haystana dhalashada dalka Ingiriiska.

aan xaqiijiyo hiigsiga fog? Hoosteeda waxaad ku qortaa oraahdan: *Haddii waxa aan doonayo in aan gaaro ay dad horay u xaqiijiyeen, aniguna waan xaqiijin karaa, balse haddii aysan jirin dad horay u xaqiijiya, waxaan noqon doonaa qofkii ugu horreeyay ee ambaqaada.*

Akhriso, kuna celceli ammin walba oo aad fursad u hesho akhrinteeda. Haddii aadan isu akhrin himiladaada maalin walba ugu dambayn waxay isku beddeli doonaan filasho, filashaduna waxay summad u tahay qofka aan jamasho lahayn.

**“  
Guul aan fulin lahayn waa eber”**

\* \* \*

Ma isleedahay guuli waxaa lagu gaaraa filasho iyo xaglo laaban? haddee sidaas kula tahay, ku baraarug! In guushu tahay abaalmarinta ruuxa halgamaaga ah, balse ay rejo u tahay qofka aan jamasho lahayn.

Sida aad ku arki doonto buuggan gudahiisa, guushu ma aha mid si fudud ku timaadda, mana aha mid lagu gaaro meel fadhi, laakiin waxay u baahan tahay waqti, dadaal, go'aan adag, rumaysasho, adkaysi iyo in aad wax ka beddeli karto fekerkaagii hore waa haddii naftaadu aysan helin wixii ay ku hamminaysay ama aysan gaarin yoolkeeda.

Guushu waa ciyaar u baahan in lala socdo goor walba, sidoo kale waxay u baahan tahay in aan laga daalin, lagana wahsan raadinteeda. Guuli lama suge waa lala socdaa; iskama timaaddee waa

la baadigoobaa. Abwaan Hadraawi ayaa gabaygiisa ‘gudgude’ ku xusay in guusha lala jiro, wuxuuna yiri: *“Guushaada waa lala jiraa, gees haka abaannin; goddobaada meelee intaan gacanta kaa boobin; gacalnimada noolee intaan gocasho kaa oodin.”*

Dadka qaar waxay iska sugaan guusha sida in ay cirka uga imaanayso oo kale, mana ku baraarugsana in guushu tahay wax u baahan: qorshe, fal, tab iyo xeelad.

“

**Guushu waa socdaal aan dhammaad**

**lahayn”**

\* \* \*

Hubanti, qofka raba in uu guulaysto waa u muhiim in uu marka hore barto sida loo guulaysto. Taasi waxay ka caawinaysaa in maankiisu uu u furo weyddiimo dhowr ah sida: Anigu ma ogaan karaa waxa aan u baahannahay? Maxaa muhiim ii ah maxaase ii ahayn? Si aan u noqdo guulayste liibaanay maxaa la iga doonayaa?

Tusaale, qofka guryaha dhisa ee aynu u naqaano fuundi (wastaad), wuxuu garan karaa wax walba oo ay uga baahan tahay shaqadiisu sida shamiindo, laamiyeeri, alwaax, musaabiir. Balse marka ay timaaddo ku guulaysiga mashruuca horumarinta nolosha waxaynu iska jecelnahay in aynu iska guulaysano annaga oo aan soo baran guusha laftirkeeda.

Dadka intooda badan waxay rumaysan yihiin in guushu tahay mid lagu gaaro ayaan iyo cawo (nasiib), haddase taasi ma run baa?

Tommy Newberry<sup>6</sup> oo ah qoraaga buugga ‘*Guusha ma aha lama filaan*’ wuxuu ku caddeeyay in guushu aysan ahayn wax mar keli ah iska yimaada, balse ay tahay natiijo ka dhalatay doorasho iyo sabab.

Sideedaba, macnaha guusha iyo maansawireedkeeduba waxa aynu ku haysanaa maanka gudahiiisa.

Tusaale, markii aad jaamacadda dhammayso waxaad ku hamminaysaa in aad hesho shaqo, in aad guursato gabadhii aad nabdiga ku haysatay, in aad gadato guri iyo gaari. Iyada oo sidaas ah, haddana runta madaxbannaani waa in aadan weli helin wixii uu maanku mutuhinaayay. Laakiin waa gaari kartaa waa haddii aad u halganto, sidoo kale garato dulucda guusha aad dalbanayso.

## **Nuxurka Guusha**

Waa suurtagal in berito aad la kulanto qof hantiile ah ama magac leh, haddaba ma kula tahay in uu yahay guulayste liibaanay? Hubaal, ma la dhihi karaa waa guulayste? Wuxuu yiri Ray Terris: “*Mid ka mid ah dadka ugu hodansan ee aan weligay arkay wuxuu ka mid ahaa dadka ugu murugada badan.*”

Dad yar ayaa isku hawla raadinta nuxurka guusha, taasina ma aha mid laga helo hal meel oo keli ah, ee waxay dhacdaa xerooyinka kala duwan

---

<sup>6</sup>Tommy Newberry: qoraa, khudbad-jeediye, wuxuu u dhashay dalka maraykanka.

ee nolosha sida nafta, qoyska, waxbarashada, shaqada, bulshada iyo diinta.

Bal eeg shaxda hoose ee aan adiga kuugu talaggalay, waa meelaha la rabo in aad diiradda saarto. Haddii aad rabto in aad xaqiijiso guul dhammaanteed waa in aad marka hore tixgelisaa qaybaha kala duwan ee saameyn kara nolosha.

Isku dheellitir, sidoo kale u soo kala hormarso sida ay kuugu kala mudnaan badan yihiin, iskunadday in qayb walba aad guul ka gaarto.

<b>Nafta</b>	<b>Shaqada</b>	<b>Waxbarashada</b>
<b>Qoyska</b>	<b>Bulshada</b>	<b>Diinta</b>

Abwaan Hadraawi oo ka mid ah abwaannada Soomaaliyeed kuwooda ugu caansan, ayaa maansadii *Hablaha Geeska Afrika* wuxuu ku tilmaamay guushu in ay tahay sida tan:

*Kuma galo adduunyada  
Nina gooni socodkoo  
Marwo Garasho dheer baa  
Ninka raga u gudino  
Iyadaa guddoonkiyo  
Gadh-hayaa naftaadiyo  
Gaadiidka reerkiyo  
Gurgurshaaga noqotoo  
Arrin kula gorfaysee,  
Haddaan gaari kula jirin  
Ilayn noloshu guul ma leh*

Markale, Abwaan ku maansadii gudgude wuxuu ku xusay in gobannimadu tahay guusha weyn,



wuxuuna yiri: “*Gobannimadu waa libin ku taxan geeddi nololeede; waa gumaro aadamigu hantiyo guusha ugu weyne.*”

Abwaan Cali Sugulle, isagana guushu wuxuu ku sifeeyay sidan: “*Diric keli abaantii daleel guusha kama helo; dadkaa geesi lagu yahay.*” Abwaanku, wuxuu tilmaamayaa in guushu aysan ahayn mid lagu helo dheel iyo meel fadhi, balse u baahan tahay shaqo adag iyo in aad kasban karto bulshada aad ku dhex nooshahay.

Dhanka kale, Sayid Maxamed Cabdulle Xasan oo ka mid ah abwaannada Soomaaliyeed kuwooda ugu caansan, isagana guushu wuxuu ku sifeeyay: “*Eebow anaa kugu gar lebe guusha ha i seejin.*”

Haddaba, markaad u fiirsato sida ay abwaannadu u kala adeegsadeen kelmedda guul, waxaad ogaanaysaa in guushu tahay wax aan hal meel oo keli ah ku koobnayn balse laga helo meelo kala duwan. Tusaale, Abwaan Hadraawi guusha uu tilmaamay waxay ku saabsanayd qoyska waayo marka uu leeyahay: “*...Haddaan gaari kula jirin ilayn noloshu guul maleh.*” Taasi oo macnaheedu tahay guusha qoyska waxaa saldhig u ah haweenta suubban oo gurigeeda iyo nafteedaba daryeesha.

Sayidku, marka uu leeyahay “*Guusha ha i seejin,*” wuxuu rabay in uu dagaalka kaga guulaysto gumeystaha ingiriiska oo dhulka Soomaalida soo weeraray, sidaas ayuuna Eebbe uga baryay in uusan seejin guusha. Haddaba, guusha uu

abwaanku tilmaamay waa mid ku kooban fagaaraha dagaalka.

Dadka qaar ayaa guusha ku cabbira maaddo sida lacag, hanti iyo waxyaabaha lagu raaxaysto halka ay jiraan dad kale oo u arka in ay tahay wax aan maaddo ahayn sida farxadda, caafimaadka, xasiloona maskaxda iyo ku qanacsanaanta nolosha.

“

**Ha isku shuqlin raadinta macnaha guusha  
balse u yeel noloshaada macne iyo hiigsi”**

\* \* \*

# 2

## XEERARKA GUUSHA

**X**eerka Jamashada waxa uu bar billaabasho u yahay dhammaan guul walba oo la xaqiijiyay. Waxay la mid tahay xikmadda ah “dab yar kuleel badan ma bixin karo.” Sidoo kale, haddii ay jamashadu<sup>7</sup> yaraato guuli yaraatay. Macnaheedu waa haddii aadan ahayn qof ku dhiiran u samaynta shay walba dhanka yoolkiisa, sidoo kale aan adeegsan dareenka jamashada, una boholyoowin guusha aad dalbanayo waxaad noqonaysaa col hostiis jabay. Haddaba, taa caksigeeda waxaad ku dadaashaa in aad noqoto qof u diyaarsan gaaritaanka hadafkiisa, maskaxdiisuna ay ka daaran tahay dareen jamasho.

---

<sup>7</sup>Jamasho: waa arrin naftaadu in badan hilaadisey gaariddeeda, sidoo kale waa walax naftaadu rabto iney mar un taabato.

Dan Gable,<sup>8</sup> orodyahanadii hore ee ciyaaraha olombikada, iyada oo ka hadlaysa guusheeda waxay tiri “Markii aan daalo waxaan jeclaystaa in aan joojiyo orodka, laakiinse... markii aan arko qofka ila tartamaya oo igu soo dhow waxaan hor u sii riixaa naftayda, aniga oo aad u sii dheereenaya.” Cadaadinta ka timaadda dareenka jamashada waxay qofka u diyaarisa guul, sidoo kale qofka aan jamasho lahayn way ku adkaanaysaa in uu gaaro himiladiisa maadama aysan jirin wax laabtiisa shidaya.

Abraham Lincoln wuxuu yiri “Waa suurtagal dadka caajisan in ay wax helaan balse waxay helayaan wixii dadka firfircooni ay gadaal kaga soo tegayn.” Gaariga maxaa dhaqaajiya? Jawaabta maangalka ah, sow ma aha kuleelka ka soo baxay matoorka.

“

**Jamashadu waa dab dhaqaajiya**

**maskaxda”**

\*\*\*

Waxa aynu wada ogsoonnahay in biyuhu yihiin dareere marka heer kuleelku gaaro sagaashan iyo sagaal derajo (99cc) ama in ay noqdaan hoor marka heer kuleelku gaaro boqol derajo (100cc). Marka biyuhu joogaan marxaladda hoorka waxay dhaqaajin karaan matoorka loo yaqaano (Steam Engine), oo koronto siin kara magaalooyinka waaweyn.

---

<sup>8</sup>Dan Gable: waa orodyahanad hore ee ciyaaraha olombikada, tababare, una dhalatay dalka maraykanka.

Markaad fiiriso labada marxalad ee biyaha, hal derajo un baa u dhexeysay, laakiin waxay ku kala sarreeyeen wax qabadkooda. Sidaa si lamida, qofka jamashada leh waa qof dab leh, wax qabadkiisu sarreeyo halka qofka aan lahayna uu la mid yahay dab aan kuleel lahayn. Napoleon Bonaparte wuxuu leeyahay xikmad aad u qiima badan, taas oo oranaysa “Haddii buuraha dhaadheer ee Alba iga hor-istaagaan in aan horumar sameeyo waa in dhulka lala simaa.” Haddii guusha aad dalbanayso ay kaa hor-istaagaan culeys la’eg kan buuraha dhaadheer ee himilaaya maxaad fali lahayd?

Hendry ford<sup>9</sup> oo ahaa aasaasihii shirkadda Ford Motor Company, oo mar noqotay hormuudka shirkadaha soosaara baabuurta. H. Ford, wuxuu ahaa nin yool iyo jamasho isku darsaday, wuxuu go’aansaday in uu billaabo mashruuc lagu soosaarayo v-8 Motor (waa matoor siddeed bustun leh), kaas oo noqon doona kii ugu horreeyay ee dunida lagu soo kordhiyay.

Wuxuu isku keenay dhammaan Injineeradii ka dib wuxuu wargeliyay in uu rabo in uu soosaaro matoor siddeed bustunle ah. Injineeradii waxay ku dhaheen suurtagal ma aha. Balse H. Ford wuxuu ku adkaystay go’aankiisi, wuxuuna ugu jawaabay wax walba ha idin ku qaadate, ii sameeya matoorkaas.

---

<sup>9</sup>Hendry Ford: waa ganacsade, waana aasaasaha shirkadda soosaarta baabuurta ee Ford Motor Co. Una dhashay dalka maraykanka.

Wuxuu sii raaciyay in ay shaqadaasi qaban doonaan ilaa inta ay ka guul gaarayaan. Injineeradii waxay gudaggalayn shaqadii, waxba way soo kordhin waayeen. Waxay iskuddayeen in ay sameeyaan qorshe walba oo ay ku fulin karaan hawshaas, laakiinse arrinkoodii wuxuu ku biyoshubanaayay kelmeddii ahayd suurtagal ma aha!

Waxay u sheegeen in aysan weli helin waddo ay ku fulin karaan go'aankiisa. Wuxuu ugu jawaabay "Waan u baahannahay matoorkas waana heli doonaa." Ammin dheer kama soo wareegan waxaa la kashifay sirtii daahsoonayd; yacni waxaa lagu guulaystay soosaarista matoorkii.

Qof walba wuxuu leeyahay himilooyin u gaar ah, laakiinse waxaa lagu kala dheereeyey sida uu qof walba u jantay (jeclaaday) guusha u ballansan ee markaasi ku haminayo gaaristeeda. Sideedaba, qofka baadigoobaya guuli waa in uu yahay qof ku baraarugsan in aysan jirin qof aan waxba qabsan karin keli lagu kalategay rabitaanka xooggan ee uu qofku u qaadayo himilada uu markaasi hiigsanayo.

Ka warran haddii naftu ay jeclaato shay, weliba si daran u jeclaato sow ma adkaanayso in aad iska seexato adiga oo aadan helin shaygaas? Si kale u dhig, hawl lagu diray haddii ay wax kaa khaldamaan maxaad samayn lahayd? Hubanti, ma aadan seexan lahayn ilaa inta aad ka saxayso hawshaas, oo aad ka dhammaystirayso. Haddaba, maxaa laabtaada shiday oo hurdada kuu diiday?

## Jamasho iyo Hiyi<sup>10</sup>

Shiikh Ismaaciil oo muddo boqol sano laga joogo gabay ku cabbiray hummaagga ay jamashadu leedahay wuxuu yiri:

*Xalay waxaa isniintii i belay toban ammuuroode,  
Asal gama'na ways idhi hadana uurka kama seexan,  
Indbahana ma kala qaadibayn aragna way muuqday...  
Oon baa idilay oo biyaan ku ag wareegaayay.*

Dareenka jamashada <sup>11</sup> waa mid ka mid ah marwaxadaha dhaqaajiya maskaxda; una fiiro marwaxadda iskama wareegato ee waxaa dhaqaajiya quwadda korontada, sidoo kale maskaxda bini'aadamku waxay leedahay awood ku fadhida dareen sida korontada oo kale ah, waxaana lagu dhaqaajin karaa wax walba oo ay maskaxdu jamatay.

Jamashadu waa dareen dhaqaajiye ka shidan maskaxda gudaheeda, waxayna qofka u riixdaa in uu fal sameeyo si uu uga dhabeeyo waxa uu markaasi xiisaynayo. Si kale u dhig, dabka sida uu u kala kulul yahay ayuu u kala saameyn badan yahay, sidoo kale qof walba sida uu u xamaasad iyo jamasho badan yahay ayuu wax qabadkiisuna u badan yahay.

Jamashadu waa shidaal ku kaydsan maskaxda, waxay adeegsataa keli markii aad dalbato. Tusaale, waxaad u baahatay xaqiijinta shay, waana mid ku xiran yoolkaaga, haddaba markaad naftaada ugu

---

<sup>10</sup>Xamaasad.

<sup>11</sup>Kelmedda jamasho: Dareen xooggan oo nafsani ah oo ka dhasha dhacdo beerqaad leh oo qofku muujiyo farxad, jidbo, yaab iwm.

sheekeyso in yoolkaas la'aantiisa aysan waxba kuu soconayn, waxaa la arkaa in maskaxdu ay adeegsanayso jamasho iyo xamaasad si loo xaajiiyo wixii aad dalbatay.

Awoodda xamaasadda iyo jamashadu leedahay waxaa fahmi kara dhallinyarada daawada ciyaaraha. Ka soo qaad in habeen dambe ciyaaraha jaambiyoonka ee fiinaalka ay wada ciyaari doonaan kooxda *Chelsea iyo Real Madrid ama Manchester iyo Arsenal*. Xamaasadda haysa awgeed qaar ka mida dhallinyarada ma sugi karaan habeenkaas. Waxay dareemayaan xamaasad weyn, waxay janteen daawashada kulankaas darbiga ah. Maanta oo dhan niyadda ayay ku hayaan, lagama yaabo in ay dhaafto ciyaartaas, kaba sii daran ma xasishe naftooda ilaa ay ka daawadaan. Maxaa keenay in sidaas oo dhan ay ugu degdegaan daawashada kulankaas adag?

Bal iga hoo tusaale kale, adiga oo awalba buufis ku haayay ayaa lagu soo sheegay in uu kuu soo baxay leenkii kuu xaraysnaa, sidoo kale waxaa lagu keenay dhammaan waraaqihii dalkugalka ka dib lagu ogeysiiyay in berito aad ku qoran tahay diyaaradda *British Airways*. Sikastaba, habeenkaas ma seexan lahayd? Hubanti, habeenkaas oo dhan maskaxdaadu waxay suuraysan lahayd hummaagyo badan, iyada oo dhex dabbaalanaysa dareen ku dhisan riyaaq iyo yididdiilo, mana sugi karto inta uu waagu ka dillaacayo.

Maxaa sababay in aad seexan waydo? Maxaa habeenkaas ka duway habeenada kale?



Iskusoowadduub, si xamaasad leh u jamo himiladaada si aad u gaarto guusha aad dalbanayso.

Napoleon Hill ayaa buuggiisa *Fikir oo taajir noqo'* ku qoray sheeko ku saabsan Edwin C. Barnes. Edwin, wuxuu ka run sheegay riyadiisa iyo yoolkiisa isaga oo jantay in uu xiriir ganacsi la yeesho Thomas Edison. Tani waxay ahayd bilowgii riyadiisa, inkasta oo ay horyaalleen laba caqabadood: Midda koowaad, aqoon uma laha Thomas Edison, keli wuxuu maqlay magaciisa. Midda labaad, ma haysan lacag bas raac ah uu ku raaco tareenka si uu u gaaro magaalada uu joogo Thomas Edison.

Caqabadahaasi waa kuwa ay horistaagi karaan dad badan oo aan iskuddayga samayn lahayn. Hasayeeshe, fikirka samasheega ah ee ku dhisan jamasho iyo xamaasad waa awood aan la joojin karin. Haddii lagu daro yool ku dhisan go'aan, aaminaad iyo joogtayn waxaa la arkaa in aad si dhaqso ah isku beddelayso, yacni waxaad is arki doontaa adiga oo diiradda saaray, una jihataystay dhanka ay ka birqanayso himiladaada.

Edwin, wuxuu soosaaray hannaan awood badan leh, kaas oo u dejisan hab feker macquul ah oo qofka gaarsiin kara guusha uu markaasi baadigoobaya. Sidee ugu suuragashay in uu ka run sheego riyadiisa? Wuxuu go'aansaday in uu iska sooraaco tareenka, wuxuu yimid magaaladii uu joogay Thomas Edison, ka dib wuu la kulmay, waxaana dhexmartay sheeko.

Thomas Edison, isaga oo ka sheekeeynaya sida uu u arkaayay mawqifkii Edwin, wuxuu ku tilmaamay in uu ahaa nin firfircoon, wuxuu yiri “Waxaan ku arkay wixii aan isku arkay aniga oo yar, aad baan ugu farxay geesinnimadiisa iyo sida uu ugu dhiiraday in uu isoo horistaago ka dib iga codsaday in uu ila wadaago ganacsi.”

Sideedaba, waaya-aragnimadu waxay na-baraysaa wax badan waayo dabeecadahii lagu arkay Edwin waxaa horay u soo arkay Thomas, oo ah nin guushiisa la wada garanayo.

Waxaa jira laba arrin oo ay dadka intooda badan isku khaldaan, waana *jamasho iyo rabitaan*. Inkasta oo ay iskaga dhow yihiin dhanka qeexitaanka, haddana dulucda ayay ku kala duwan yihiin. Jamasho waa dareen xooggan oo lixaad leh, taas oo soosaarta jacayl beerqaad, waxayna qofka u yeeshaa awood dhiirrigelined, taas oo ku hagaysa waddada himiladiisu. Dhanka kale, rabitaanku waa dareen aan ku dhisneen jacayl xooggan oo nafeed, mana laha awood dhiirrigelined oo ay kuugu riixdo dhanka yoolkaaga.

Bill Bradley wuxuu yiri: “Damacu ama doonistu yoolkaaga waa waddada aad usii marayso guusha, gaadiidka aad saaran tahayna waa dulqaad.” Haddii aad yool leedahay, jamashaduna weyn tahay, adkaysiguna gaadiid kuu yahay waa hubanti in aad si degdeg ah ugu guulaysanayso guusha aad dalbanayso.

Culummada dursa maskaxda iyo sida ay u shaqeyso waxay sheegaan in wadashaqeyni ka dhexeyso garaadka dahsoon (caqliga daahsoon), jamasho iyo hiyi (xamaasad). Sidoo kale, jamasho iyo hiyi, labaduba waxay awood u leeyihiin in ay hurdada ka toosiyaaan garaadka dahsoon, mar haddii yoolkaagu uu gaaro caqliga dahsoon wuxuu noqonayaa mid dhaqangalay, waayo wixii loo dhiibo ma lumiyo ee wuu kaydiyaa. Sidoo kale, wuxuu leeyahay awoodda qarsoon, taas oo qofka siin karta baalal uu ku duulo waa haddii uu u baahdo.

Sikastay-ahaataba, iga hoo dhowrkan sababood ee aad ku xaqiijin karto guusha:

- Garo faa'iidada uu kuu leeyahay waxa aad doonayso.
- Ka sheekeey oo aburoo hummaag maskaxeed kusalaysan waxa aad baadigoobayso.
- Weligaa fadhiga ha ku sugin dhanka waxaasi kaa jiro.
- Maankaaga ka dhaadhici in aad u qalanto helidda wixii aad ku raad joogtey.
- Layli oo maskaxdaada u bandhig, iskuna akhri waxa aad rabto laba ammin: markaad seexanayso iyo markaad soo toostaba.

## **Xeerka Rumaynta**

Haddii aad rumaysan tahay in aadan gaari karin yoolkaaga ma gaari doontide ogow, laakiin haddii aad rumaysan tahay in aad ka dhabeyn karto guushaada waad ka gungaari doontaaye la soco. Si aad u gaarto yool walba waa in aad marka hore rumaysataa, sidoo kale dhaqangalisaa xeerkan adiga oo raacaya tallaabooyinka iyo talooyinka uu buuggu kuu tilmaami doono.

Waxaad haleeli doonto yoolkaaga waa haddii aad isku kalsoon tahay boqolkiiba boqol, sidoo kale u bandhig maskaxdaada hummaag muujinaya adiga oo gaaray yoolkaagii. Islamarkiiba, maskaxda ayaa la qabsan doonto hummaagaas ka dib iyada ayaa u beddeli doonto mid run ah.

Rumaynta himiladaada waa awoodda labaad ee maskaxda siin karta kalsooni buuxda. Markaad rumayso in aad wax qaban karto ayay maskaxdu helaysaa awood badan iyo kalsooni ku filan, waxayna isku hawli doontaa sidii ay u raadin lahayd hummaagyadii qurxoonaa ee maskaxdu sawiranaysay.

Dr. Murphy wuxuu yiri “fekrad walba waa sabab; xaalad walba waa natiijo.” Haddaba, ma sawiran kartaa adiga oo ku guulaystay yoolkii aad dhigatay? Intaad dhowr daqiiqo indhaha isku yara qabato niyeeso adiga oo xaqiijiyay, kuna guulaystay yoolkaagii. Sidoo kale, iskudday in aad maskaxdaada ku dhex abuurato hummaag maskaxeed ka tarjumaya waxa aad dareemayso, guusha aad dalbanayso iyo sidii ay nolosha isku beddeli lahayd waa haddii aad xaqiijiso yoolkaaga.

In aad sawirato keli looma baahna, waxaa kaloo loo baahan yahay in aad samaysato dareen ku dhisan dhaqdhaqaaq sida adiga oo haysta isteerinka gaarigii aad ku hamminaysay, weliba adiga oo ku socdaalaya waddada Maka Al-Mukarama, una socda xafiiskaaga shaqada ama xeebta liido.

Joogtayso hummaag maskaxeedkaas ilaa ay maskaxdu kala qabsato, kana soosaarto awooddii kugu kaydsanayd. Haddii aad sidaas fasho waxaa la hubaa in maskaxdu ay si xoog leh u rumaysanayso, iyada oo kaa caawin doonta sidii aad ku xaqiijin lahayd himiladaada.

### **Xeerka Maaminta**

Kelmedda maamin waa talo maskaxeed aad ku caddeynayso aragtida aad ka qabto laba arrimood ama arrin kuu muuqda, adiga oo maaminaya in aad kala saarto habka iyo heerka kala duwanaanshaha. Tusaale, haddii wax lagaa weyddiiyo aragtidaada ku aaddan dheefta iyo khasaaraha Hantiwadaaga iyo Hantigoosadka, adiga oo raacinaya midka aad taageersan tahay labadooda. Si kale u dhig, waa awoodda garashada dadka (maan-adeegsi) si aad u gaarto ama u ogaato sida arrin cid ugu muuqato iyo kaalinta ay ka taagan tahay.

Beri baa nin waxaa ka lumay geel, waxaana ugu tiillay summad. Waxaa la weyddiiyey maxaad fali lahayd haddii aad aragto geelaagii oo xero kale ku jira? Isaga oo aan is dhibin ayuu si habsami leh u maamiyey aragtidiiisa, wuxuuna ku warceliyey

“Nin iyo baadidii aragti baa ka dhexeysa.” Maamintu waa fekrad, mabda' iwm oo cidi rumaysantahay taas oo kusalaysan qawaaniin u gaar ah. Dhanka kale, waxaa iskudhow maaminta iyo mawqifka, kan dambe waa sida aad u aragto waxyaabaha kugu hareeraysan.

Beri baa shimbir geed saaran weyddiisay su'aal shinni ku hawlanayd samaynta malabka, waxay ku tiri “Waxaad maalin walba samaysaa malabka laakiinse bini'aadamka ayaa kaa qaata ama kaa xada miyaana arrinkaasi ka xumaanayn oo aysan kugu reebin murugo?” Shinnidii waxay tiri “Maya marnaba ima murug gelayso arrinkaas, maxaayeelay bini'aadamka malabkayga oo keliya ayuu qaadanayaa balse igama qaadan karo aqoonta iyo farsamada aan ku soosaarto malabka.”

Sheekadu, waxay na-baraysaa mawqifka iyo maaminta wanaagsan ay shinnidu leedahay, marna ma aysan u joojin shaqadeeda waxa uu bini'aadamka ku samaynayo, taasina waa go'aan qaadasho ku dhisan maamin sugan.

Mawqifkaaga samasheega ah wuxuu kaa caawin karaa sidii aad ugu guulaysan lahayd himiladaada, taas oo ugu dambayntii kugu hanuunisa garashada ku aaddan in *hannaanka aad u fekerayso uu yahay habka aad wax u qabanayso.*

Haddii aad joogtayso xeerkan iyo mawqifka samasheega ah, adiga oo aadan u aabbayeelin xaaladda aad hadda ku sugan tahay iyo meesha aad joogto waxaa la hubaa in guushu ay iyadu ku soo raadin doonto intii aad adiga baadigoobi

lahayd. Sidoo kale, haddii aad ku guuldarraysato ku dhaqanka xeerkan waxaad fishaaba waa guuldarro.

Inkasta oo guuldarrada laftirkeeda wadato dheefteeda, haddana waa lama huraan in aad cashar ka barato ilduufyadaadii hore, maxaayeelay iskuddayga labaad lagama yaabo in aad dibusooceliso isla gafkii hore. Waxaad heli doontaa waddo ka duwan tii hore. Waa halka murtidu inaga farayso: *“Dabkii lagu xanuunsado faruhu kuma dirnaadaan.”* Waxaa kale oo jirta hawraar dhahaysa: *“Guuldarraa guul dhalisa.”*

Ujeedku ma aha in aan kugu dhiirrigeliyo in aad raadiso guuldarro, balse waxay iga tahay in aan kugu baraarujiyo in guuldarrada laftirkeeda ay kuu tahay cashar.

Charles Dickens ayaa ku qoray buuggiisa (*Filasho Weyn*) sheeko ku saabsan nin xabsi ku jiray sannado badan. Markii uu dhammaystay xabsiga, wuxuu ka soo baxay qolkii yaraa ee mugdiga badnaa. Balse markii uu bannaanka u soo baxay ayuu eegay hareeraha iyo iftiinka qorraxda oo ay mar hore ugu dambaysay. Ma jeclaysan, durbadiiba wuxuu codsaday in dib loogu celiyo xabsiga, wuxuu yiri “Mugdigaas iyo qolkaas yar ayaa iiga raaxo badan bannaanka aad ii soo saartayn.”

Haddaba, sheekadu waxay inoo tilmaamaysa in dadka qaar aysan jeclayn isbeddelka walow dheefba ha ugu jirte.

Iga hoo tusaale ku saabsan xiriirka ka dhexeeya maaminta wanaagsan iyo nolosha. Ka warran haddii xarfahaan:

ABCDEFGHIJKLMNOPQRSTUVWXYZ

**ay la'eg yihiin**

2345678910111213141516171819202122232425

26

Raadi kelmed walba oo aad isleedahay wuxuu nolosha ku yeelan karaa saamayn dhan boqolkiiba boqol.

Tusaale,

**Koowaad:** kelmedda shaqo adag (Hardwork).

H+A+R+D+W+O+R+K

=

8+1+18+4+23+15+18+11= 98%

**Labaad:** kelmedda aqoon (Knowledge).

K+N+O+W+L+E+D+G+E

=

11+14+15+23+12+5+4+7+5= 96%

**Saddexaad:** kelmedda ayaan ama calaf (Lucky).

L+U+C+K+Y

=

12+21+3+11= 47%

**Afaraad:** kelmedda lacag (Money).

M+O+N+E+Y

=

13+15+14+5+25= 72%

**Shanaad:** kelmedda maamin/mawqif (Attitude).

A+T+T+I+T+U+D+E

=

1+20+20+9+20+21+4+5= 100%

Maaminta wanaagsan iyo mawqifka samasheega ah wuxuu saamayn dhan boqolkiiba boqol ku



yeelan karaa nolosha, taas waxay ku tusinaysaa muhiimmadda ay leedahay in aad mar walba lahaato hab maamineed samasheeg ah.

Si kastaba, nolosha waxaad halbeeg uga dhigtaa xeerkan, haddii aad sidaas fasho waxaad ogaanaysaa in noloshu ay u qaybsan tahay laba:

1. *Mawqifka aad istaagto xilliga aad ku dhax jirto barwaaqada nolosha.*
2. *Mawqifka aad qaadata xilliga aad wajahayso dhibka nolosha.*

Labadaas maamin oo la isku geeyo ayaa waxay go'aamiyaan guusha iyo guuldarrada.

Waxaa jirta sheeko ku qoran buugga *Xeerka Guusha* ee uu qoray Napoleon Hill. Waxaa gubtay bakhaar weyn oo ay ka buuxeen alaabta khalabka dhismaha iyo agabyo tiro badan. Waxaa iska lahaa koox ganacsato ah oo deganayd magaalada Jikaago (Chicago) ee dalka maraykanka. Waxaa hawada qabsaday qiika iyo holaca ka soo baxay bakhaarka, dadkii oo dhan ayaa isku soo baxay si ay u daawadaan. Ganacsatadii bakhaarka lahayd waxay go'aansadayn in ay magaalada ka guuraan, ganacsi kale ay billaabaan magaalo kale. Hasayeeshe, ganacsatadaas waxaa ka mid ahaa Marshall Field oo ka maamin ama mawqif duwanaa, wuxuu go'aansaday in uusan ka guurin magaalada, sidoo kale goobtii gubatayna in uu bakhaar kale oo cusub ka furo. Wuxuu maankiisa ku dhax sawirtay hummaag maskaxeed la xiriira isaga oo bakhaar weyn ka dhistay, sidoo kalana ay ka adeeganayaan dadka magaalada.

Hummaagii uu Marshall Field maskaxdiisa ku dhex sawirtay run maysan ahayn, balse sannado ka dib ayay run isku beddeshay. Maamintiisa wanaagsan waxay u horseeday in uu khatarta u bareero, sidaas ayuuna ku guulaystay. Goobtii gubatayna wuxuu ka furay bakhaar weyn.

Bal aan kula wadaago sheeko kale oo iyadana xiiso leh. Burburkii dalka ka dib, waxaa dhacday nin dhallinyaro ah oo ka mid ahaa ardaydii Jaamacadda Lafoole. Qaxii iyo rafaadkii dalka ka dib ayaa wuxuu tegay deggaan miyi ah, halkaas waxaa ku noolaa walaalihiis oo nolosha miyiga ku kacaamay, taas mooye aan mid kale aqoon.

Ninkii wuu guursaday intii uu miyiga joogey, wuxuu guursaday isla gabar iyaduna magaalo kale ka soo qaxday. Waxaa loo sameeyay aroos, sidoo kale waxaa loo soocay xoollo u gooni ah sida geel, ari, awr. Wuxuu galay xisaab, wuxuu isu geeyay qiimaha guud ee xoolaha la siiyay, ka dibna waxaa usoo baxay inta uu raasamaal ahaan u haysto. Raasamaalkaasi wuxuu ka jaray mushaarka billaha ah ee uu siiyo xaaskiisa, waxaa usoo baxay in uu ku noolyahay qarash u dhigma hal sanno mushaarkiisa.

Wuxuu go'aan ku gaaray inuu xoolaha iibiyo, goob magaalo ah dego, aqoontiisa shaqo ku raadsado si xaaskiisa iyo ubadkiisana nolol tan ka duwan ku noolaadan.

Arrintaasi waxaa ka biyodiiday walaalihiis oo u arkaayay mawqifkiisa ku aaddan iibinta xoolaha in ay tahay cayrnimo iyo xoollokudheel, yoolkiisana waxay u arkeen mid riyo ah, oo aan wax mirodhal

ah keeni doonin. Sikastaba, wuxuu ku adkaystay mawqifkiisa, wuxuu iibiyay xoolihii gebi ahaan, ka dibna wuxuu u safray magaalo kale. Islamarkiiba, wuxuu furtay dukaan uu dhaqaalihii oo dhan geliyey, wuxuu u dhiibay xaaskiisa.

Muddo ka dib, wuxuu shaqo ka helay hay'ad gargaar oo dalka joogtay, taas oo uu markii dambe meel sare ka gaarey maamulkeeda. Wuxuu ka sameeyay dhaqaalle badan, wuxuu ka dhistey guri, kana iibsaday gaari, ugu dambayntiina wuxuu ka mid noqday ganacsatada magaalada. Ka warran haddii uu mawqifkiisa beddeli lahaa isaga iyo qoyskiisuba sow kuma noolaadayn tobanka halaad iyo kontonka ari? Balse arrintaasi wuxuu ka doorbiday mawqifkaiisa samasheega ah iyo saboolnimadii lagu cabsigelinaayay.

Sikastaba, haddii aad adigana iskuddayga samayso, yeelatana tiigsi wanaagsan shaki kuma jiro in riyadaada ay kuu dhaboobi doonto.

Marwalba oo aad samaynayso iskudday dooro kas hufan iyo maamin wanaagsan oo samasheeg ah, waxay had iyo jeer kaa caawin karaan sidii aad ku gaari lahayd guusha aad raadinayso.

## **Xeerka Sababta iyo Saamaynta**

Xeerkan waa mid qadiimi ah, waa mid ku dhisan sabab iyo saameyn, taas oo nuxurkeedu yahay in sabab walba ay soosaarto saameyn. Xeerkan waa mid loo riyaaqay waayo waa mid iska fudud, wuxuu ku siin karaa awood badan keliya u fur maskaxdaada.

Xeerkan wuxuu leeyahay sabab walba waxay soosaartaa saameyn. Tusaale, haddaad aragto Bill Gates iyo dadka la mida ha eegin inta ay la'eg tahay hantidooda balse raadi sababaha gaarsiiyay heerka uu maanta joogo, si aad u hesho sirta guushiisa. Xeerkan wuxuu toosh kuugu ifinayaa sirta ku jirta kuwa guulaystay iyo waddooyinkii ay soomarayn intii ay ku gudajireen halganka nolosha.

Xeerkan sababta iyo saameynta waa xeer soojireen ah oo ay dad badani horay ugu soo dhaqmayn, waana mid waligii jiray marka laga eego dhanka nolosha. Sow ma ogid in aysan jirin dhacdo bilaa sabab ah? Si kale u dhig, sabab walba in ay leedahay eel.

Waxaad beerato waa sabab waxaad guratana waa saameyn ka dhalatay sabab. Haddaad maskaxdaada ku beerato fekrado sabool ah maxay kula tahay in aad guran doonto? Waxaa kaaga soo bixi doona beer wada sabool ah waayo adiga ayaa beertay saboolnimada, laakiinse haddii aad ku beeran lahayd fekradaha wanaagsan ee samasheeega ah, wixii aad ka fishaaba waa in aad gurato beer wada barwaaqo ah.

Waxay la mid tahay maahmaahda ay beeraleydu adeegsadaan, taas oo ah “Wixii aad beerato ayaad gurataa.” Tusaale, haddii aad beertaada ku dhex abuurato masaggo wixii aad fishaaba waa masaggo, way adag tahay in aad gurato miro kale sida galeey ama moos, haddaba ka fikir wixii aad ku beeran lahayd beertaada, taas oo kuu ah garaadka ama caqliga daahsoon, kuna abuuro himiladaada si aad u gurato mirodhalkeeda. U adeegso xeerkan dhanka horumarinta nolosha, waxaa loo baahan yahay in aad maamusho, oo aad go’aan ka gaarto miraha aad beeranayso iyo kan aad guranayso.

“

**Waxa maanku dareemo waa in jirka**

**soo bandhigaa”**

\* \* \*

Waxa aan rabo in aan ku baro waa wax iska fudud, waa sidii aad noloshaada wax uga beddeli lahayd iyo in aad wax ka barato dhabbadii ay marayn dadkii guusha kaaga horreeyay. Waxaad joogtaa xilliga ugu fursadaha badan, waayo waxaad heli kartaa tusaallooyin badan oo ku saabsan shakhsiyaad guulaystay, horumar sameeyay, shirikaad waaweyn dhistay iyaga oo nolosha ka soo billaabay eber.

Bal eeg! Dalka maraykanka oo keli ah waxaa ku nool ku dhowaad toddoba milyan oo milyoneero ah iyo in ka badan laba boqol oo bilyoneero ah, intooda badan iyaga ayaa calankooda iyo sharafkooda kor u qaaday, hantidaasna iyagaa

tashiishay oo tabcaday. Balse aniga iyo adiga ma gaari karnaa meesha ay gaarayn? Ma noqon karnaa waxa ay noqdayn? Ma heli karnaa magaca ay helayn?

Fursaddaasi weli way bannaan tahay, keli wax ka baro khibradda noloshooda iyo waddadii ay u marayn guusha, si aad adigana u noqoto guulayste. Waxaan la yaabaa! dadka rumaysan in aan la gaari karin derajada uu gaaray Bill Gates oo lagu tilmaamo in uu yahay ninka ugu hodansan dunida. Miyeyaan ceeb kugu ahayn in aad samayn kari waydo wax ay horay u sameeyeen malaayiin guulaystayaal ah? Ogow! Waad fali kartaa, waadna gaari kartaa, ee kaalmayso dadaal iyo adkaysi.

Haddii aad marwalba samayso wixii aad horay u samayn jirtay, had iyo jeer waxaad helaysaa ama fishaaba mid la mida natijadii aad horay u heli jirtay, waayo way adag tahay in aad hesho natijjo ka duwan tii hore. Haddaba, si aad u hesho faa'iido weyn waxaad u baahan tahay in aad wax ka beddesho habka aad wax u qabanayso si aad u hesho natijjo aad ku faraxdo.

Beri baa waxaa jiray wiil yar oo hooyadii baari u ahaan jiray. Maalin maalmaha ka mida ayaa wiilkii yaraa waxaa canaantay hooyadii, canaan ka dib isaga oo xanaaqsan ayuu u soo cararay dhanka buuraha dhexdooda isaga oo dhahaya *WAAN KUNACAY HOOYO*. Markii uu gaaray buuraha dhexdooda, wuxuu maqlay cod ku soo laabanaya oo ka daba dhahaya *waan ku nacay hooyo*.

Wiilkii yaraa wuxuu dib ugu soo laabtay hooyadii, wuxuu uga sheekeeyay wixii uu buuraha

dhaxdooda ka soo maqlay. Islamarkiiba, way garatay codka uu soo maqlay, waxay ku tiri maandhow markale dib ugu laabo buuraha ka dib dheh *WAAN KU JECLAHAY HOOYO*.

Mar labaad ayuu dib ugu laabtay, isaga oo dhahaya *WAAN KU JECLAHAY HOOYO*. Durbadiiba, wuxuu maqlay isla codkii oo dib ugu soo laabtay oo ka daba dhahaya *maan ku jeclahay hooyo*. Mar labaad wuxuu u yimid hooyadii ka dib wuu uga sheekeeyay codkii uu soo maqlay. Inkasta oo ay fahamtay, haddana waxay doonaysay in ay barto xikmad.

Waxay u sharaxday codkii uu buuraha ka soo maqlay, waxay ku tiri hooyo codkaasi waa codka yabaqa (echo). Xikmadda ku jirta sheekada waxay qayb ka tahay xeerarka dabeeciga ah ee nolosha. Waxwalba oo aad ku hadasho ama aad samayso, ha noqdaan wanaag ama xumaan, labaduba waa sabab dib ayuuna qofka ka helaa miraheeda.

### **Xeerka Joogtaynta**

Waxaa jirta sheeko ka dhacday dalka shiinaha, waxay ku saaabsanayd geed ka baxa dalkaas oo lagu magacaabo Bambuu (Bamboo tree). Waxaa beeran jiray qoys beeraley ah, way daryeeli jireen, maalinwalba ayay waraabin jireen. Balse muddo afar sano ah dhulka muusan ka soo bixin. Markii la gaaray gu'gii shanaad ayuu mar qura dhulka ka soo baxay, wuxuu u koray sida geed afar sano baxaayey oo kale. Arrinkaasi waxay layaab ku noqotay dadkii tuullada degganaa iyo qoyskii

beeraleyda ahaa, waxayna noqotay sheeko xiiso badan reebtay.

Xiisaha ay sheekadu lahayd waxay tahay, qoyskii beeraleyda ahaa ee geedka waraabinaayey muddadii afarta sano ahayd isma dhiibin, kama caajisin joogtaynta ilaalintiisa iyo waraabintiisa. Sikastaba, sheekadu waxay na-bartay saddex shay oo guuloo dhan saldhig u ah, waxayna kala yihiin: *go'aan, dulqaad iyo joogtayn.*

Adeegso fekradda aan ugu magac daray 'fikir oo gadaal soo eeg! Waa fekrad awood badan ku siin karaysa waa haddii aad la qabsato oo aad dhaqangeliso. Waa hab feker ku dhisan dabeecad wanaag, la qabsi iyo joogtayn.

“

**Wax walba oo nagaada way miro dhalaan”**

\* \* \*

Samayso qorshe nololeed shan sano ah, abuur hummaag maskaxeed, soo qaado buug iyo qalin, markaas ka dib iskudday in aad maskaxdaada u diyaariso ka jawaabidda su'aalahan: sidee noloshayda isku beddeli lahayd? Maxaan qabsan lahaa? Shaqo noocee ah ayaan ka shaqeyn lahaa? Nolol noocee ah ayaan ku noolaan lahaa?

Sikastaba, u abuur noloshaada muuqaal ama hiraal ku dhisan waqti dheer, sidoo kale ku dhex abuur maskaxdaada hummaag la xiriira meesha aad hiigsanayso. Haddii aad sidaas fasho waxaad noqonaysaa qof dhiiran, sidoo kale u firfircoon xaqiijinta hadafkiisa.



Xeerkan joogtaynta ah waa waxa dadka guulaystay u sahashay, kana dhigtay kuwa ka duwan dadka kale. Isweyddii su'aasha ah imisa jeer ayaan joojiyay iskuddayga markii aan dhowr jeer guuldarraystay? Himilooyinka aad leedahay inta ay rabaan hala ekaadaan, markasta ogow in waddada guusha ay kaaga horrayso qodxo badan. Taasi waa qayb ka mid ah nolosha, haddaba iyada oo sidaas ah waa in aad u sahay qaadataa, sidoo kale soofaysataa faaskaaga sidii aad u xaqiijin lahayd yoolkaaga.

### **Xeerka Yoolka iyo Qorshaynta**

Yool waa aaladda ugu awoodda badan ee aad adeegsan karto kolka aad doonayso in aad xaqiijiso guusha aad dalbanayso.

Sidoo kale, waxay kaa caawinaysaa sidii aad diiradda u saari lahayd himiladaada, waxay kaloo ku siin kartaa dhiirraggelin iyo sidii aad u yeelan lahayd qorshe-fullineed aad ku xaqiijin karto hammigaaga sare.



Sawirka 2.1 Yool<sup>12</sup>

---

<sup>12</sup>Sawirkan waxaa laga soo xigtay:

Yoolku waa mid ka mid ah waddooyinka loo maro guusha. Haddaba, haddii aad doonayso in aad wax badan ka barato yoolka marka hore waa in aad heshaa macluumaad la xiriira samaysashada yoolka. Si aad u hesho macluumaadkaas ayaan jeclaystay in aan kula wadaago tusaallaha hoose.

Waqti ka mida waqtiyadii aan jaamacadda akhrisanaayay ayaan dareemay baahi aan u qabo xaajijinta laba yool oo kala ah:

1. In aan ka qalinqorto Jaamacadda.
2. In aan shaqo helo.

Xilligii aan dejisanaayay labadaas yool, dhammaystirka jaamacadda waxaa iiga dhimanayd shan bilood, taasi waa sababta aan u dhigtay yool ku dhisan shan bilood sida: Jannaayo, febraayo, maarso, abriil, iyo maayo. Markii aan dejistay, qortayna labadaas yool waxaan aamminay in aan gaari karo ka dib waxaan billaabay in aan ku dhajiyo darbiga, gaar ahaan meel aan ka arki karo si aan u akhristo habeenkii: ka hor inta aan seexan iyo subaxa hore markaan soo tooso.

Markaan akhrisanayo yoolkayga waxaan dhihi jiray “Waan gaari karaa.” Ka hor inta aan dejisan labadaas yool, waxaan ahaa qof ka xishooda goobaha shaqada iyo shaqo ugaarsiga. Waxaan naftayda ku dhihi jiray nasiibkayga ayaan suganayaa laakiinse wixii ka dambeeyay dhigashada yoolkayga waxaan noqday qof u dhiirran shaqo ugaarsi. Durbadiiba, waxaan billaabay olole shaqo raadin

ah, aniga oo aan soo gargaraaci jiray albaab walba oo la iiga sheego fursad shaqo.

Sikastaba, xiisaha ay sheekadaydu leedahay waxay tahay in aan xaqiiyay yoolkayga, weliba ku gaaray isla waqtigii aan ugu talaggalay. Shaqadii waan helay, jaamacaddiina waan ka qalinqortay.

Waxay igu noqotay lamafilaan waayo shan bilood gudahood ayaan ku helay shaqado aan waysanaa muddo laba sano ah.

Bal isweyddii dadka guulaystay maxaa caawiyay? Adiga oo nasiib u helay in aad buuggan ka akhrisato sheekadayda maxaa kaaga baxay? Garashada waddada guusha waxay kuu leedahay macne weyn maxaayeelay waxay ku tusinaysaa in aad garato barta ay ka birqanayso himiladaada.

“

**Noloshaba in aad saafto qaabayso saabkeeda**

**wax aan suuragelin ma aha”**

\*\*\*

Waxaa jirta cilmibaaris ay samaysay jaamacadda Harvard gu’gii 1970kii, waxay ku samaysay boqol qof, waxay siisay tababar ku saabsan sida loo dejisto qorshe-nololeed. Dhowr bilood ka dib markii uu tababarka dhammaaday ayaa kooxdii tababarka loo sameeyay la weyddiiyay su’aal ahayd ma jiraa qof noloshiisa qorshe u dejiyay? Saddex qof oo ka mida boqolkaas ayaa soo qortay qorshe-nololeedkooda mustaqbalka fog.

Labaatan sano ka dib ayaa saddexdii qof dib loo raadiyay, waxay jaamacadda soo ogaatay in boqolkiiba toddobaatan qorshehoodii ku

guulaysteyn. Ugu dambeyn, jaamacadda waxay soosaartay warbixin oranaysa dadka dunida ku nool boqolkiiba saddex ayaa qorshe iyo hadaf ku socda.

Abraham Lincoln,<sup>13</sup> wuxuu leeyahay xikmad qiima badan oo ku saabsan qorshe-dejinta, wuxuu yiri “Haddii hal saac ay igu qaadanayso in aan geed ku jaro afartan iyo shan daqiiqo ayaan faaskayga soofaysan lahaa.” Waxyaabaha ugu muhiimsan ee uu bini’aadamka gadaal dambe ka ogaaday waxaa ka mida, in qofku uu noqon karo waxa uu ka fikiraayo iyo waxa uu qorshaystay. Waa muhiim in aad mar walba diiradda saarto laba shay oo kala ah: In aad go’aan ka gaarto waxa nolashaada saameyn kara iyo in aad wax ka beddeli karto hab fekerkaagii hore haddii aysan naftaada helin natiijo ay ku qanacdo.

Waxaa jiray nin lagu magacaabo faarax, wuxuu ka shaqeyn jiray shirkad sameysa alwaaxda, jifka iyo alaabta guryaha. Faarax shaqadiisu waxay ahayd geedo jarow, maalin walba boqol geed ayuu soo jaraa, ku dhowaaad shan sano ayuu shaqadaas shirkadda u haayay, weligiisna lama dalacsiin.

Shirkadda waxaa ku soo biiray nin lagu magacaabo Cali, isagana waxay shaqadiisu ahayd in uu geedaha soo jaro laakiinse Cali sannad gudihiis ayaa lagu dalacsiiyay halka Faaraxna aan weli la dalacsiin. Tani waxay sababtay in Faarax uu ka hinaaso dalacaaddii loo sameeyay Cali oo ay hal shaqo wada qabanayeen, isaga oo shaqada

---

<sup>13</sup>Abraham Lincoln: waa madaxweynihii lix iyo tobanaad ee dalka maraykanka.

kaga soo horreeyay. Durbadiiba, wuxuu u tegay maamulihii shirkadda, wuxuu ku yiri “Aniga muddo shan sano ayaan shaqadan qabanaayay, weli la ima dalacsiin balse Cali oo sannad ka hor shirkadda ku soo biiray waad dalacsiiseen maxaa dhacday?

Wuxuu ugu jawaabay “Adiga weli waxaad jartaa tiradii aad muddo shan sano ah soo jaraysay, wax isbeddelna kaama aragno, shirkadduna waxay u baahan tahay qof wax soosaar leh.” Faarax dib ayuu ugu laabtay shaqadii isaga oo aan ku faraxsanayn jawaabtii la siiyay. Wuxuu iskuddayay in uu geedo badan soo jaro laakiinse iskuddaygiisii waxba muusan soo kordhin waayo wuxuu dhaafin waayay intii uu horay usoo goyn jiray. Isaga oo yaaban ayuu mar labaad dib ugu soo laabtay maamulihii shirkadda, wuxuu uga sheekeeyay dhibka haysta, maamulihii wuxuu ku yiri ma garan karo si aan u xaliyo dhibkaaga, balse weyddii Cali sida ay ugu suuragashay in uu geedo badan soo jaro.

Faarax wuxuu u yimid Cali, wuxuu weyddiiyay sidee kuugu suuragashay in aad maalin walba soo jarto tiro ka badan boqol anigana aan weli soo gooyo boqol geed? Cali, wuxuu ugu jawaabay way sahlan tahay waayo faaskayga ayaan soofaystaa ka hor inta aan shaqada soo gelin, markii aan hal geed jaro faaska ayaan soofaystaa, wax yar ayaan u nastaa haddana dib ayaan ugu laabtaa shaqada, sidaas ayaan sameeyaa ilaa waqtiga shaqada ay ka soo idlaato.

Cali, isagana wuxuu weyddiiyey goormee kuugu dambaysay in aad faaskaaga soofaysato? Faarax, wuxuu ugu jawaabay maalintii iigu horraysay ee aan shaqadan billaabay. Haddaba, taasi waa sirta ku jirta guushii Cali iyo guuldarradii Faarax.

Murtida ku jirta sheekada waxay tahay, shaqo walba oo aynu qabanayno waxaa jirta shaqo kale oo waajib ah in la qabto, waa qorshaynta shaqada laftirkeeda.

Dadyowga guulaystay intooda badan waxay ka fikirnaan, sidoo kale diiradda saaraan yoolkooda, mana gaabiyaan ilaa ay ka xaqiijiyaan. Buuggan, wuxuu ku siinaya tallaabooyinka la rabo in aad horuqaaddo si aad hoggaanka ugu qabato yoolkaaga, waxaa ka mid ah:

1. Go'aan adag ka qaado waxa kaaga qorshaysan qayb walba oo ka mida noloshaada iyo waxa aad doonayso in aad mustaqbalka fog ka guul gaarto.
2. Soo qaado buug iyo qalin ka dib qoro yoolkaaga adiga oo ka soo saaraya maskaxda, una soo gudbinaya gacmaha si ay ugu qoraan waraaqda cad ee ku hortaalla.
3. Kala qaybso yoolkaaga, qayb walbana u samayso waqti xaddidan adiga oo usoo kala hormarsanaya sida ay kuugu kala ahmiyad badan yihiin.
4. Tix waddo walba oo aad isleedahay waad ku gaari kartaa yoolkaaga, isku xir tixdaas, una samayso qorshe-fulineed ku dhisan go'aan adag.

# 3

## FIKIR OO DHIS GUUSHA

*“Guusha waxaa hela kuwa suga balse waxay garab martaa kuwa aan dulqaadka lahayn”*

Abraham Lincoln

**M**arwalba maankaaga ku dhex abuuro hummaag maskaxeedka guusha aad dalbanayso. Ku baraarug in aad tahay qof milge iyo karti leh, waxna qabsan kara. Waxaan rabaa in maskaxdaada aan kaaga furo shaashad yar oo aad ka daawan karto muuqaal laga sameeyey hummaaga ay maskaxdu soosaarto, taas oo aan ugu magac daray *‘Muuqaalaynta Jimicsiga.’* Si aynu isula jaanqaadno ama ugu kuurgalno hindisaha iyo shaxda ballaaran ee maskaxdu jeexayso, marka hore iskudday in aad ii oggolaato in aan kula wadaago dareenkaaga ku aaddan habka iyo hannaanka aad ku gaari lahayd hiraalka ku dhex sawiran maskaxdaada.

Balse in aad iga aqbasho oo aad tiraahdo haa waxay ku xiran tahay doorashadaad, taas oo ku tusin karta guusha aad u baahan tahay. Haddaba, si aad u daawato muuqaalaynta jimicsiga raac tallaabooyinkan soosocda:

## **1. Yeelo dareen xooggan oo ku dhisan guul jacayl**

Waxa aan rabo in aan ku baro way fudud yihiin, waa hab awood badan ku siin karta, sidoo kale aad ku soo jiidan karto guusha, ee diyaar ma u tahay in aynu bilowno daawashada muuqaalkaa?

Fadhiiso meel jawigeedu degan yahay, kana baaraandeg guusha aad u baahan tahay in aad hiigsato adiga oo isweyddiinaya:

- Waa maxay waxa aan doonayo?
- Maxaan aad ugu baahannahay?
- Haddii aan guulaysto maxaan faa'iidi doonaa?
- Maxay tahay ujeeddooyinka noloshayda?
- Miyaan doonayaa in aan ku noolaado nolol farxad leh mise waxaan doonayaa in aan ku noolaado nolol liidata, saboolnimo iyo gaajo huwan?

Markaad jawaab u hesho weyddiimahaas, ku qor waraaq cad, kuna dhaji darbiga gaar ahaan qolkaaga, weliba meel aad ka arki karto, iskuna akhri laba waqti: habeenkii ka hor inta aadan seexan iyo subaxa hore markaad soo toosto.

Keli ha akhrisan, balse iskudday in aad maskaxdaada ku dhex sawirato sidii ay naftaada isku beddeli lahayd haddii aad ku guulaysato



yoolkaaga! Ha sawiran oo keliya balse iskudday in aad si dhab ah u dareento.

Ma isku arkaysaa in aad tahay darawalka isteerinka u haayay hayaanka guushiisa? Waa sidee saadaasha kaa hor muuqata? Iskudday in aad ii falanqayso hirka iyo dooga hortaada ka bidhaamaya, quruxdiisa iyo ildoogsigiisa? Dareenkaaga u fur waxa ay naftaadu jeceshahay ee reynreyn geliya.

Mar kale, abuurto hummaag maskaxeed sida adiga oo jooga goobta aad dunida ugu jeceshahay in aad u dalxiisto, adiga oo haysta gaari kan ugu qaalisan, guri weyn, gabar bidhaan quruxsan iyo adiga oo dhex fadhiya xafiiska shirkaddaada, weliba adiga oo amar kala siinaya shaqaalaha shirkadda. Haddaba, hummaag maskaxeedkaas aad abuuratay wuxuu degi doonaa garaadka dahsoon ka dib naftu waxay ku dadaali doontaa sidii ay ku xaqiijin lahayd muuqaalka qurxoon ee aad sawiratay.

Joogtayso hummaag maskaxeedkaas muddo dhan hal bil, shaki kuma jiro in ay maskaxdu dalbanayso adeegsiga awoodda daahsoon, waxayna iskuddayi doontaa in ay raadiso barwaaqada iyo liibaanta aad sawiratay. Bal nafta u bandhig weyddiintan: Maxaa igu dhici kara haddii aan gaari waayo yoolkayga? Waxaad noqonaysaa dan yar marna wax hela marna waaya, dadka aktooda aan magac iyo muuno badan ku lahayn, duruufi ay ka muuqato, shaqo aan heli karin.

Dhanka kale, iskudday in aad maskaxdaada u bandhigto barwaaqada iyo liibaanta aad gaari doonto waa haddii aad ku guulaysato yoolkaaga. Ugu dambayn, haka daaalin in aad joogtayso daawashada muuqaalka jimicsiga waayo maskaxdu waxay leedahay waddo loo yaqaano marinka aqbalaadda, waana dhabbada keliya ee wax loogu gudbiyo caqliga daahsoon iyada oo la adeegsanaya *Xeerka joogtaynta*.

## **2. Ha ka cabsan guuldarro!**

Hubanti, in ay dhacayso in aad kufto oo aad kacdo balse looma baahna in aad kufto durbadiiba is-dhiibto. Dadka ka cabsada guuldarrada waxay lumiyeen fursadda guusha; haka baqan guuldarro balse u arag in ay kuu tahay bar bilowga guusha.

Runtii ma garan karo sabab aan uga cabsano guuldarro waayo guuldarradu waa qayb ka mid ah hannaanka aynu ku gaari karno guusha. Waa loo baahan yahay in aad fashilanto si aad cashar cusub u qaadato, waayo guusha waxaa hela qof u diyaarsan guuldarro balse dirac ah oo aan is-dhiibin.

Waxaa jirta murti oranaysa “Simbirtuba kama cabsato laanta ay saarantahay, iskumana halayso laanta balse garbaheeda ayay isku halaysaa.” Maxaad uga cabsanaysaa guuldarro? Haka baqan guuldarro, ku kalsoonow naftaada iyo awooddaada daahsoon. Bal aan kula wadaago sheeko

ku saabsan Stive jobs<sup>14</sup> oo ka mid ahaa aasaasayaashii shirkadda Apple. Sheekadu waxay ku magac dheer tahay *'isku xirka dhibcaba.'*

Stive Jobs wuxuu yiri weligay jamaacad ma dhammaysan, waan ka habsaamay waxbarashadaydii koleejka Reer. Siddeed iyo toban bilood ayaan koleej aadin, waxaan ka mid ahaa dadka waddooyinka ka qaraabata, cunto fiican ma heli jirin, asxaabtayda ayaan darbiyada la seexan jiray, haddaba maxaan koleejkaygii uga habsaamay?

Hooyaday waxay jecleeyd in aan koleej aado si aan wax u barto laakiinse maysan awoodin in ay iga bixiso lacagta koleejka. Waxay ka welweshay mustaqbalkayga ka dib waxay go'aansatay in ay i gayso goobaha carruurta lagu iibiyo si ay gacanta iigu geliso qoys lacag leh oo iga bixin kara qarashka koleejka. Nasiibwanaag, waxaan gacanta u galay qoys ladan oo hanti leh.

Toddoba iyo toban sano ka dib waxaan aaday koleejkii ay hooyaday ku riyoonaysay in aan mar un aadi doono. Lakiin lix bilood ka dib ayaan dareemay in aysan wax qiimo ah ii lahayn waxbarashada, waayo xilligaas wax fekrad ah kama aan haysan wixii aan qaban doono haddii aan koleejka ka qalinqorto, waana sababta aan u go'aansaday in aan joojiyo waxbarashada koleejka, waxaan dib ugu laabtay noloshaydii hore.

Isla xilligaas, waxaan rabay in aan shaqeysto waayo waxaan rumaysnaa in shaqadu ay iiga wanaagsan tahay waxbarashada. Markii aan koleejka ka

---

<sup>14</sup>Stive jobs: agaasinkii shirkadda Apple, suuq-geeye, hal-abuure, ganacsade, una dhashay dalka maraykanka.

habsaamay dib uguma laaban guriga, mana helin meel aan kaga gambado qabowga, asxaabtayda ayaan darbiyada la seexan jiray. Si aan cunto fican u helo waxaan maalin walba oo axad ah u lugayn jiray maqaayad toddoba mayl ii jirta, oo ku tiilay khalcadda *'Hare Krishna.'*

Nasiibwanaag, waxaan shaqo ka helay shirkadda Apple oo xilligaasi suuqa ku cusbayd, waxay arkeen sida aan ugu firfircoonnahay shaqada, waqti badan ayaan la qaatay ilaa aan soo gaarsiiyay heer sare. Balse maamulkii shirkadda waxay go'aansadeen in aan shaqada iska casilo, oo aan joojiyo. Waan isaga tegay shaqadii, waxaan ku biiray mid ka mid ah koorsooyin xilligaasi socday, oo ku saabsanaa barashada kumbuyuutarka.

Markii aan dhammeeyay mid ka mid ah koorsooyinkaas waxaan billaabay shaqo raadis, ka hor inta aan shaqada helin, waxaa jirtay mashruuc ay shirkadda Apple ku doonaysay in ay ku soosaarto kumbuyuutar gacmeedkii ugu horreeyay ee lagu magacaabo Makintosh.<sup>15</sup> Nasiibwanaag, waxaan noqday qofkii ugu horreeyay ee ku guulaystay u qaabaynta qaab qoraalka uu yeelan doono kumbuyuutarka Makintosh.

Dhanka kale, isla xilligaas waxaan shaqo ka helay shirkadda 'Next' oo iyadana ka mid ahayd shirkadaha soosara kumbuyuutarka. Waqti badan kuma qaadan, waxaan dib ugu soo laabtay shirkadda Apple ilaa markii dambe aan ka noqday guddoomiyaheeda guud.

---

<sup>15</sup>Waa kumbuyuutar gacmeedkii ugu horreeyay oo ay soosaarto shirkadda Apple.

Haddii aan koleejkaygii ka habsaami lahayn oo aan joojin lahayn waxbarashadii koleejka toban sano ka hor, maanta kumbuyuutarka Makintosh qaab qoraalkiisa yaa dejin lahaa ama u qaabeen lahaa? Haddii aan horusocon lahaa dhibcaha iskuma xiri lahayn balse dib ayaan u soo laabtay si aan dhibcaha isugu xiro.

Ugu dambayn, guushayda waxaan ku gaaray aamminaad, kalsooni, ku celcelis iyo shaqo adag.

“

**Yeelo rabitaan dhab ah si aad u xaqiijiso**

**Ujeedkaaga”**

\* \* \*

Sheekada Stive jobs maxaad ka baratay? Waan dareemayaa in aad ii sheegi doonto cudurdaarro tiro badan haddii aan ku weyddiiyo sababta aad nolosha uga quusatay, oo aad isku dhiibtay? Ha quusan, hana is-dhiibin waayo Illaahey arrinkaaga ma mooga; ha hilmaamin mar walba oo culeys yimaada waxaa ka dambeeya fudeed.

Waa hubaal markaad si xun u guuldarraysato baad guulaysan, sidaas darteed marwalba yeelo yool fog, hiigso meel sare, ha ku qancin meel ka sokaysa dayaxa, qabo waxa aad awooddo, hana hilmaamin in aad go'aan adag ka qaadato sidii aad ku xaqiijin lahayd guusha aad isla markaasi dalbanayso. Inta harsanna Alle u talo saaro, isaga ayaa kuu dhammaystiri doona.

Hal-abuur Cabdiraxiin H. Galayr, isaga oo ku goobaabinaya in qofka dhallinyarada ah uusan is-

dhiibin haddii uu gaari waayo hammigiisa balse la yimaado dadaal dheeraad ah, wuxuu yiri:

*“Waxaad haabaneyso  
Haddaad heli weydo  
Oo aad hammigaaga  
Kolkaa banan weydo  
Ha hiifin naftaada  
Dedaal ku dar hawsha  
Adoon hamraneynin  
Guushaada Hilaadi”*

Walt Disney, 302 jeer ayuu fashilmay ka hor inta uusan ku guulaysan yoolkiisa. Sidoo kale, Colonel Sander laba sano ayuu ku dhex wareegaayay maqaayadaha ku yaalla dalka maraykanka si uu u helo macaamil cusub, oo ka iibsada digaagga ay shirkaddiisu iibiso. Kun jeer ayuu ku fashilmay ganacsigiisa, balse isma dhiibin, mana joojin joogtaynta.

**“  
Shil weeye in aad kuftaaye...Inaad kici  
weydo baa xun”**

\* \* \*

Maxaad ka taqaanaa Mr. Kentucky Fried Chicken iyo buuggiisii *Maraqaa digaaggaa nafta u roon?* 170 jeer ayaa laga diiday in loo daabaco buuggiisa balse markii dambe wuxuu ka mid noqday buuggaagta loogu iibsi badan yahay dalka maraykanka, waxaa la iibiyay 70 milyan oo nuqul.

Sikastaba, guushu waxay u martisaa qof u riyaqsan raadinteeda, lana yimaada dadaal ku dhisan joogtayn iyo dulqaad. Haddii aadan soo dhedhemin qaraarka guuldarrada weli cashar maadan qaadan, waxna maadan baran.

Guuldarradu, dad baa ka aaminsan in ay tahay wax xun laakiin ma oga in ay tahay fursad dahabi ah, maxaayeelay mar walba oo aad guuldarraysato waxaad baratay waddo cusub oo aadan dib dambe u raaci doonin. Guuldarro la'aani waa guul la'aan. Sidaas darteed, samay iskuddayga waad guulaysanaysaa ama waad guuldarraysanaysaa, labaduba waxay ku gaarsiin karaan halkii aad u socotay.

Guuli laguma gaaro iskuddayga hore waayo waxay kaaga baahan tahay in aad joogtayso iskuddayga ilaa inta aad ka guulaysanayso. Joogtayntu waa astaanta guulaystaha sida curiyaha kaarboonku uu astaan ugu yahay birta. Caadayso joogtaynta goorta ay ku soo wajahdo xaalad jahwareer ah, taas oo kaa horistaagi karta yoolkaaga.

Faylasuufkii reer giriig ee Epictetus ayaa yiri “Duruufaha ma samayso aadanaha keli waxay daaha ka rogaan isaga nafsaddiisa.” Waxa keli ah ee aan la joojin karin waa dhibka ama caqabadaha nolosha waayo markasta oo aad iskuddaydo in aad horusocod samayso ama aad guul raadiso waxaa kaa hor imaanaya caqabado badan. In aad ka tallaabsato caqabadahaas waxay ku xiran tahay sida aad uga falceliso duruufaha kugu hareeraysan.

Marwalba oo ay jawaabtaadu noqoto mid suuban ama togan waxaa la arkaa in aad sii xooggaysanayso oo aad awoodi karayso ka tallaabsiga hataqyada ku horyaalla, sidoo kale waxaad noqonaysa qof aan weligiis gaabin oo aan is-dhiibin.

Guuldarradu waxay kaa dhigaysaa qof xooggan laakiinse cabsida guuldarrada waxay dhabarka ka jibin kartaa mawqifkaaga togan, dibudhac ayeena kugu keeni kartaa, adiga oo raba in aad hawl qabato ayay kugu beeraysaa cabsi aad ka qabto in aad guuldarraysato.

Suxufiyad ayaa su'aal weyddiisay J Watson oo ahaa aasaasaha shirkadda IBM sida uu ku gaaray guushiisa? Wuxuu ku jawaabay "Haddaad rabto in aad si dhaqso ah u guulaysato waa lama huraan in aad laba jeer guuldarraysato." Sideedaba, guushu waxay dhacdaa guuldarrada gadaasheeda; sidaas darteed ku dhiiro horusocod iyo sidii aad cagta u saari lahayd dhabbada guusha.

Markasta oo aad khatar la kulanto; isweyddii: Maxay tahay waxa ugu xun ee igu dhici kara haddii aan halistan ka gudbo? J Paul oo ahaa maalqabeen ka taajiray saliidda ayaa yiri "Wax walba ha kugu qaadate waad hubin lahayd in aysan mar kale soo laaban guuldarrada." Dood badan kama taagna in qof walba uu ka cabsado guuldarro, waa dhab in qof kasta ka baqo saboolnimo, balse kuwa guulaystay waa kuwa si miyir leh u wajahay halista ka dib ka tallaabsaday, hoggaankana u qabtay guushooda.



Isku hawl sidii aad u noqon lahayd guulayste liibaanay, dejiso yoolal kala duwan oo ku dhisan waqti qoondaysan, qor oo isha mari maalin walba si aadan u hilmaamin, una sheeg naftaada guuldarro in aysan doorasho ahayn.

Haddii aad markii hore ay kula ahayd in guushu ay tahay wax iska yimaada iyada oo aan loo dhibtoon, fiiri kitaabka quraanka gaar ahaan suuratul Maryama, aayadda laba iyo labaatanaad. Alle wuxuu nooga warramay xanuunkii ay dareentay Maryama bintu Cimraan. Goortii ay xanuunsatay iyada oo fooli hayso waxay tiri “Shalaaytadaydiye maxaan u dhiman waayay ka hor xanuunkan oo aan u noqon waayay qof waa hore dhintay oo la hilmaamay.” Maryama xanuunkii haayay darteed ayay ku hammisay geeri, durbadiiba waxaa hoosteeda ka yeeray cod, waxaa lagu yiri “Ha is-dhiibin Eebbe hoostaada wuxuu ka yeelay geed qabso oo ruxrux waxaa kaaga soo daadan doono miro.”

Sikastaba, marwalba oo aad ku hammiso in aad is-dhiibto ama quusato intaad yara fadhiisato naftaada dib u xisaabi, isweyddii ma jira qof ka guul gaaray oo horay u soo maray xaaladda aan hadda ku sugannahay? Dibumilicso sooyaalka dadkii guulaystay, waxaad ku dhex arki doontaa dhibaatooyin badan oo ay la soo kulmayn laakiin is-dhiibku uma uusan ahayn xalka ugu horreeya, sidaas ayeena guusha ku gaarayn. Waa halka ay murtidu inaga leedahay: *“Fadhi iyo fuud yicibeed laysku waa.”*

Haddii aad daymooto sooyaalka waxaad ku dhex arki doontaa dhammaan sheeko walba oo guul ku saabsan in ay guuldarro ka horraysay, balse dadku uma jeedaan guuldarradaas la soo maray, keli waxaa u muuqda guusha la gaaray, uma jeedaan inta jeer ee lala soo kufay hanashada guusha.

Bal eeg! Qof ku wiiqmey ganacsi isaga oo koow iyo labaatan jir ah, lagaga guulaystay doorasho baarlamaan isaga oo laba iyo labaatan jir ah, markale ku ku fashilmay ganacsi haddana mar labaad ku guuldarraystay in uu noqdo madaxwayne ku xigeen. Ugu dambayn, dadaal, joogtayn iyo halgan dheer ka dib ninkii wuxuu ka mid noqday mid ka mid ah madaxweyneyaashii ugu saamaynta badnaa ee abid soo maray dalka maraykanka. Ma garan kartaa qofkaasi? Waa Abraham Lincoln. Ma ugu yeeri lahayd guuldarrayste mise guulayste? Guushu, sideedaba waxay timaaddaa goorta aad guuldarraysato.

Qof walba oo guulaystay ma kula tahay in uu yahay qof aan horay u soo dhedhemin xanuunka guuldarrada? Dadka hadafka sare leh way kufaan fakta hore balse durbadiiba isma dhiibaan, waayo waxay ka bartaan cashar waxtar u leh noloshooda, ka dib horusocdaan ilaa ay ka gaaraan bartii ay hiigsanaayeen.

Thomas Edison<sup>16</sup> oo ahaa ruugcaddaa magac weyn ku leh masraxa ganacsiga, waa ninkii soo saaray laambada ama nalka. Maalin ayaa waxaa ku

---

<sup>16</sup>Thomas Edison: waa hal-abuure, ganacsade, una dhashay dalka maraykanka.

dhacday masiibo, wuxuu ku waayay warshaddiisa oo la qiima ahayd malaayiin doollar, waxaa sababay dab qabsaday warshadda. Balse arrinka xiisaha leh waxay tahay in uusan niyadjabin, ismana dhiibin laakiin inta uu hawada sare eegay ayuu arkay qiiq ka soo baxay warshaddiisa gubanaysa, wuxuu yiri “Faa’iido weyn ayaan ka helay musiibadan igu dhacday waayo waxaa gubtay dhammaan gefafkaygii hore, hadda iyo ganacsi cusub.” Saddex toddobaad ka dib wuxuu soosaaray aaladda la dhaho fonogaraafi.<sup>17</sup>

Thomas Edison, iskuma dhiibin xoolo burburkii ku dhacay, mana niyadjabin, wuxuu ka bartay cashar cusub, taas oo soo deddejisay guulihisa.

### 3. Mala-awaal

*“Riyooyinka ku dhisan mala-awaalka waxay igu bagayn  
malaynta suurtagalnimada dhacdooyin aan suurtagal  
ahayn.”*

Hawraarta kor ku xusan waxaan ku tusaallaynayaa awoodda mala-awaalka. Kelmedda mala-awaal haddii aad ka dhex eegto Qaamuuska AfSoomaaliga wuxuu ku qeexayaa sidan: “Wax aan la hubin oo male ku dhisan.” Balse markaad ku eegto ookiyaalka cilmiga sayniska waxaad ogaanaysaa in uu yahay qol ay aqooni ku kaydsan tahay.

---

<sup>17</sup>Phonography: waa khalab codka lagu duubo.

Waxaa la yiri bini'aadamku wuxuu samaysan karaa wax walba oo uu mala-awaasho. Haddaba, haddii ay sidaas tahay maxaa kuu diiday in aad yoolkaaga ku xirto mala-awaalka la hal-abuuray? Mala-awaalka la hal-abuuray waa halka ay ka soo burqato dhiiranaanta, xamaasadda, jamasho iyo kalsoonida waxay si toos ah ugu xiran tahay garaadka daahsoon, sidoo kale waxay u gudbisaa fekradaha suubban iyo hummaag maskaxeedyada la xiriira himilada qofka.

Haddii hummaag maskaxeedkaaga loo bandhigo garashada daahsoon, durbadiiba wuxuu noqonayaa mid dhaqangalay, waayo? Garaadka daahsoon ma lumiyo wixii loo dhiibo, waa meesha ay kuugu kaydsan tahay awoodda daahsoon, taas oo aad u adeegsan karto xaaladaha qaar. Tusaale, adiga oo meel duur ah cagta maalaya ama socda haddii uu kaa hor yimaado libaax dad qaad ah maxaad fali lahayd? Ka sooqaad in libaaxii ku hortaagan yahay, dhanka bidix waxaa kaa xiga guri ay ku wareegsan tahay ood-weyn. Laba waddo midkood baa kuu furan: In aad is-difaacdo iyo in aad cagaha wax ka daydo, oo aad ka booddo guriga ay oodda-weyn ku wareegsan tahay.

Hubanti, in aad dooran lahayd oodda-weyn, waayo? Maskaxdu waxay adeegsan lahayd awoodda daahsoon, si lama filaan ah ayaad oodda u dhex jeexi lahayd. Laakiin goorta ay cabsidu ku daysay, libaaxiina uusan hortaada ka muuqan haddii lagu dhaho marka kale dib uga soo bood, sidaa maadan kartayn. Maxaayeelay mar haddii ay

cabsidii ku daysay, ma jirta xaaladdii loo isticmaali lahaa awoodda daahsoon, sidaas darteed way kugu adkaanaysaa in aad mar labaad ka soo booddo.

Haddaba, garaadka daahsoon xaaladahaas oo kale ayuu ku caawin kara, waxaa lagu meteli karaa in uu yahay shidaal kuugu kaydsan maskaxda keli markii loo baahdo ayay maskaxdu adeegsataa.

Mala-awaalku, wuxuu caqliga daahsoon ku kaalmeeyaa in uu soosaaro jamasho iyo hiyakac, taas oo kugu dhalinaysa in aad jacayl xooggan u qaaddo hummaagii ay maskaxdu sawiratay, adiga oo baadigoob u gali doona sidii aad ugu guulaysan lahayd himilooyinkaaga.

Waxaa jirta sheeko ku qoran buugga '*Feker oo taajir noqo*' ee uu qoray Napoleon Hill. Sheekadu, waxay ku saabsanayd awoodda ay soosaarto mala-awaalka, taas oo aad ku dhaqaajin karto buurta ugu dheer Afrika ee Kilimanjaro waa haddii aad u baahato. Iga hoo sheekada:

Waxaa jiray nin la oran jiray Dr. Armour oo ahaa maalqabeen, wuxuu wargeyska jikaago (Chicago) ka akhriyay khudbad uu ku soo qoray Gunsaulus oo ah shakhsi ku dhex nool mala-awaal. Khudbaddaas cinwaankeedu wuxuu u qornaa sidan: *Haddii aan baysan lahaa hal milyan oo doollar maxaan samayn lahaa?* Dr. Armour, wuxuu jecleystay in uu ka qaybgalo khudbadaas si uu u dhageysto waxa uu wiilka yari sheegayo.

Gunsaulus, waxaa lagu soo dhoweeyay makarafoonka, wuxuu billaabay in uu ka sheekeeyo hummaag maskaxeedkiisa isaga oo adeegsanaya

dareenka mala-awaalka, wuxuu yiri “Waxaan dhisi lahaa iskuul weyn oo lagu barto cilmiga tiknoolojiyadda casriga ah waxaa wax ka baran doona wiilal iyo gabdho si ay uga guul gaaraan hadafkooda nolosha.” Wuxuu ku soo gunaanaday *“Haddii aan haysan lahaa halkaas milyan waxaan dhagax dhigi lahaa iskuulkaas oo kale.”*

Markii ay khudbaddii dhammaatay ayaa waxaa kulmay, oo sheekaystay Dr. Armour iyo Gunsaulus. Wuxuu ku yiri “Maandhow waxaan aaminsannahay in aad ka run sheegi karto wixii aad dhahday ee haddii aad beri xafiiskayga iigu timaaddo waxaan ku siin doonaa halka milyan ee aad u baahan tahay.”

Gunsaulus, wuxuu gaaray yoolkiisa isaga oo aasaasay macadka barashada tiknoolojiyadda casriga ee Armour. Maanta macadkaas wuxu ku dhisan yahay mala-awaalkiisa iyo deeqdii Dr. Armour.

“

**Fekradaha waxtarka leh waa natijjo ka  
timid mala-awaalka”**

\* \* \*

Cajiib! Had iyo jeer waxaa jira fursado ay helaan dadka qorshaha leh ka dib ku dhaqaaqa sidii ay qorshahooda u dhaqangelin lahaayeen. Haddii aad dib u fiiriso culummada darsa cilmunafsiiga qoraalladii ay ka sameeyeen mala-awaalka, waxay ku tilmaamayn in uu ka mid yahay shanta dareeme ee bini’aadamku wax ku dareemo.

Aadanuhu, wuxuu leeyahay aalado u soo gudbiya xogta bannaanka kaga imaanaysa, kuwaas

oo ka shaqeeya isku xirka waxa maskaxda dibadda ka ah sida: Hawada, qoraxda, dhirta, dayaxa, dadka iyo xiriirka gudaha sida maskaxda, caloosha, kalyaha, wadnaha, sanbabbada. Sidoo kale, wixii ay lixdaas dareeme inoo soo gudbiyaan ayay maskaxdu sarifataa ka dib jawaab degdeg ah ka bixisaa. Jawaabtu waxay noqon kartaa mid fal ah iyo mid aan fal ahayn.

Lixda dareeme ee Alle nagu manaystay waxay kala yihiin:

1. *Araga*
2. *Urka*
3. *Taabashada*
4. *Maqalka*
5. *Dhedhenka*
6. *Mala-awaalka*

Kan dambe waa dareenka lixaad ee ka daaran maskaxda gudaheeda, wuxuu ku tusiyaa sawiro iyo muuqaallo la xiriira himiladaada. Tusaale, haddii aad tahay qof jecel aayaha fog in uu noqdo dhaqtar, muuqaal mala-awaaleedka ay naftu hilaadinayso wuxuu noqon karaa sawiro la xiriira himiladaada ku aaddan dhanka dhaqtarnimada sida adiga oo xiran dharkii caddaa, bukaanno qaabilaya, daawo u qoraya, iwm.

Way dhacdaa mararka qaar in aad dareento adiga oo waddo cidlo ah cagta maalaya in ay maskaxdu sawirato hummaag ku saabsan wixii aad ku hamminaysay in aad xaqiijiso gaar ahaan adiga oo gaari qurux badan isteerinkiisa ku dhagan, xaaska iyo carruurta ay kula saaran yihiin, adinka oo u socda xeebta jasiira ama liido.

Dabcan, waxaas iyo wax la mida maalin walba ayay maskaxdaadu sawirataa ama mala-awaashaa.

Mala-awaalku waa tab iyo xirfad fiican, waxaase loo baahan yahay in uu noqdo mid kuu jiheeya dhanka yoolkaaga. Sii waqti ku filan maskaxdaada si ay u isticmaasho dareenkan aan innaba caadiga ahayn ee mala-awaalka.

Ugu dambayn, haddii aynu doonayno in aynu guulaysano waa in aynu guusha u boholyownaa, sidoo kale u raadinaa sida baadi naga maqan oo kale.

Aabbe ayaa carruurtiisa ka warreystay qof weliba waxa uu jeclaan lahaa in uu noqdo aayaha noloshiisa:

- Gabadhii curadka ahayd iyada oo mala-awaalaysa tiri waxaan rabaa in aan noqdo marwo guri, carruur iyo nin dhaqaale leh, dhawr adeegto guriga u joogaan.
- Wiilkii ku xigay ayaa isaguna mala-awaalkiisu tusay in uu doonayo in uu noqdo askari dalkiisa iyo dadkiisa u adeega oo daacad ah.
- Gabadhii yarayd ayaa iyaduna sheegtay in ay mala-awaalkeeda ka dhex aragtay iyada oo dhakhtarad ah oo dadka waaweyn iyo dhalaanka daaweynaysa.

Waxaa jira mala-awaal dhalanteed ah oo uu qofku sawirto, taas oo suurtagalnimadiisu sugnayn. Tusaale, in aad jeclaato ama jamato in aad iska duusho keligaa adiga oo aan adeegsan wax aalad ah.



Bal aan ku soo xusuusiyo sheeko curis ahayd oo ku soo baxday buugga Soomaaliga suugaanta ee fasalka shanaad ee dugsiga H/ Dhexe.

Ma tabcade Burweyne, wuxuu aabbe u ahaa goys sabool ah oo aan duunyo xoolaad bartood lahayn, deggan aqal yar oo doqosh ah, ma qadaan mana dhergaan. Waa nin aad u neceb in uu hawshoodo ama waxqabto, haddana waa nin hammi badan oo mala-awaalkiisu tuso in uu noqon doono hantiile.

Ma tabcade, xaaskiisa iyo xigaalkiisu waa kala quustayn dhiirrigelin iyo baraarujin in uu xoogsado si uu ubadkiisa u daryeello, wuxuu halkudhig ka dhigtay in uu hawl la'aan hantiile noqon doono. Maalinkii dambe ayaa loo sheegay in uu jiro nin murti badan oo wax badan og, oo deggan goob aad u fog, qofkii u tegona u sheega waxaa uu rabo iyo waxaa uu noqon doono, lana arko wuxuu sheego.

Maalintii dambe ayaa wuxuu aaday goobtii loogu sheegay ninkii murtida badnaa ee wax walba yaqaanay. Intii uu sii socday ayuu jidka ku arkay waraabe aad u dhibaataysan oo dhogortii ka daadatay, xanuun ba'an hayo. Waraabihii ayaa wuxuu ma tabcade weyddiiyay meesha uu u socdo iyo muraadkiisa. Wuu u sheegay, waraabihii ayaa isaguna ka codsaday in uu ninkaas murtida badan usoo weyddiiyo xaalkiisa iyo daawadiisa, ma tabcade waa ka oggolaaday.

In cabbaar ah markuu sii socday ayaa wuxuu hoos fadhiistay geed Gob ah, geedku waa ooyayaa, wuxuu weyddiiyay maxaa ku helay?

Geedkii wuxuu uga sheekeeyay in uu u buko iyo in uu rabo in uu mirodhalo balse uusan weligiis dhalin, halkaasna dhibka ka haysto. Ma tabcade ayaa u sheegay ninka murtida badan ee uu u socdo, wuxuuna ka ballanqaaday in uu u soo weyddiin doono waxa haya. Ma tabcade wuxuu geedkii u sheegay in uu doonayo in uu noqdo hantiile isaga oo aan far dhaqaajin.

Isaga oo sidaa jidka u sii haya ayaa waddadii la gashay meel xeeb ah, markii badda xeeligeeda uu marayay ayaa waxaa ku soo baxay kalluun dhammaantood cabanaya. Ma tabcade wuxuu u sheegay muraadkiisa iyo meesha uu socdo, iyaguna waxay ka codsadayn in ninka murtida badan u soo weyddiiyo xalkooda, haye iyo warsan ayuu ku yiri.

Ugu dambayn, wuxuu u tegay ninkii murtida badnaa, wuxuu uga warramay wixii uu rabay, waa la soo dhaweeyay, waxaa la weyddiiyey in uu cid kale la kulmey iyo in kale? Ma tabcade saddexdii uu la kulmey xaalkooda ayuu uga warramey; Waraabihi, Geedkii Gobka iyo Kalluunkii.

Murti badane ayaa yiri “Kalluunka waxaad u sheegtaa in dhuuntiisa ay dheeman ku jirto ilaa laga saarona uusan caafimaadayn; Geedkana waxaad u sheegtaa in hoostiisa qasnad dahab ah oo weyn ku jirto ilaa laga saarona uusan mirodhalayn; Waraabahana waxaad ku dhahdaa ma tabcade markaad cunto ayaad bogsan doontaa.”

Ma tabcade isagana waxaa loo sheegay in uu si hawlyar ku noqon doono hodan hantiile ah. Ma tabcade oo la dhacsan wixii uu u sheegay murti badane, taas oo ah in uu hawlyari hodan ku noqon doono ayaa wuxuu soo maray kalluunkii oo ka warsugaya, wuxuu u sheegay in dheeman ku jiro dhuuntooda ilaa laga saaro mooye aysan bogsan doonin. Kalluunkii ayaa ka codsaday in uu la baxo dheemanka dhuuntiisa ku jira maadaama uu baadigoobayo hanti, balse waa ka diiday oo wuxuu ku yiri si dhib yar ayaan uu ku noqon doono hantiile hodan ah.

Wuxuu soo maray geedkii, wuxuu u sheegay in qasnad dahab ah hoostiisa ku duugan tahay, ilaa laga saarona uusan mirodhalayn. Geedkii wuxuu ku cataabay kaalayow la bax waadigii rabay in aad hantiile noqoto, ninkii ma tabcade ahaa waa ka diiday, wuxuu ku yiri hawlyaraan baan hodan ku noqonayaa iyo hantiile ee maxaa ciid faagfaag iyo qasnad jiid jiid i galshay.

Ugu dambayn, wuxuu u tegay waraabihii, wuxuu ku wargeliyay in ma tabcade cuno mooye uusan bogsoonayn. Waraabihii ayaa weyddiiyay adiga maxaa lagu soo yiri? Ma tabcade wuxu u sheegay in uu hawlyari hodan hantiile ah ku noqon doono, waraabihii ayaa haddana weyddiiyay wuxuu la soo kulmay iyo in uu cid kale arkay? Ma tabcade wuxuu uga sheekeeyey kalluunkii dhuunta dheemanka ugu jirey, iyo geedkii qasnaddu ku hoos duugnayd, markii uu sheekadii dhammeeyey ayaa waraabihii qosol la dhacay ka dib ku booday, dhulka ayuu la galay,

wuxuuna ku yiri: “*Ma tabcade kaa weyn oo aan arki lahaa ma jiro.*” Sheekadan waxay tilmaamaysaa in guul walba aan lagu gaari karin hawlyar, blasé u baahantahay dadaal iyo ka mirodhalinta mala awaalkaaga. Balse in aad yeelato mala-awaal dhalanteed ah waa kuu doqonnimo. Mala-awaal kasta waxaa suurtaggeliya adkaysi iyo shaqo adag.

#### **4. Shaqo Adag**

Guusha sideedaba laguma gaaro xaglo laaban, waayo waxay u baahan tahay shaqo adag. Waxaa tusaale kuugu filan xikmadda Soomaalida ee oranaysa “*Xaglo laaban xoolo kuma jimaadaan.*” Dhanka kale, qof walba wuu jecel yahay in uu iska guulaysto laakiinse su’aasha isweyddiinta mudan waa immisa qof ayaa diyaar u ah in uu halgan iyo waqti dheer ku bixiyo guusha?

Geelleyda ayaa ku heesta marka ay waraabinayaa geela, iyaga oo isku guubaabinaya in aan loo kala harin hawsha adag ee geela:

*“Nin ludaa jecel  
Oo lurkaa neceb  
Haw labeynoo  
Haw lammaaneyn.”*

Waxaa lagu guubaabinayaa dhallinyarada iyo ninkii raba geel, in uu hawl adag u maro ilaalintiisa, raaciddiisa, waraabintiisa, baadigoobkiisa iyo cadaw ka jirkiisa, haddii kale uusan geel helayn. Ninka geela hawshiisa neceb ayaa laga habaaray taas oo ka dhigan in aanu helayn, weligiisna geel yeelanayn, ilayn kuma hawshoona sidee buu ku heli karaa?

Beeralayduna murtidaas waxay ku soo koobtay:  
*‘Nin weliba geedkuu beerto ayuu mirihiisa gurtaa.’*

“  
**Shaqo waa xorriyad”**

\* \* \*

Guushu dhayal laguma helo noocay doonto ha ahaate. Abwaan Soomaaliyeed isaga oo ka hadlaya guusha gobannimada iyo madaxbannaanida, wuxuu yiri *“Baaruuda qiiqdiyo haddaan, baawer lagu raadin. Gobonnimo bilaash laguma helo, ban iska taaltaale.”* Sidoo kale, Axmed Moogi oo ka mida fannaaniinta Soomaaliyeed kuwooda ugu caansan ayaa wuxuu ku heesay sidan:

*‘Tacabkaaga iyo  
Turruqaagu wey  
Ku tilmaamayaano  
Wey ku toosiyaane  
Waxaad taransata  
Tiro kuu galoo  
Ileyn lagu tanaada  
Ta allee tallaabada.’*

Wuxuu yiri Hendry ford *“Si adag u shaqeyso si aad nasiib badane u noqoto.”* Waxay la mid tahay qofna ma guulaysan isaga oo aan qaban shaqo adag. Yusuf Garaad mar isaga oo ka hadlaya sidii uu shaqada ku soo billaabay wuxuu yiri *“Lacagtii iigu horraysay ee aan shaqeystay [Waxaan] ka soo saaray harqaan ka dib markii aan dhammaystay waxbarashada Dugsiga Hoose Dhexe ee Maxamuud Xarbi.”*

Sideedaba, in aad ku noolaato nolol wanaagsan ma aha mid fudud laakiinse in aad doorato oo aad dhahdo aniga waxaan u socdaa oo aan rabaa nolol wanaagsan adiga ayay kugu xiran tahay, ee ha isku xirin silsiladda cabsida, iskudday in aad guusha u shaqaysato waayo guuli waa loo shaqaystaaye.

Waxaa jirta sheeko Soomaaliyeed oo dhexmartay wiil iyo aabihii oo Maxamed siibed ku qoray buuggiisa (*Himiladaada Hano*). Wiil kuray ah ayaa maalintii uu garaadsaday wuxuu aroor walba la kallahayay aabbihis, una kallahayay badda si ay u kalluumaystaan...Wiilkii wuxuu maqlay in aakhiro dadku laba u qaybsamayo marka isaga oo raba in uu hubiyo in jannada iyo cadaabta subax walba shaqo loo kallahayo ayuu aabbihis waydiiyay “Aabbow akhira shabaag ma la dhiganayaa?” Yacni wuxuu ula jeeday aakhira ma la xoogsanayaa ama shaqo ma jirtaa.

Odayga si uu su'aasha uga jawaabo ayuu cabbaar fikiray markaas ayuu ku yiri “Maandhow ninna macna la'aan meel uma fadhiyo.” Jawaabtiisii waxay noqotay in uu dhaho wiilkaygiyow u malayn maayo in qofna macne la'aan meel isaga fadhiyo, aakhira waa qof walba iyo abalgudkii uu mutaystay intuu ifka joogay. Murtida ku jirta sheekadu waxay tahay sida ay muhiim u tahay in qofku uu xoogsado meel kasta oo uu joogo sidaas ayaa layskugu dardaarmi jiray dhaqankii hore ee Soomaalida.

Sikastaba, in aad heer sare gaarto kuma xirna nasiib ee waa natiijo ka dhalatay shaqo adag; sidoo kale wax walba oo aad maanta ku

raaxaysanayso ama aad isticmaalayso waa wax ku yimid dadaal iyo shaqo adag. Dhanka kale, qof walba oo naga mida wuxuu helaa tallooyin ku saabsan dhanka nolosha, weli waan xusuustaa tallooyinkii aan ka helay hooyadii waagii aan kurayga ahaa, waxaa ka mida in aan shaqeysto oo aan xoogsado.

Waxaa jirta sheeko na-dhexmartay aniga iyo wiil dhallinyaro ah oo aan ku kullanay maqaayad dhexdeed. Wuxuu ii sheegay in uu ka shaqeeyo meel garaash ah oo baabuurta lagu rinjiyeeyo, ka hor inta uusan ka mid noqon shaqaalaha rasmiga ee mushaariga, wuxuu ku shaqeyn jiray lacag la'aan. Waxaan weyddiiyay shaqada ka warran? Wuxuu ii sheegay in shaqadu ay adag tahay balse u baahan tahay dulqaad. Waxaan kaloo weyddiiyay xaas ma leedahay? Isaga oo ilka caddaynaya ayuu igu yiri "Haa mardhow ayaan guursaday." Wuxuu sii raaciyay "Ka hor inta aan ka mid noqon shaqaalaha rasmiga ee mushaariga, waxaan qaadan jiray lacag yar oo bas raac ah, lacagtaas ayaan aruursaday ka dib waxaan go'aansaday in aan guursado."

Waxaan weyddiiyay in uu mar ku fikiray in uu shaqada ka tego iyo in kale? Wuxuu yiri "Haa dhowr jeer ayaan ku fikiray in aan ka tego balse maysan ii suurtaggelin." Intaas wuxuu ku sii daray "Nasiibwanaag, hadda xaas ayaan leeyahay mushaar fiican ayaan qaataa, laakiin haddii aan shaqadan usoo dhabar adeegi lahayn, oo aan usoo dulqaadan lahayn maanta ma soo gaari lahayn horumarkan iyo isku-filnaashahan."

Haddaba, xiisaha ay sheekadu leedahay waxay tahay shaqo adag iyo dulqaad badan waxay ku gaarsiiyaan horumar iyo isku-filnaasho dhanka nolosha ah.



# 4

## QAACIDDADA GUUSHA

*“Noqo qof wanaagsan balse waqti badan yuusan  
kaaga lumin in aad dadka ka dhaadhiciso  
in aad tahay qof wanaagsan”*

Abwaan Xasan Dhuxul Laabsaalax

**B**errigii Soomaalidu u safri jirtay sucuudiga oo loo yiqiin janaalayaasha ayaa oday reer baadiye ahaa, oo siduu baadiye uga yimid magaalada la keenay, isla markiina tikit loogu jaray dalka sucuudiga ayaa wuxuu tegay magaalada jidda. Dadkii la socday waxay u geeyeen dad ay qaraabo ahaayeen, habeenkii ugu horreeyay markii uu soo qubeystay oo casho la siiyay ayuu raggii guriga degganaa u sheegay in ay shaqo u soo raadiyaan, balse waxay ku dhaheen adeer shaqadu ma sahlana adigana af-carabiga ma taqaanid marka

wax yar iska joog inta aad luuqadda ka baranayso, annagaa waxaad cunto iyo meeshaad seexanayso dammaanad qaadayno.

Wuxuu ugu jawaabay aniga ma joogi kari waayo xoolihii kud ayaa iga laayay, carruurtii oo abaari haysona waan ka soo tegay marka si degdeg ah shaqo hala iigu raadsho. Inta ay haye dhahayn ayay subax kasta hurdada ka soo toosaan, shaqadooda aadaan, odaygiina guriga ayuu iska dhex fadhiyaa.

Habeenkii dambe markay soo noqdayn mid kasto isaga oo daalan ayay iska seexdaan. Subaxdii dambe intay labistayn ayay shaqadii aadayn, odaygiina inta uu labistay ayuu ka daba baxay, wuxuu sii maqnaadaba waxay yimaadeen guriga oo cidlo ah, odaygiina maqan yahay, iyaga oo welwelsan ayuu halmar albaabka soo garaacay, waa laga furay waxay ku dhahayn adeer intee ku maqnayd?

Wuxuu ku yiri shaqo ayaan raadsaday waxay mar labaad weyddiiyeen adeer luuqadda maba taqaanide sidee dadka isku fahamtayn? Wuxuu ku yiri “Maandhayskow shan faroole isma af kasi waayo.” Odaygii meel dhismo ka socdo ayuu shaqo ka doonay, shaqadiina wuu helay.<sup>18</sup>

Haddaba, xikmadda ku jirta sheekadu waxay tahay weligaa waxaad rabto raadso qofkale haka sugin, isku kalsoonow, ogowna in qofkii la yimaada doonis dhab ah uu helo.

---

<sup>18</sup>Sheekadan waxaa laga soo xiktay bogga aammina muuse wehliye ay ku leedahay barta xiriirka bulshada ee faysbuug.

Qofka guulaysta ma sugo in ay cidii ugu kaalmayso xaqiijinta hadafkiisa, balse marka uu arko in uu xaqiijin waayo waxyaabaha qaar, wuu garan karaa meesha uu ka heli karo kaalmo ka dib kama istaago ilaa uu ka gaaro bartii uu hiigsanaayay. Sikastaba, haddii aad doonayso in aad ka salgaarto hadafka nolosha marnaba ha sugin kaalmada qofkale, marka hore fadhiga ka kac oo raadso guusha aad u baahan tahay.

### **Kalsoonida Nafta**

Kalsooni waa dareenka aad ka qabto naftaada ama waa waxa aad ka aamminsan tahay naftaada. Haddaad isku aragto qof aan wax qabsan karin, nolosha ka dhacsan, nasiibdarran, sidoo kale aad naftaada ka qabto aragti taban, waxaad noqonaysaa col hortii jabay! Adiga iyo guuli isma arki doontaan waayo guushu waxay u martisaa qofka naftiisa ku kalsoon.

Dhanka kale, in aad naftaada ku kalsoonaato macnaheedu ma aha in aad tahay qof ay islaweyni ku jirto, laakiinse haddii aad tahay qof islaqab weyn oo aan dadka ula dhaqmin sida wanaagsan, taasi kalsooni ma aha ee waa cudur nafsani ah, marka waa muhiim in aad naftaada ku qabto kalsooni togan, taas oo ka arradan islaweyni, aammintona in aad tahay qof muhiim ah oo wax qabsan kara.

Kalsoonidu waa lafdhabarta guusha haddii aysan kalsooni jirin way adag tahay in aad si qurux badan u guulaysato.

Dhanka kale, kalsooniddarradu iyadana waxay lafdhabarka ka jebisaa guusha, waxay kaa dhigtaa qof aan dhaqaaqi karin waayo waxay kugu beeraysaa cabsi aan jirin. Kalsooniddarradu waxay mararka qaar saameyn ku yeelataa nolosha qoyska, shaqada iyo waxbarashada. Haddii aad tahay ruux aan naftiisa ku kalsoonayn, way kugu adkaanaysa sidii aad u maarayn lahayd dhibaatooyinka ku soo wajaha. Una fiirso maskaxda bini'aadamka waxay inta badan isku shuqlisaa uruurinta farriimaha taban.

Culummada darsa cilmunafsiiga waxay sheegaan haddii qofku badsado fekradaha taban ee xuma sheega ah, waxay qofka dhaxalsiisaa in uu noqdo qof aan waxba qabsan karin. Fekradahaasi waxay isku beddeli karaan kuwa ficil, dhaqan iyo caado ah. Kalsoonidu waa mid ka mid ah albaabada ugu muhiimsan ee laga galo guusha. Haddii aad kalsooni isku qabto shaki kuma jiro in aad noqonayso qof ka guul gaari kara guul walba oo maankiisu janto.

Diinteena suubban waxay na-baraysaa in aynu noqono kuwo dhinac kasta ka leh kalsooni buuxda keli aysan ahayn wax ku saabsan nolosha balse ay tahay in sideedaba aynu la imaano go'aan qaadasho ku dhisan kalsooni weyn. Alle wuxuu leeyahay “Waxaad talo saarataa Eebbe aan dhiman ee nool mar kasta taasina waa arrinta ugu adag ee ku baraysa in taladu tahay mid Alle oo keliya.”

Ha ku qancin wax yar oo dhalanteed ah balse noqo qof hankiisu weyn yahay oo leh yool, iskana

ilaali shakiga badan, waayo wuxuu keena kalsooniddarro sababi karta guuldarro. Meel sare ku qoro xikmadda oranaysa: *Haddaad doonayso in aad la duusho shimbirka hawada sare maraya waqti badan yuusan kaaga lumin digaagga dhulka hoose socda.*

Guusha iyo guuldarrada, labaduba ma aha wax mar keli ah iska dhaca ee waa natiijada dadaal socday waqti badan, markaad diiddo in ay ku hakiyaan duruufaha isbeddelaya ee aad weerar jooqta ah ku hayso yoolkaaga, la seexato, lana soo toosto, markaas ayay macne yeelanaysaa kalsoonida nafta.

Dabcan kalsoonida nafta waa furaha guusha, waana sharafka uu ku faano guulayste walba. Inta aad yara nasato nafsaddaada shir la qaado, ka fikir sida ay wax u socdaan, isweyddii hawlihii ku soo maray, kuwii aad ku guulaysatay iyo kuwii aad ku guuldarraysatay, kala sheekayso nafta hawlaha ku horyaalla ee u baahan in aad dhammaystirto.

### **Macluumaad Raadin**

Haddii aad iskuddaydo in aad wax samayso ama soosaarto wax cusub, waxaad arkaysaa in hortaa dad kale sameeyeen, taasina waa xog wanaagsan waayo looma baahna in aad dib u hal-abuurto kumbuyuutar, gaari, kaamiro, marwaxad iwm, maxaayeelay horay ayaaba loo hal-abuuray marka shaqadaada way iska dhib yar tahay keli waa in aad raadisaa xog kaa caawinaysa guusha aad doonayso in aad xaqiijiso.

Dhanka kale, haddii aad rabto in aad ku safarto badda biyaha furan waxaad u baahan tahay in aad hesho jiheeye kugu haga waddada saxda ah ee ku gaarsiin karta hadafkaaga, sow sidaas ma aha? Hannaanka ku dhisan xog raadinta waa hab kusalaysan saadaalin lagu gaari karo yool ku dhisan garaad iyo xeer dejisan. Sidoo kale, waxaa jira hannaan kale oo loo yaqaano *adeegsiga dadka kale aqoontooda*. Haddii aad iskuddaydo in aad wax cusub samayso marka hore waa in aad heshaa tusaale aad kaga dayan karto waxa aad rabto in aad samayso.

Sideedaba, guusha meel fog kaama jirto keli waxaad u baahan tahay in aad hesho qof toosh kuugu ifiyo, oo ku tusiya sida loo abbaaro waddada guusha.

## **Dhaqangelinta Macluumaadka**

Waxaad u dhaqaaqday waddada guusha markii aad heshay xog ku saabsan sidii aad ku gaari lahayd guul, xogtaas oo ah dhaqangelinta wixii aad soo baratay. Midna ku baraarug, aqoon aan ficil lahayn waxay la mid tahay aqoon la'aan.

Waxaa kaloo jira dad hela xogta balse dib u dhiga oo la suga waqti ku habboon, marka ha ku hodmin hadallada taban ee ku oranaya ma ahan waqtigii ku habboonaa. Xilliga ugu habboon ee aad dhaqangelin karto waa waqtigan, isla hadda bilow dhaqangelinta xogta uu ku siin doono buugga.

Sida ku qoran buugga (*Sayniska aad ku gaari karto hodantinnimo*) ee uu qoray Wallace D. Wattles<sup>19</sup> wuxuu yiri “Ha sugin in deggaanku ku beddello laakiin adiga sabab u noqo sidii aad ku beddeli lahayd deggaanka adiga oo u sii maraya ficillada iyo tallaabooyinka aad qaadayso.” Waxaa kuu habboon in aadan sugin guusha, ee iskudday in aad adiga raadiso.

Hambalyo! Adigana isku hambalyeey maxaayeelay waxaan kuu sameeyay qaaciddo fudud oo aad adeegsan karto si aad u gaarto guuloo dhan.

## **Qaaciddada Guusha**

**Himilo** lagu daray **Yool** lagu daray **Jamasho** lagu daray **Go’aan** lagu daray **Xirfad** lagu daray **Kalsooni** lagu daray **Rumayn** lagu daray **Joogtayn** waxay ku gaarsiin karaan **GUUSHA aad raadinayso!**

Hubanti, in taladu kuu suuban tahay subaxa aad joogto ee waxaan talo kugu siinayaa in aad dhaqangeliso qaaciddadan. Haddii aad sidaas fasho, oo aad naftaada u bandhigto waa hubaal in aad heli karayso mirodhal aad ku faraxdo, weliba in aad si dhaqso ah ku gaarayso guusha aad u qalanto.

Waxaa jirta sheeko ku qoran buugga (*Xorriyadda ma aba bilaash*) ee uu qoray Dr. Shive Khera, waxaa jiray koox doolli (Jiir) ah, oo kuwada noolaa hal guri, gurigaaasna ma joogin bisad (Mukulaal ama yaanyuur) marka doollidu

---

<sup>19</sup>Wallace D. Wattles: waa qoraa, dhiirrigeliye, una dhashay dalka maraykanka.

waxay samayn jireen inta ay bannaanka usoo baxaan ayay waxay rabaan cuni jireen, qasi jireen ilaa markii dambe ninkii guriga lahaa uu keensaday bisad u tabba baran sida doollida loo ugaarsado.

Doollidii cabsi ayaa soo foodsartey waayo markii hore waxay haysteen xuriyad ay bannaanka ugu soo baxaan, laakiinse hadda godkooda kama soo baxaan. Sidaas darteed way isku yimaadeen si ay uga tashadaan halista soo foodsartey, waxay go'aansadeen in ay la taliye raadsadaan markii ay la taliyihii u tageyn ayay u sheegeen dhibka haysta, waxayna ka codsadeen in uu talo siiyo.

La taliyihii wuxuu ku yiri “Taasi waa iska fudeed keliya waxaad samaysaan intaad gambaleel (Dawan) soo qaadataan qoorta uga xira bisadda si aad u maqashaan dhawaaqa gambaleelka marka ay xagiina u soo socoto.” Aamusnaan ka dib ayaa doolligii ugu yaraa wuxuu la soo booday “Yaa u dhowaan kara oo gambaleelka qoorta ugu xiri kara? La taliyihii wuxuu ugu jawaabay taasi aniga shaqadaydu ma aha keliya talo fiican ayaan idin siiyay.

Maalin ka dib ayaa doolligii yaraa wuxuu la yimid fikrad wanaagsan taas oo ahayd markii ay bisadda seexato in caanaha loogu daro kaniiniga hurdada, markii ay seexatona gambaleelka qoorta loogu xiro. Sidi ayay sameeyeen taasina waxay keentay in ay xoriyaddoodii dib u helaan, cabsidiina ay sidaas ku daysay.

Si kastaba, dulucda sheekadu leedahay waxay tahay ogow taladu in ay marwalba adiga wax ku



tareyso, ee waxaan talo kugu siinayaa dhaqangelinta qaacidada guusha.

Si aad u adeegsato qaacidadda guusha marka hore garo waxay tahay himiladaada, ka dib dejiso yool, lana imow kalsooni, yeelo tab ama xirfad, sidoo kale jeclow oo u boholyow yoolkaaga, qaado go'aan adag oo aan laablakac ahayn, gaadiidna ka dhigo xeerka joogtaynta.

### **Yeelo Tab ama Farsamo**

Weerta tab waa wax aad si wanaagsan u taqaan. Tusaale, *Fardafuul*, *Shiishyaban*, *Ugaaryaban*, *Oradyaban*. Fardafuulku waa nin yaqaan tabta iyo habka loo hannaaniyo fardaha marka aad guradooda saarantahay, sidoo kale waa nin kala yaqaan, fardaha jaadalkooda, da'dooda iyo sida ay u kala orod badan yihiin, sida mid weliba meel ugu fiicanyahay, dhaqankooda iyo alabkooda ayaan oran karnaa waa tabyaqaan fardood.

Xilligii ay muslimiinta u soo haajireen Magaalada Madiina ayaa Nebiga (swc) wuxuu laba laba u walaaleeyay Ansaar iyo Muhaajiriin, waxaa jiray laba saxaabi oo la walaaleeyay, kuwaas oo kala ahaa Sacad ibnu Rabiic iyo Cabbdiraxmaan ibnu Coof, Alle ha ka raalli noqdo.

Sacad wuxuu ka mid ahaa dadka ugu xoolaha badan Ansaar dhexdeeda wuxuu ku yiri “Aniga waxaan ka mid ahay dadka ugu xoolaha badan, laba xaasna waan leeyahay marka xoolahayga laba u dhig qeyb qaado, sidoo kale xaasaskaygana soo eego tii ku qanciso ayaan kuu furi doonaa.”

Mawqifkii Cabdiraxmaan ibnu Coof wuxuu ahaa mid la yaab leh, wuxuu ugu jawaabay “Alle hakuu barakeeyo ee suuqa i tus.” Cabdiraxmaan wuxuu ahaa qof ku kalsoon naftiisa, sidoo kale wuxuu ahaa qof leh tab iyo xirfad ku salaysan sida wax loo kala dillaalo. Waqti dheer kama soo wareegan, waxaa kulmay Nebiga (swc) iyo Abdirahman Alle ha ka raalli noqde. Nebiga swc wuxuu arkay Abdirahman oo wajigiisa ka muuqato farxad markaas ayuu weyddiiyay waa sidee arrinkaagu? Abdirahmaan wuxuu ugu jawaabay Rasuulka Allow waan guursaday. Nebiga (swc) wuxuu mar kale weyddiiyay immisaa meher u siisay? Wuxuu ugu jawaabay laftimireed dahab ah.

Xiisaha ay sheekadu leedahay waxay tahay haddii aad naftaada ku kalsoon tahay, sidoo kale aad leedahay xirfad waxay kugu dhalinaysaa in aad ficil samayso, adiga oo u socda dhanka yoolkaaga.

**“Qof aan dhibtoon ma dheefsado”**

\* \* \*

Tabta ama xirfadda mararka qaar waxay kuu noqon kartaa shabaagti aad ku daban lahayd kalluunka aad isla markaasi u baahan tahay. Haddaba, su’aasha isweyddiinta mudan waxay tahay sidee ayaad ku daban kartaa kalluun adiga oon soo baran sida loo kalluumaysto? Dabcan, Haddaad doonayso in aad ugaarsato guusha waa

in aad la timaaddaa tabtii iyo xeeladdii aad ku ugaarsan lahayd.

Waxaa jirta sheeko <sup>20</sup> ku saabsan hooyo Soomaaliyeed oo ku noolayd mid ka mid ah xeryaha qaxootiga Kenya. Xeryaha waxay ku yaallaan deggaanka soohdimaha ee u dhaxeeya labada dal: Kenya iyo Soomaaliya. Koraad Cabdi, waxay ku soo barbaartay nolol sabool ah, aabbahayd wuxuu dhintay iyada oo yar, si ay ugu filnaanto nolol maalmeedkeeda ayay khudaar ku gadi jirtay suuqa iyada oo gabar yar ah.

Koraad, dadka intooda badan waxay u yaqaanaan Sacdiyo marnaba ma iloobin noloshii adkayd ay ku soo kortay. Mar iyada oo la hadashay wargeyska 'Mogadishu Times,' waxay tiri: "Maalinna waan quudan jirnayna maalina waa qadi jirney." Waxay sii raacisay in markii ay dhashay gabadheeda in aysan saddex maalmood helin wax ay cunto. Heerkaas ayay saboolnimo ka gaartay.

Sacdiyo, waxay aad ugu fiicnayd cunto kariska markii ay timid dalka maraykanka ayaa saxiibadeed kula taliyeen in ay ka ganacsato cuntada ay kariso waayo iyada oo qaxootiga joogta ayay samayn jirtay cuntooyinka macmacaanka ah. Waxay bilowday in ay ganacsi ka samayso oo ay iibiso basbaaska ay gurigeeda ku samayso, oo uu qof walba jeclaaday.

Siddeed sano ka dib waxay hadda madax u tahay shirkad raasul maalkeedu lagu qiyaasay labaatan milyan oo doollar. Basbaaskeeda waxaa lagu gadaa dukaamada ugu waaweyn ee dalka

---

<sup>20</sup>Sheekadan waxaa laga soo xigtay: <http://mqtimes.com/?p=1267>

maraykanka, sidoo kale waxaa laga sameeyay qoraallo badan.

Dadka ka hadlay basbaaskeeda waxaa ka mid ahaa duqii hore ee magaalada Minneapolis, R. T. Rybak. Shirkadda ay madaxda ka tahay marka lagu qiimeeyo suuqyada maraykanka wuxuu u qalmaa boqol milyan oo doollar, waxay waxaas oo dhan samaysay iyada oo ah hooyo korinaysa sagaal carruur ah.

Haddaba, xikmadda ay sheekadeedu leedahay waxay tahay haddii aad dadaasho sida ay Sacdiyo u dadaashay oo kale, adiga oo kaashanaya tabtaada iyo xirfaddaada aqooneed, hubanti inaad ka guul gaari karto yoolkaaga.

Fiiri shaxda hoose ee aan kuu sameeyay, waxaad isbarbardhig ku samaysaa celceliska dhibcaha ay haystaan saddexda qof iyo adiga dhibcahaaga, adiga oo dhammaystiraya qaybta ka bannaan shaxda.

Marka hore ku bilow magacaaga.

### Shaxda Guusha

	<i>B. Gates</i>	<i>A. Dangoti</i>	<i>Guuldarrole</i>	
<i>Himilo</i>	<i>80</i>	<i>90</i>	<i>12</i>	
<i>Yool</i>	<i>77</i>	<i>73</i>	<i>15</i>	
<i>Jamasho</i>	<i>70</i>	<i>89</i>	<i>10</i>	
<i>Go'aan</i>	<i>95</i>	<i>92</i>	<i>11</i>	
<i>Xirfad</i>	<i>92</i>	<i>78</i>	<i>20</i>	
<i>Kalsooni</i>	<i>80</i>	<i>75</i>	<i>3</i>	
<i>Rumayn</i>	<i>99</i>	<i>80</i>	<i>5</i>	
<i>Joogtayn</i>	<i>90</i>	<i>91</i>	<i>13</i>	
	<i>85%</i>	<i>83.5%</i>	<i>11%</i>	

Labada qof waa Bill gates iyo Aliko Dangoti, waa laba qof oo guushooda la wada ogsoon yahay, balse guuldarroole wuxuu helay in ka yar boqolkiiba konton, taas oo ah dhibco ka yar intii loogu talaggalay in loogu gudbo xayndaabka guusha, wuxuu sidaas ku noqday guuldarroole.

Abwaan Gaariye, Alle ha u naxariiste wuxuu yiri:

*“Haddan gugii kuu kordhaa  
Gabow mooye ku tarin  
Garaad iyo waayo arag  
Ogow ma gudbaad tahee.”*

Sidoo kale, Feeryahankii Maxamed Cali kalaay, isagana wuxuu yiri “Qofka isaga oo 50 jir ah dunidaan u arko waaggii uu 20 jirka ahaa qofkaasi wuxuu dibudhacay 30 sano.” Ujeedku waa haddii aad weli joogto meeshii aad joogtay shan sano ka hor, oo aadan kordhisan garaad iyo ogaal toona ogow waxaad u baahan tahay in aad isku miisaanto shaxda guusha, waayo? Waxay kaa caawinaysaa in aad miisaanka isa saarto oo aad is qiimayso inta aad u jirto guusha.

Shaxda guusha waa halbeeg ku habboon in loo adeegsado horumarka nololaha. Dabcan, guusha waa saameyn ka dhalatay sababo isku tegay sida *bimilo, yool, jamasho, go’aan adag, xirfad, kalsooni iyo joogtayn*. Sikastaba, haddii aad ogtahay in guushu kaaga xiran tahay tallaabooyinka iyo falalka aad horuqaaddo in aad sii fadhiso waa kuu doqonnimo, hurdada ka toos oo faraskaaga ha dheereeyo.

# 5

## HA CUDURDAARAN

*“Jooji dhaqan walba oo kugu caawin  
kara in aad Cudurdaarato”*

**D**adka intooda badan waxay waqtigooda ku lumiyaan sidii ay cudurdaarro badan u samayn lahaayeen. Waxaad arkaysaa dad badan oo fursad u heli kara in ay waxbarasho aadaan balse aan waxbaran, markii aad weyddiiso sababta waxay billaabayaan cudurdaarro tiro badan. Taasi waxay ku tusinaysaa in cudurdaarku uu ka mid yahay mid ka mida ceebaha uu bini’aadamku leeyahay. Cudurdaarku waxaa saldhig u ah sababta uu qofka ka dhigto gabaad iyo gaashaan uu isaga dhigo in dhaliil ama eedi uga timaaddo cidda uu markaasi u cudurdaaranayo. Sidaas darteed, dadku waxay isku khaldaan sabab sheegid iyo cudurdaarasho.

Sabab sheegiddu waa wax ku dhisan run madaxbannaan, taas oo aan ahayn wax xaggaaga ka yimid, masuuliyaddeedana aadan lahayn halka cudurdaarashadu ka tahay iskudday aad naftaada kaga difaacayso eedda iyo in aad diiddan tahay masuuliyadda.

Tusaale, beri waxaa jira kulanka guud ee shaqaalaha shirkadda, waana lagu wargeliyay, waxaa kaloo lagaa doonayaa in aad ka soo qaybgasho. Waad ka soo daahday kulankii, markii lagu weyddiiyey waxaad ku cudurdaaratay in baskii kaa tegay. Taasi waa cudurdaar, balse ma aha sabab kaa reebi karta in aad ka soo qaybgasho kulanka, weliba aad ku timaaddo isla waqtigii loogu talaggalay.

Sababtu waa in ay tahay wax dhacay oo aadan masuuliyaddeeda lahayn. Ka warran haddii aad dhihi lahayd baskii aan saarnaa ayaa dhex ku halaabay, taasi waxay noqon kartaa sabab waayo cilladda buska ma aha wax xaggaaga ka yimid ee waa qaddar Alle.

Dadyowga sameeya cudurdaarka waxay u badan yihiin kuwa isticmaala kelmedaha sida: *Iga raalli noqo, waan soo daahay, waqti ayaan u waayay, burdo ayaa ila tegtay, waan hawsbooday, waan hilmaamay, waan ka daaley, sidoo kale dadku waxyaabaha ay inta badan ka cudurdaartaan waxaa ka mida waqtiga.*

Dadka qaar markaad weyddiiso maxaad wax u qabsan weyday ama wax u baran weyday, durbadiiba waxay la soo boodaan waqti uma aynan hayn. Ha ka been sheegin waqtiga waayo

waxaad haysataa waqti la mida waqtigii ay haystayn Nabi Mohamed CS, Saxaabada RC. Iyo rag badan oo dunida magac kaga tegay sida:: Albert Einstein, Thomas Edison, Mohatma Ghandi waana afar iyo labaatan saac.

Haddii aad waqtigaaga wax ku qabsan weyday xaq uma lihid in aad ka been sheegto, oo aad cudurdaar ka dhigato waqtiga.

“

**Noqo sida birta oo kale, ha noqon muraayad,**

**hana samayn cudurdaar si uusan dubbaha**

**kuu kala dhantaalin”**

\*\*\*

Cudurdaarku waa sidii dubbaha oo kale, waayo dubbaha haddii uu muraayad ku dhaco wuu burburiyaa, balse haddii uu ku dhaco birta wuu qurxiyaa, adigana noqo sida birta oo kale, ha noqon muraayad, hana samayn cudurdaar si uusan dubbaha kuu kala dhantaalin. Intaas waxaa sii dheer, haddii aad markasta cudurdaarato ogow in guuldarro lama huraan tahay. Cudurdaarka aynu sameyno lamaxisaabin karo, adiga un dib isku xisaabi immisa jeer ayaad cudurdaar samaysaa maalin walba?

Tusaale, markaad shaqada ka soo daahdo maxaad maamulahaaga u sheegtaa? Haddii aad ka soo daahdo qof aad ballantayn maxaad qofkaasi ku qancisaa? Shaqo lagaa rabay in aad qabato haddii aad u qaban weyso sidii loogu talaggalay maxaad samaysaa? Iskusoowadadduub, jawaabtu waa cudurdaar! Waxaad arkaysaa qof hiigsan



waayay yoolkiisa, wuxuu sheegtaaba waa cudurdaar tiro badan, laakiin natiijadu waa in uusan weli gaarin yoolkii uu hiigsanaayay.

Waxaa jira dad badan oo yaraantoodii wax soo baran, haddii aad weyddiiso, sababta keentay in aysan waxbaran waxay u badan tahay in ay kuu sheegaan cudurdaar, haddii aad ku dhahdo Mudane/Marwo weli waxaad haysataa kansho iyo waqti aad aqoondarrada kaga bixi karto ee diyaar ma u tahay?

Waxay u badan tahay in ay cudurdaar ka dhigtaan da'da, waqtiga, gacan marnaan iwm. Waxaa suurtaggal ah in uu ku dhaho, waxaan ahay lixdan jir hadda miyaan iskuul fadhiisan karaa; maskaxdaydu way cuslaatay; haleelkaa igu yar. Taasi ma run baa? Maya waa been abuur ku dhisan cudurdaarasho.

Bal aan kula wadaago sheeko ku saabsan nin oday lixdan jir ah, wuxuu degan yahay magaalada balcad ee gobolka shabeellaha dhexe. Wuxuu tusaale dhab ah u noqday kuwa isku hawlay in ay ku cudurdaartaan amminxumo iyo da'da, isaga oo 60 jir ah ayuu u fadhiistay imtixaanka dugsigga sare ee sannad dugsiyeedka 2015-2016.

Wuxuu yiri "Markii aan billaabay waxbarashada dadku waxay u arkaayeen wax aan suurtaggal ahayn balse maanta ayay ku baraarugayn suurtaggalnimada wax walba, sidoo kale hadda waxaan qorsheynayaa in aan sii wado waxbarashada ilaa aan ka gaaro heer jaamacadeed."

Sikastaba, xiisaha ay sheekadiisu leedahay waxay tahay in uu tusaale nool u noqday qof walba oo da'diisa oo kale ah, in uu iskuul aadi karo, waxbaran karo, fasal fadhiisan karo, jaamacadna ka qalinqoran karo laakiin aysan isku xirnayn da'da iyo waxbarasho la'aan.

Zulfiya Gabidullina waa haweeney 50 jir ah, oo ka soojeedda dalka Kazakhstan. Waxay noqotay haweeneydii ugu horreysay ee ku guulaysatay biladda ciyaaraha fudud olombikada gu'gii 2016. Waxay gaartay yoolkeedii, iyada oo u soo hoyisay dalkeeda biladdii ugu horreysay ee ciyaaraha olombikada.

Iskahilmaam cudurdaarasho, keliya waxaad hurtaa sannado yar oo aad dhib dareemayso, inta ka dhiman noloshada waxaad ku noolaan doontaa nolol ku dhisan riyaaq iyo reynreyn nololeed.

## **Garo Sacaaga**

Maxaad u cudurdaarataa? Dadka cudurdaarka badan waxay marwalba isku hawlaan sidii ay naftooda uga bari yeeli lahaayeen khaladaadkii ka dhacay, iyaga oo dusha uga tuura dad kale. Cudurdaarku waa been abuur laysaga badbaadiyo daldaloolka muuqda.

Waxaa jirta sheeko ku saabsan dadka cudurdaarrada sameeya, sheekadu waxay ku magac dheer tahay sacaaga dil. Waxay ku qoran tahay buugga (*Himillaadaada Hano*) ee uu qoray Maxamed siibed. Asalka sheekadan waxaa laga soo xigtay

buugga (*Beri baa waxaa jiray Sac*) ee uu qoray *Dr. Cruz Camilo*.

Waxaa jiray nin murti badan oo dadku talo iyo waano u raadsadaan. Maalin maalmaha ka mida ayaa waxaa u yimid wiil dhallinyaro ah, wuxuu weyddiistay murti waxtar u leh noloshiisa si uu wax u qabsado adduun iyo aakhiraba.

Murti badane wuxuu uu ballanqaaday in uu tusi doono waxa murtidu tahay. Waxay isla galayn safar dheer, habeen iyo maalin waxay socdaynba, Murti badane wuxuu wiilkii u sheegay in uu raadinayo reerka ugu saboolsan tuullada ay marayaan.

Wax yar dabadeed ayay arkeen guri doqosh ah, guriga bannaankiisa waxaa ku xiran sac reerku leeyahay. Reerku wuxuu ka koobnaa sideed qof, sideeddaas qof waxay giddigood ku hawlan yihiin sacaas: mid lisa, mid caws u dhiga, mid daajiya, mid moorada u ooda. Murti badane wuxuu wiilkii ku yiri “Caawo reerkaan ayaynu u hoyanaynaa.” Reerkii waa soo dhoweeyeen martida u timid iyaga oo ka cudurdaartay in sacaas caanihiisa mooyee aysan wax kale awoodin.

Isla habeenkii Murti badane wuxuu reerka ku wargeliyey in subaxa hore arroortii sii dheelman doonaan, waana nabdeeyay reerka. Inta aysan dheelman ka hor, Murti badane intuu billaawe la baxay ayuu sacii reerka gowracay. Wiilkii ayaa ku qayliyay “Sacaas keliya ayuu reerku lahaa ee maxaad u dishay.” Murti badane qayladii wiilka dhegjalq uma siin ee socodkiisa ayuu iska sii watay.

Hal sano markii ay ka soo wareegtey ayaa Murti badane iyo wiilkii waxay yimaadeen tuulladii ay saca reerka kaga dileen, wiilkii ayaa garan waayay gurigii waayo gurigii doqoshka ahaa waxaa beddelay guri cusub oo dhagax ah, guriga hortisa waxaa ku horyaalla beer aad u ballaaran oo dadka jooga ay mashquul yihiin; qof walbana hawl gacanta kula jiro.

Gurigii ayay yimaadeen oo reerkii bariidiyeen, waa la is gartay oo la is warraystay, reerkii waxay u sheegeen in habeenkii ay ka tegayn waaberigeedii mid inkaar qaba uu sacoodii ka dilay, in ay maalmo barooranaayeen, markii dambena derisku u soo gurmaday. Ugu dambayntii, in ay garawsadeen in ay u baahan yihiin in ay wax ka beddelaan noloshooda is ay u qabsadaan.

Markaas ayay go'aansadeen in ay beer fashaan, abuurkiina way deyn qaateen. Markii beertii u soo go'day waxay bixiyeen wixii deyn lagu lahaa, waxayna iib geeyeen wixii u haray, iyagoo ka reebtay abuur kayd ah.

Dheeftii ka soo gashay badarkii ay iib geeyeen waxay ku dhisteen gurigooda cusub, haddana waxay qorshaynayaan in ay soo gataan lo' badan si ay caanaha ugu ganacsadaan. Waxay yiraahdeen "Inkasta oo markii hore aad ugu barooranay dilkii saca haddana waxa aanu ogaanay waxa horumarka noo diidaayay in uu haa saca aynu ku mashquulnay." Murti badane wuxuu ku yiri wiilkii "Murtida nolosha ee lagu horumaro waa adiga oo dila sacaaga."

Qof walba wuxuu leeyahay sac ka hortaagan in uu horumar sameeyo, marka waa adiga qofka la rabo in uu garto saciisa ka dib gawraca si uu u gaaro nolol ka duwan tii hore. Anigu waan garan karaa sacayga balse adigu ma garan kartaa sacaaga? Saca aan tilmaamayo ma aha kii aynu caanaha ka cabi jirnay ee waa midka aan kuu oggolayn in aad horumar samayso, oo aad ku noolaato nolol ku dhisan gobannimo iyo guul.

Bal aan kula wadaago sacaas magaciisa si aad isaga ilaaliso suntiisa, saca waa cudurdaar! Isweyddii laba su'aal: Maxaa cudurdaar ii ah? Sidee ayaan ku garan karaa sacayga? Markii aad hesho jawaabta saxda ah ee su'aasha hore waxaad si fudud ku heli kartaa jawaabta su'aasha dambe.

**“  
Qofkii diida in uu buuraha koro wuxuu  
weliigiis ku noolaadaa godadka hoose”**

**\* \* \***

Marwalba oo aad cudurdaar samayso waxaad dhaawacday milgahaaga iyo kalsoonidii ay dadku kugu qabeen, sidoo kale haddii cudurdaarkaagu bato waxaad ku jirtaa halis, waayo haddii aad maanta cudurdaarato muran kuma jiro in aad berina cudurdaaran doonto, taas oo deddejinaysa in aad ku fashilanto xaqiijinta yoolkaaga.

Go'aanso in gurigaaga iyo goobtaada shaqada aad ka dhigto goob ka madaxbannaan cudurdaar, haddii ay jiraanna cudurdaaro aad horay u samaysay la imow oggolaansho ku aaddan masuuliyaddeeda. Iskudday in aad soo ogaato

waxyaabaha kugu dhaliyey in aad samayso cudurdaaradaas tirada badan. Haddaad ogaato sababta waxaad heshay qayb ka mida xalka.

Ma jeceshahay in aad dadka ka maqasho hadallo ku dhisan cudurdaar? Jawaabta waa maya, sidoo kale iyagana ma jeclo in ay kaa maqlaan cudurdaar. Arrinku waa laba daran mid dooro; in aad cudurdaarka doorato iyo in aad ka fogaato.

Bal aan kula wadaago sheeko gaaban oo aniga igu saabsan, taas oo aan ka helay khibrad weyn. Sannadkii 2011, waxaan ahaa arday dhigta fasalka saddexaad ee dugsiga sare. Waan ka habsamay waxbarashadaydii iskuulka, waayo waxaan fursad shaqo ka helay dekedda Muqdisho gaar ahaan qaybteeda bakhaarada. Islamarkiiba waxaan ka shaqo billaabay bakhaar weyn oo ay raashin ugu xaraysnayd Hay'adda Cunada Adduunka (WFP). Toddoba bilood ka dib, shaqadii waa la iga eryey, waxaa la ii sheegay in go'aanku uu ka soo baxay maamulka sare.

Inkasta oo aan jeclaysan waxa dhacay, haddana intaan joogey shaqada waxaan ku bartay saaxiibo hor leh, sidoo kale waxaan ka dhaxlay khibrad dhanka nolosha ah. Markii aan shaqada ka soo tegay, waxaan dib ugu laabtay waxbarashadaydii iskuulka ilaa aan ka soo gaaray heer jaamacadeed. Markii hore waxaan isku arkay in aan ahaa qof guuldarrastay, laakiin gadaal dambe ayaan ka ogaaday in ay ii ahayd guuldarro la socotay fursad weyn.

Haddaba, waxaa jirta xikmad weyn oo aan ka dhaxlay sheekadan, adiguse maxaad ka baratay? Haddii aan sii joogi lahaa shaqadaas weligay isbeddel maan samayn lahayn, sidoo kale way igu adkaan lahayd in aan soo gaaro heerka aan maanta nolosha ka joogo, waxay ii samayn lahayd cudurdaar weyn oo dhanka nolosha ah.

### **Sidee u dilay Sacayga?**

Markii aan akhriyay sheekadii ahayd sacaaga dil, waxaan ahaa arday dhigta jaamacadda Soomaaliya gaar ahaan kulliyada arrimaha bulshada. Waxaan jaamacadda aadi jiray maalmaha khamiis iyo Jimcaha halka maalmaha kale aan ka shaqeyn jiray telefishin baahiya wararka idaacadda Goolfm iyo Iftin.

Maalin walba waxaan soo aadi jiray goobta shaqada, balse dhowr bilood ka dib ayaan dareemay in shaqadu ii tahay sacii la sheegaayay, durbadiiba waxaan go'aansaday in aan dilo saca, waana dilay! Aan si kale kuugu sheego, waxaan ka tegay shaqadii.

Xilligii aan shaqada ka tegaayay waxay ahayd xilli adag waayo magaalada waxaa ka jiray shaqo la'aan baahsan, wayna adkayd in qofku si fudud ku helo shaqo. Laba arrimood ayaa igu kaliftay in aan sacayga dilo.

Midda koowaad, shaqadu kuma aanan haysan bilgoosad (Mushaar) fiican oo dabooli kara noloshayda iyo tan qoyskaba. Midda labaad, shaqo sideedaba waa in ay tahay mid aqoontaada wax kuugu kordhiso balse ma aha in ay ku

hilmaansiiso intii yarayd ee aad jaamacadda ka soo akhrisatay.

Saca, wuxuu noqon karaa waxwalba oo kaa horistaagi kara horumarka nolosha; waa waxa dib kuu dhiga, ee ku qalqalgeliya markaad dalbato in aad go'aan adag samayso; waana waxa aad ka dhigato cudurdaar kolkaad gaari wayso yoolkaaga.

Maadaama aan sacaygii dilay maxaa xigay? Muddo laba isbuuc ayaan magaalada dhex wareegaayay si aan u helo sac ka duwan kii hore. Nasiibwanaag, waxaa jirtay fursad shaqo oo ka bannaanayd shirkadda war-isgaarsiinta Somtel.

Waan ka wardoonay aniga oo aan qofna ka garanayn, markii aan iskuddayay in aan gudaha u galo shirkadda ayaa waxaa i horistaagay waardihihi Albaabka. Wuxuu i weyddiiyay maxaad doonaysaa? Waxaan u sheegay in aan shaqo-doon ahay. Wuxuu igu yiri yaad ka taqaanaa shirkadda? Waxaan ku dhahay qofna. Wuxuu yiri dib u laabo.

Inkasta oo aysan ii suurtaggalin in maalintaas aan gudaha u galo, haddana ma quusan, islamarkiina isma dhiibin. Maalin labaad ayaan dib u soo laabtay, wuxuu i weyddiiyay isla su'aashii hore. Waxaan ugu jawaabay waxaan ahay shaqo-doon. Wuxuu igu yiri wax yar isug, durbadiiba wuxuu wacay xafiiska shaqada iyo shaqaalaha, wax yar ka dib waxaan gudaha u galay shirkadda, dukumintiyadaydii ayaan ku wareejiyay xafiiska shaqada iyo shaqaalaha.



Nasiibwanaag, afar maalmood markay ka soo wareegtay ayaa waxaa isoo wacay qof ka mid ah xafiiska, wuxuu ii sheegay in beri aan isku soo diyaariyo wareysi. Waan ku guulaystay wareysigii, waxaa ka shaqo billaabay waaxda ganacsiga gaar ahaaan qaybteeda soo dhoweynta macaamilka.

Waxay ii ahayd farxad iyo aqoon. Mar farxad ayay ii ahayd waayo waxaan ku bartay saaxiibo cusub, marna waxay ii ahayd aqoon iyo waaya-aragnimo. Intaas waxaa ii sii dheer, in shaqadu i bartay aqoon ka duwan tii aan horay u watay, waxay ii lahayd laba faa'iido.

Midda koowaad: waxaan ku haystay internet lacag la'aan ah, taasi waxay iga caawisay in aan internetka ka diyaariyo laba iyo toban koorso, oo aan intaba ka qaatay shahaaddooyiin, kana sameeyay jaamacado caalami ah sida: *Jaamacadda Manchester, Macquarie, Tasmania, Polytechnic West, Griffith, Western Sydney, Newcastle-Australia, Open training institute, Leicester*. Midda labaad: Inkasta oo bil goosadkaygu iska yaraa, haddana shaqadu waxay i bartay xirfado kala duwan sida: abuurista, xirista iyo furista siimakaarada shirkadda.

Qof walba oo naga mida wuxuu leeyahay sac ka hortaagan in uu horumar sameeyo ama sameeyo isbeddel dhanka nolosha ah, haddaba adigu garo sacaaga ka dib dil si aad u gaarto horumar nafeed. Ma kula tahay in uu iska yimaado horumarka nolosha adiga oo aadan dhaqaaq samayn?

Si aad dhaqaaq u samayso waxay kaaga baahan tahay in aad hesho wax kugu dhiirrigeliya waayo waxa aad baadigoobayso waa sidii aad u sameyn lahayd isbeddel horumarineed. Haddaba, isbeddelka nolosha waa la abuuraa ee iskama yimaado.

### **Qorshe ku dhisan isxilqaamid**

1. Samayso waxwalba oo aad ku soo noolayn karto riyadaada, hana samayn cudurdaar; haddaad samayso aqbal oo qaado masuuliyadda.
2. Iskudday in aad marwalba samayso wax aadan horay u samayn jirin, waxaad arki doontaa natiijo ka duwan tii hore.
3. Qor cudurdaaradaadii hore, ka dib go'aanso in aadan mar dambe samayn, ugu dambayna ku tuur godka qashinka.

# 6

## YOOL DHIGASHO

*“Haddii aad doonayso in aad gaarto sharaf  
loo baratamo tan ugu sarayso  
haku qancin meel ka sokaysa dayaxa”*

*Murti Carbeed*

**Y**ool waa ujeeddo kugu hagta waddada guusha, waa qorshe-fulineed ku dhisan ammin go’an, dhab ah, kooban, la gaari karo. Yool la’aani waxay la mid tahay qof aan indha lahayn, oo raba in uu kaligiis socdaalo, isaga oo aan la socon qof haga. Tusaale, haddii aad doonayso in aad u safarto Hargaysa adiga oo jooga Muqdisho maxaad samayn lahayd? Waxaad raadin lahayd wax ku geeya barta aad u socoto sida gaari ama diyaarad. Si la mida, yoolkaagu wuxuu kuu yahay diyaaraddii ku gayn lahayd barta ay ka birqanayso himiladaada.

## **Waxaa jira laba yool**

**1. Yool waqtigiisu dhow yahay:** In layliga jaamacadda aad ku dhammayso muddo lix bilood ah.

**2. Yool waqtigiisu dheer yahay:** In aad dayaxa fuusho.

Kan dambe way adag tahay in aad gaarto, balse haddii aad raacdo qodobbada ku salaysan astaamaha yool dhigashada, hubanti in ay wax badan kaa caawin karaan. Si aad u gaarto natiijo weyn waa in aad marka hore weynaysaa hankaaga. Tusaale, ka dhigo yool in aad cirka jaranjaro ku fuusho adiga oo ujeedkaagu yahay sidii aad u gaari lahayd dayaxa.

“

**Biyo meeshii godan bay isugu tagaan”**

\* \* \*

Qulqulka biyaha ee socda barta ay u socdaan waa yoolkii ay biyuhu lahaayeen, balse waxaa ka hor yimaada dhagxo waaweyn, wax kasta oo biyaha ka hor yimaadana kama baajiyaan in biyuhu gaaraan bar dhammaadkii ay u socdayn. Sidaa si la mid ah qofka yoolka lehi waxaa ka hor imaanaya caqabado badan oo ay tahay in uu mid walba sideeda uga gudbo.

Ka hor inta aadan qoondaysan yoolkaaga, ka baaraandeg in uu yahay mid ku jaan go’an awooddaada iyo aqoolkaaga nololeed. Ma yahay mid suurtagalnimadiisu tahay mid sugan? Haddii aysan jirin baaraandeg iyo qorshayn waxaad kala

kulmi doontaa dhibaatooyin badan, oo ay ka mid tahay in aad gaari wayso yoolkaaga.

Yoolkaagu waa in uu yahay mid kooban, tusaale: waxaad rabtaa in aad layliga jamacadda ku diyaariso muddo dhan toddobaad balse waa in uusan ka dhex bixin xayndaabka waxa aad doonayso. Yoolkaagu waa in uu yahay mid la cabbiro karo, sidoo kale waxaad u baahan tahay in aad dejisato waqtiga uu kugu qaadan karo bar dhammaadka yoolka. Tusaale, waxaad yool ka dhigatay in aad ku diyaariso layliga jaamacadda 30 Oktoobar ilaa 30 Nofeembar, haddii aad ku soo gabagabayso 30 Nofeembar waxaad noqonaysaa qof yoolkii uu dejistay ka guul gaaray.

Yoolkaagu waa in uu yahay mid la gaari karo, sidoo kale ka hor inta aadan dejisan waa in aad iska hubisaa inta uu la'eg yahay dhaqaalahaaga iyo awoodda aad u yeelan karto xaqiijintiisa. Tusaale, haddii aad yool ka dhigato in aad habeen qura martisoorto dhammaan dumarka magaalada jooga, taasi ma tahay yool lagu gaari karo goorayntiisa? Balse haddii aad yool ka dhigato in aad soonto maalin walba oo isniin ah, hubanti waad gaari kartaa yoolkaas, weliba waxaad ku gaari karaysaa isla waqtiga aad ugu talaggashay in aad ku xaqiijiso.

Yoolkaagu waa in uu yahay mid ku dhisan ammin. Waa in uu leeyahay laba waqti: Mid billaabasho iyo mid dhammaad.

Iskusoowadadduub, yoolkaagu ha noqdo mid gaaristiisa ka dib aadan ka xiiso dhigin. Waxaad yoolkaaga ku xirta hawl soconaysa, ka dhig yoolkaaga hawsha aad qabanayso laakiin ha ku sirmin magaca. Yacni ha ku xulan yoolka magaca uu wato. Tusaale, waxaad yool ka dhigatay in aad noqoto dhaqtar, haddii aad gaarto hadafkaas oo aad noqoto dhaqtar magac leh, waxaad noqonaysaa qof yoolkii uu lahaa gaaray ka dibna xiiso dhigay. Si aysan taasi kuugu dhicin marka hore yoolkaaga ku xir hawsha dhaqtarnimada.

### **Maxaad doonaysaa?**

Su'aashu ma sahlana! Si kale u dhig, tobanka sano ee soosocata derajo nooc ee ah ayaad rabtaa in aad xaqiijiso? Bal aan si kale kuu weyddiiyo, mustaqbalka maxaad doonaysaa in aad noqoto? Muddo lix sano ayaan raadinaayay jawaabta weyddiintaas, waxay ahayd su'aal igu adag, kaaga sii daran! Weligay intaan meel fadhiistay jawaabteeda ma raadin.

Muddo ka dib ayaan helay hab ama waddo fudud oo aan ku ogaaday waxa aan doonayo. Bal aan kula wadaago habkaas, tix saddex derajo ama hadaf oo aad rabto in aad xaqiijiso mustaqbalka. Fiiri tusaallahayga:

1. Bare Sare.
2. Qoraa.
3. Siyaasi.

Waxaan iska weyddiiyey laba su'aal sida maxaan u doonayaa bare sare, qoraa iyo siyaasi?

Si aan u gaaro hadafkaas ilaa iyo hadda maxaan qabtay?

Sababta aan u rabo bare sarennimada iyo qoraannimada waxaa ii soo baxday laba ujeeddo oo kala ah: saamayn iyo dhaxalreeb. Sidoo kale, siyaasinnimada waxaa ii soo baxday: saamayn.

Labada hore, si aan u gaaro wax badan baan qabtay sida qoraallo badan iyo buug ayaan soosaaray, welina waan u halgamayaa. Dhanka siyaasinnimada, waxaa ii soo baxday in aan weli tallaab qaadin, laakiin aan ku rejo weynahay mustaqbalka fog.

Ugu dambayn, habkaas ama waddadaas waxaan ku daahfuray yoolalkii aan rabay, waxaan rabay in aan gaaro laba hadaf: *In aan noqdo qof saamayn ku leh dunida iyo in aan ka tego dhaxalreeb ku saabsan feker felsefadeed, aqoon ku sii waarta dunida ama aan taariikh sameeyo.*

## **Ka baaraandeg Yoolkaaga**

Ka baaraandeg yoolkaaga adiga oo isweyddiinaya si daran miyaan ugu baahannahay? Ma iga go'antahay in aan naftayda u huro? Caqabado noocee ah ayaa iga xayiri kara? Dhammaan waa su'aallo u baahan in aad isweyddiiso ka hor inta aadan dejisan yoolka. Haddaba, meel sare ku qoro xikmaddan oranaysa: *Haddaad yool ka dhigato madaxa korkiisa in aadan weligaa gaarin baa la arkaa balse haddaad ka dhigato dayaxa waxaad gaaraysaa meel fog.*

Maxaad ku diiddan tahay isbeddelka? Maxaad ku diiddan tahay in aad yool dejisato? Miyey kula

tahay in guushu ay fadhiga kuugu imaanayso? Maya sidaas ha ku fikirin waayo guushu markaad dalbato durbadiiba iskama timaade sababo isbiirsaday ayay ku timaaddaa marka baro sababahaas si aad u hesho sirta guusha.

Waxa ugu horreeya ee aad samayn karto waa in aad fadhiga ka kacdo, oo aad istaagto ka dibna horay u dhaqaaqdo adiga oo raacaya waddada guusha, taas oo kuu ah yoolka. Ka dhigo sahay; *Adkaysi, jamasho, hiyi (Xamaasad), tab (Xirfad), kalsooni iyo go'aan adag.*

“

**Inta hankaagu yahay un baad adiguna**

**tahay”**

**\* \* \***

Miyaad doonaysaa in aad ku noolaato nolosha noolaha ma yeeraanka oo kale ah mise mid ka duwan? Waayo noolaha ma yareenku waxbuu cuna, cabaa, wuuna seexdana, sidoo kale adigana waad cuntaa, cabtaa, seexataa, haddaba maxaad ku kala duwan tihiiin?

Waxaa loo baahan yahay in aadan noqon qofka caloosha ka fikira, balse noqo qofka maskaxdiisu fikirta. Sababta aan sidaas u leeyahay waxay tahay waxaan rabaa in aad yeelato han sare si aad uga duwanaato noolaha kale. Mark Twain, waa qoraa buuggaag badan ka qoray horumarinta nolosha, wuxuu yiri “Labada maalmood ee noloshaada ugu mudan waa maalintaad dhalato iyo maalintaad ogaato hadafka nolosha.”



Qofka go'aan adag qaatay, ee raba in uu sameeyo isbeddel dhanka nolosha ah ayuu illaahey u fududeeyaa gaaritaanka himiladiisa; qofka nolosha hadaf ka yeeshay ayuu illaahey u sahlaa suurtaggelnimada yoolkiisa; qofka diida in uu ku noolaado hammiga noolaha ma yareenka ah ayuu illaahey tusaa halbeega nolosha; balse qofka doorbida nolosha hoose ee ku kooban cunista iyo cabista ee aan la socon aragti fog iyo halgan toona ayaa arka cabsida saboolnimada. Ha noqon qofkaas oo kale Illaahey kaama dhige.

Maxaa ku jaban haddii yoolkaaga aad ku bees garayso qorshe-fulineed kuu jiheynta kara dhanka guusha? Maxaa ku jaban haddii aad mar walba oo aad salaadda tukato ka dib aad ku ducaysato: Allow ii sahal himiladayda iyo halkaan hiigsanaayo; Allow ii yeel waddadii aan ku gaari lahaa guusha; Allow iigu kaalmay adkaysi iyo kalsooni.

Bini'aadamku isku mid ma wada aha! Waayo qaar baa jira oo aan ku dhicin in ay yool dejistaan; qaar baa yool leh balse rumaysan in aysan suurtaggali karin; qaar kale inta ay yool dhigtaan ayay iska dabasocdaan, ka dibna markay daalaan durbadiiba is-dhiiba. Dhanka kale, waxaa jira dad yar oo yool leh, rumaysan in ay ka run sheegi karaan yoolkooda, kuna tallaabsada fal walba oo u jihaynta kara yoolkooda. Kuwaas way guulaystaan, waxayna bulshada ka yihiin boqolkiiba labaan.

Haddaba, diyaar ma u tahay in aad ka mid noqoto xertaas bulshada dhexdeeda ka ah boqolkiiba labaan? Markasta oo aad sahmiso meel sare, oo aad iskuddaydo in aad ka salgaarto

yoolkaaga waxa ugu horreeya ee kaa hor yimaada waa naftaada, maxaayeelay waxaa jira cod taban oo kugu dhex jira, markaad is tiraahdo tallaab horay u qaad wuxuu kugu dhihi: Way adag tahay suurtagalnimada yoolkaaga, ee ha is dhibin; qofna ma gaarin; dad kaaga aqoon badan ayaa jira; hortaa jiraba wuu ku hungoobay iwm.

Codkaas taban mar wuu awoodaystaa, marna wuu awood yareeyaa, labada mar waxay ku xiran tahay hadba sida aad ugu falceliso. Waxaa jirta murti Afrikaaneed oranaysa “Haddii uusan cadow kugu dhex jirin, cadaawaha dibadda waxba kaama qaadi karo.”

Haddaba, sidee uga baxsan kartaa codkaas taban? Raac tallaabooyinkan: Ma ogtahay marka aad hurdada ka soo toosto maskaxdu waxay ku shaqeysaa xawaare sare oo cabirkiisu yahay 10.5m/s, waa xilliga ay ugu wax qaadasho fiican tahay marka waxa ugu horreeya ee aad maqasho ayaa waxay jiheeyaan maskaxdaada; maalintaas oo dhan.

Sidaas darteed, sow kuuma wanaagsana markaad hurdada ka soo kacdo waxa ugu horreeya ee dhagtaada maqasho in ay noqdaan wax samasheeg ah? Akhri kitaabka quraanka, adeegso qoraallo togan oo kugu dhiirrigeliya suurtaggal ahaanshaha yoolkaaga.

Markasta oo aad seexanayso ama soo toosayso isku layli maskaxdaada, oo isu akhri weerahan: Waan qaban karaa, waan ka dhabayn karaa, waa ii suurtaggal yoolkayga. Haddii aad sidaas fasho

hubaal in uusan shaki ku jirin in codkaasi taban uu awoodda gabi doono.

Sidoo kale, waxaad la saaxiibtaa dadka aan quusan ee samasheega ah, kuwaas oo mar walba kugu dhiirrigeliya hanashada yoolkaaga.

Markasta uu codkaasi taban kuu sheego in aysan suurtaggal ahayn yoolkaaga, la dood, isla hadal oo waxaad weyddiisaa sababta aysan suutaggal u ahayn.<sup>21</sup>

Waxaa jirta cilmibaaris lagu sameeyay carruur yar yar. Curruurtaas waxaa loo kala qaybiyay kooxda A iyo kooxda B, ka dib waxaa lagu yiri ballanqaada in aydan cuni doonin xalwo maalinta ciidda. Kooxda A, waxay dhahayn ma cuni doono halka kooxda B ay ka yiraahdayn ma cunayno. Markii la gaaray maalinta ciidda ayaa labadii koox waxaa la geeyay meel ay ka socotay dabaaldega ciidda. Waxaa lasoo hordhigay weelal ay ku jiraan xalwo iyo buskut ka dib waxa la daawaday sida ay u dhaqangelin karaan ballantii. Kooxdii dhahday ma cuni doono, boqolkiiba 39% meysan cunin xalwada halka kooxdii dhahday ma cunayno, boqolkiiba 64% aysan cunin xalwada.

Haddaba, cilmibaaristaas waxaa lagu soo ogaaday in maskaxdu ay isla markiiba qabsan ogtahay hadallada ku dhisan waqti xaadirka. Tusaale, kooxdii dhahday ma cuni doono waxay sameeyeen ballanqaad ku dhisan timaaddada balse kooxdii dhahday ma cunayno, iyaguna

---

<sup>21</sup>Qormadan waxaa laga soo xigtay bogga Mohamed Omar uu ku leeyahay barta xiriirka bulshada ee Faysbuug.

waxay sameeyeen ballanqaad ku dhisan ammintaa xaadirka ah.

Waxaan filayaa in aad tahay qof doonaya in uu qaato go'aan adag, si uu maskaxdiisu ugu bandhigo guusha uu markaasi dalbanayo. Hagaag, sooqaado waraaq cad ka dib ku qor, iskuna akhri hadalkan: *-Keliya waxaan diiradda saarayaa guusha aan dalbanayo, kama welwelayo guuldarro waayo waan u diyaarsannabay, guuldarradu waa macallinkayga waxay i baraysaa waddo cusub, guusha iyo guuldarrada, labaduba waa ii dheef, sidoo kale haddii aan himilo leeyahay, yoolkaygu waa waddadii aan ku gaari lahaa guusha aan u qalmo.*

## **Garashada Yoolka**

Waxaa jira awoodo badan oo Rabbi kugu manaystay si aad uga duwanaato noolaha kale, waxaa ka mida garaadka, da'da, nasiibka, baaraandega iyo kasmada. Intaas oo dhan adiga ayay gaar kuu yihiin, ma jirto cid kale oo ku la wadaagta. Garaadkaaga ma jiro qof kula wadaago; da'daada cid ku la wadaagto ma jirto; nasiibkaaga qof ku la wadaago ma jiro; kaskaaga cid kale oo ku la wadaagayso ma jirto.

Si kastaba, waxaad ku riyoonaaysaa waxa aad rabto in aad noqoto; waxaad ku riyoonaaysaa waxa aad rabto in aad samayso; waxaad ku riyoonaaysaa waxa aad rabto in aad hesho. Iskusoowadadduub, si aad u ogaato yoolkaaga waa in aad maskaxda ku haystaa muuqaallo muujinaya hadafka nolashaada, markaas ayuu yoolkaagu noqon

doonaa mid ka mid ah waddooyinka ugu muhiimsan ee aad ku gaari karayso guusha.

Sidoo kale, waxaad naftaada hordhigtaa saddexdan weyddiimood: Maxaan u baahannahay? Waa maxay faa'iidooyinka aan ka heli karo haddii aan xaqiijiyo yoolkayga? Maxaa igu dhici kara haddii aan gaari waayo? Markaad garato waxa yoolkaagu yahay, waxaa kuu habboon in aad qorto waayo qoristu wuxuu kaa caawin doonaa in aad isha ku hayso.

Garashada yoolka waxaa lagu tilmaamaa in uu yahay barta ay ka billaabato guusha, sidaas darteed mar walba yoolkaagu ha ahaado in aad gaarto dayaxa haddii aad gaari wayso waxaan kuu rejaynayaa in aad gaarto meel dhexe sida daruuraha. Si kastaba, qof walba oo naga mida wuxuu leeyahay ujeedooyin dhanka nolosha ah, ujeedooyinkaas qofna ku lama wadaago, marka adiga un garo yoolka noloshaada ka dib iskudday in aad ka salgaarto.

## **Xeel Dhigashada Yoolka**

Mar Haddii aad qorshaynayso in aad guulaysato waa muhiim in aad marka hore diiradda saarto yoolkaaga, adiga oo adeegsanaya xeesha dhigashada yoolka, si uu u noqdo mid dhaqangalay. Haddaba, yoolku waa in uu yahay mid ku dhisan xeesha “S.M.A.R.T,” oo laga minguuriyay xarfahan hoose:

**S-** Specific (Kooban).

**M-** Measurable (La cabbiri karo).

**A-** Agreed upon (La gaari karo).

**R-** Realistic (Dhab ah).

**T-** Time-based (Ammin go'an).

Haddii yoolkaagu uu ku bees garaysan yahay xeesha kor ku xusan, hubanti in aad ka liibaanayso.

Beri baa nin socdaalay, siduu u socday ayuu soogaaray meel isgoys ah oo dhawr waddo isku weydaaranayaan. Ka hor inta uusan waddada dhinaca kale u dhaafin ayuu arkay nin oday ah, wuxuu weyddiiyay: “Waddadaan haddii aan qaado intee i geynaysaa? Odaygii wuxuu ku yiri: “Oo markii hore intee u socotay? Ninkii wuxuu ugu jawaabay: “Ma garanayo.” Odaygii wuxuu ku dhahay “Haddii ay sidaas tahay waddo walba raac waddo un baad heleysaay.”

Haddaba, dulucda sheekadu waxay tahay haddii aadan weli garan dariiqa ku gaarsiiya yoolkaaga, ogow waxaad noqonaysaa qof ay dabeyshu marba dhinac u duuliso. Wuxuu yiri abwaan Gaariye:

*“Nin dariiq xarriiqdaa  
Garan kara dayawgee  
Dhidarkii ku kacay danab  
Doc kastaaba waa u toos.”*

Waa sida uu abwaanku u sheegay, haddii aadan weli garan waddada aad ku socoto, doc kastaaba waa kuu toos.

Gerry Robert, buuggiisa ‘*Fekerka Milyoneerada*’ wuxuu ku qoray sheeko ku saabsan Larry Walter, oo ku magac dheer duuliyihii Lawn-chair. Wuxuu ahaa nin kaxeeya baabuurta xammuulka,

laakiin yoolkiisu wuxuu ahaa in uu noqdo duuliye sare.

Wuxuu iskudday in uu ku biiro ciidamada hawada ee dalka maraykanka, nasiibxumo da' weynaantiisa, araga indhahiisa oo daciif ah iyo isaga oo aan haysan shahaaddo jamacadeed ayaysan ugu suurtaggalin in uu ka mid noqdo ciidamada hawada. Hasayeeshe, miyuu is-dhiibay? Maya, muusan noqon qof sidaas sameeya.

Wuxuu aaday meel bakhaar ah oo ay ciidamada alaab ugu xareysnaayeen, wuxuu kala soo baxay buufin weyn iyo haan ay hawo ku jirto, ka dibna wuxuu sameeyay intuu dhanka dambe dab kaga shiday ayuu ku xiray kursi-laab lagu fadhiisan karo, inta uu ku fadhiistay kursigii ayuu billaabay in uu hal mar boodo si uu hawada sare ugu duulo, wayna u suurtaggashay. Isaga oo dhowr daqiiqo hawada ku dhex mushaaxaya ayaa waxaa meel kore ka arkay ciidamada illaalada badda, waxay u dirayn Elokobtar (Helicopter).

Markii dhulka la keenay ayaa la weyddiiyay maxaad naftaada halis u galisay? Isaga oo ku faraxsan waxa uu sameeyay ayuu ugu jawaabay “Haddii aad rabto in aad riyadaada u beddesho mid run ah waa in aadan fadhiisan; waa in aad raadsataa riyadaada.”

## **Qorshe-Fulineed**

1. Samayso yool dhammaystiran.
2. Qoro dhammaan yoolalkaaga.
3. Isku akhri yoolkaaga laba jeer maalin walba: arooryada hore markaad soo toosto iyo habeenka markaad seexanayso.

Soo qaado buug yarowgaaga ka dib ku qor yool sidan oo kale u dhigan: Yool ku dejisan saddex bilood oo ka billaabanaaysa bisha Jannaayo ilaa bisha Maarso waxaan ugu talaggalay in aan shaqo helo ama guursado:

**Saxiix:** .....

**Waqtiga:** .....



# 7

## WAX KA BARO TAARIKH NOLOLEEDKA SHAKHSIYAAD KA GUUL GAARAY GANACSIGA

*Guusha waa bare xun balse waxay soo jiidataa  
dadka Caqliga badan si ay ugu fikirnaan  
mana waayaan*

Bill Gates

**F**araska iyo Dameerka waxay isku yihiin gammaan balse waxay is dheer yihiin: orodka, quruxda, iyo qiimaha. Dadkuna waa isku dad balse waxay is dheer yihiin: dadaal iyo dulqaad, halgan iyo hügsi, himilo iyo feker togan.

Cutubkan, waa hidde sidaha nuxurka buuggan. Haddii aad si miyir leh ula socoto waxaad ka dhex xulan kartaa sirta ku jirta kuwa guulaystay. Wuxuu diiradda saarayaa sidii aad wax uga beddeli lahayd hab fekerkaagii hore haddii aadan weli helin guusha aad dalbanayso.

Wax ka baro waddadii ay qaadayn kuwii guusha kaaga horreeyay, si aad adigana u noqoto guulayste iyaga oo kale ah. Akhriso taariikh nololeedkooda adiga oo kala soo dhex baxaya sirta ku jirta guushooda, sidoo kale waxaad ka dhex xulan kartaa sababtii ay ku gaarayn heerka ay maanta nolosha ka joogaan, taasina waa sirta guushooda!

U fiirso dhammaantood waxay doortayn waddo ka duwan waddooyinka ay maraan dadka caadiga ah. Markaad akhrinayso taariikh nololeedkooda waxaad ku dhex arki doontaa hal shay oo ay ka mideysan yihiin giddigood marka adiga garo shaygaas ka dib iskudday in aad kala soo dhex baxdo sirta guusha.

Intooda badan waa dad khatarta u bareera, way kufaan balse isma dhiibaan, haddana waa kuwa naftooda ku kalsoon. Waan filayaa in aad isweyddiinayso maxay tahay sirta guusha? Ma iga filaysaa in aan ku dhaho waa sidaa iyo sidaa, maya ha iga sugin! Waayo guul walba waxay leedahay sabab lagu gaaray marka baro sababtaas si aad u hesho sirta guusha!

Ma kula tahay aniga iyo adigaba in ay wax badan na-dheeraayeen? Sida aynu wax u cuno ayay wax u cunaan, sida aynu u baahano ayay u

baahdaan, sida aynu u xanuunsano ayay u xanuunsadaan, sida aynu u seexano ayay u seexdaan, sida aynu u faraxno ayay u farxaan, sida aynu u welwelno ayay u welwelaan. Haddaba, maxay kaga duwan yihiin dadka kale? Maxay tahay sirta ku jirta guushooda? Maxaad ka baran kartaa taariikh nololeedkooda? Ma xaglo laaban ayay ku gaarayn guusha mise halgan? Ma hilaadin kartaa sababta gaarsiisay heerka ay nolosha ka gaarayn?

Akhriso taariikh nololeedkooda; ha akhrisan oo keliya balse ka dhex eego sababta; hana isku shuqlin natiijada guusha.

**“**  
**Garasho aad u yeelato sababta guusha**  
**waxay la mid tahay adiga oo helay sirta**  
**Guusha”**

**\*\*\***

Ma rabo in aan waqti badan kaaga lumiyo ka sheekeynta guusha, balse waxaan rabaa in aan kuu tilmaamo sirta daahsoon ee ku jirta guusha. Haddii aad fahamto waxa sababay guusha waxaad heshay sirta. Ma kula tahay in ay jiraan dhacdooyin bilaa sabab ah? Guuli iyadana iskama timaaddo bilaa sabab maxaayeelay ma jirto guul ka baxsan xayndaabka sababta. Guusha sideedaba waa waxa inoo muuqda balse sababta guusha waa waxa innaga daahsoon, ee u baahan in aynu wax badan ka ogaano.

**WILLIAM HENRY GATES** oo ku magac dheer Bill gates waa hal-abuure ganacsi, waa asaasaha shirkadda Microsoft oo ah shirkadda ugu weyn ee soosaarta softiweerada iyo barnaamij kiciyaha kumbuyuutarka ee loo yaqaano Windowska. Wuxuu dhashay 28 Oktoober 1955, wuxuu ku dhashay magaalada Seattle ee dalka maraykanka.

Waxbarashadiisa heerka koowaad wuxuu ku qaatay jaamacadda Harvard, inkasta oo markii hore ka habsamay, haddana wuxuu ahaa qof maskax furan. Wuxuu qoray laba buug oo uu ugu magac daray “Ganacsiga iyo xawaaraha fekerka,” buuggiisa labaad oo lagu magacaabo “Waddada horreysa” waxaa loo tarjumay in ka badan 25 luuqadood.

Bill gates, wuxuu ka mid yahay dadka dunida ugu magaca dheer, uguna taajirsan, hantidiisa waxaa lagu qiyaasaa 92.1 bilyan<sup>22</sup> oo doollar. Isaga iyo saaxiibkiis Pual Allen, waxay dunida ku soo kordhiyeen oo ay qayb weyn ka qaatayn horumarinta tiknoolojiyadda castiga. Wuxuu ku soo dhex barbaaray qoys dhaqaalahooda dhexdhexaad yahay, sidoo kale waxaa la soo barbaaray laba gabdhood oo kala ah *Kristiane iyo Libby*.

Carruurnimadiisii wuxuu ahaa qof wax akhris badan, maskax furan, sidoo kale wuxuu caawinaad wanaagsan ka helay hooyadiis Ms. Marry. Waxay jeclayd in wiilkeedu uu noqdo abukaate sare, balse muusan noqon sida ay

---

<sup>22</sup> Tiraddan waxaa laga soo xigtay wargeyska:  
<http://www.forbes.com/profile/bill-gates>

hooyadii doonaysay maxaayeelay wuxuu ahaa qof waqtigiisa oo dhan ku bixiyay kumbuyuutarka iyo barnaamij u samayntiisa.

Sannadkii 1970kii, wuxuu ganacsi la sameeyay saaxiibkiis Pual Allen oo ay isku bartayn koleejka Lekside. Pual iyo Bill, waxay go'aansadayn in ay samaystaan shirkad iyaga u gaar ah. Markii ugu horraysay waxay soosaarayn barnaamij la dhaho Traf-O-Data, waxay abaalmarin u helayn labataan kun oo doollar.

Bill gates, markii uu dhammaystay koleejka wuxuu iska soo qoray jaamacadda Harvard, sidoo kale saaxiibkiis Pual wuxuu iska soo diiwaangeliyay jaamacadda New York. Balse Pual muusan dhammaysan jaamacadda waayo wuxuu shaqo u aaday magaalada Boston, wuxuu ka shaqo billaabay wargeyska Honeywell, oo ka faallooda tiknoolojiyadda. Isla xilligaas, waxaa u yimid Bill gates oo isagana ka soo tegay jaamacadda Harvard.

### **Aasaasiddii Shirkadda Microsoft**

Bill gates, keli muusan ahayn horumariye sooftiweer balse wuxuu kaloo ahaa hawlgeliye. Fursaddaasi waxay u horseeday in uu noqdo afhayeenka shirkadda. Ka hor shirkadda inta aysan suuqa soogalin waxaa horay suuqa ugu jiray shirkado kala duwan, kuwaas oo tartan adag ka dhexeeyay sida shirkadda Apple, IBM, iyo Intel.

Sannadka 1980kii, shirkadda IBM waxay u baahatay in ay hesho sooftiweer cusub, taas oo u sahashay riyadii Microsoft oo ahayd mar un in ay

noqoto shirkad weyn si ay suuqa kula tartanto shirkadaha kale. Is-faham ka dib, Microsoft iyo IBM waxay wadagalayn heshiis iyo wadashaqayn, sidoo kale Microsoft waxay markii ugu horraysay sooftiweerkeeda cusub ka iibisay shirkadda IBM, kaas oo qiimahiisa lacageed gaaraya konton kun oo doollar.

Intii u dhexaysay 1978-1981, shirkadda Microsoft waxay samaysay horumar weyn waayo markii hore hantida shirkadda waxay ahayd afar milyan oo doollar laakiinse hadda wuxuu gaaray toban iyo laba milyan oo doollar.

Sannadkii 1983, shirkadda waxay xafiisyo cusub ka furatay dalka Ingiriiska iyo Jabaan, isla xilligaas waxay soo kordhisay adeeg cusub oo lagu magacaabo windows, kaas oo loogu talaggalay in lagu kiciyo kumbuyuutarka. Shirkadda waxay gaartay horumaro waaweyn, sannad walba waxaa sii kobcaayay waxsoosaarka shirkadda iyo qiimaha lagu kala iibsado saami-galkeeda.

Bill gates, shirkaddiisa waxay u leedahay macne weyn waayo waa goobtii ay isku bartayn boqoraddiisa Ms Malinda gates, iyada oo xilligaas ahayd gabar siddeed iyo labaatan jir ah. Waxay ka shaqaynaysay shirkadda, waxay soo jiidatay indhahiisa ilaa markii dambe ay isla wadaagayn xiriir gacaltooyo. Bill iyo Malinda way is guursadayn, guurkoodu wuxuu ka dhacay jasiiradda quruxda badan ee Hawaai.

Sannadkii 1996, waxaa u dhalatay gabadhii ugu horraysay, waxaana loo bixiyay Jennifer. Sannad ka dib dhalashadii Jennifer, wuxuu qoyskiisa u

dhisay guri boqol iyo konton kun oo iskuwareeg ah, qiimahiisa lagu qiyaasay konton iyo afar kun oo doollar.

Ugu dambeyn, Bill iyo Malinda waxyaabaha lagu xusuusan doono waxaa ka mida aasaasiddii hay'adda Bill iyo Malinda, taas oo caawisa dad badan oo sabool ah.

**WARREN EDWARD BUFFETT** Waxaa lagu naanaysaa gorgorkii Omah. Waa ruugcaddaa ganacsi, sidoo kale waa maalgeliye xiddig ah, waana aasaasaha shirkadda Berkshire Hathaway. Wuxuu dhashay 30 Agoosto 1930kii, kuna dhashay magaalada Omah ee dalka maraykanka. Waxbarashadiisa heerka koowaad wuxuu ku qaatay jaamacadda Nebraska-Lincoln Columbia, wuxuu ka bartay cilmiga ganacsiga.

Waxaa lagu sheegaa in uu yahay ninka labaad ee dunida ugu taajirsan, sidoo kale wuxuu ka mid yahay dadka dunida ugu caansan dhanka ganacsiga. Hantidiisa waxaa lagu qiyaasaa 91.9 bilyan <sup>23</sup> oo doollar. Wuxuu ku soo dhex barbaaray qoys magac ku leh siyaasadda dalka maraykanka. Aabbihis Howard, wuxuu ahaa xildhibaan ka tirsan dowladda dhexe ee maraykanka, wuxuu lahaa dukaan lagu iibiyo warqadaha saami-galka shirkadaha.

Yaraantiisii wuxuu ahaa shakhsi firfircoon oo xiiseeya ganacsiga. Markii uu ahaa saddex iyo toban jir, wuxuu soo iibsaday saddex saami shirkadeed, isaga oo ku soo iibsaday lacag dhan soddon iyo shan doollar. Maalmo ka dib waxaa kordhay qiimaha lagu kala iibsado saamiyada, wuxuu gaaray afartan dollar.

Warren, markii uu arkay in qiimaha saamiyada sare u kacay wuxuu sameeyey intuu saddexdii saami iska gaday ayuu halkaas ka faa'iiday shan iyo toban dollar. Keli muusan faa'iidin lacag balse

---

<sup>23</sup>Tiraddan waxaa laga soo xigtay wargeyska:  
<http://www.forbes.com/profile/warren-buffett>



wuxuu kaloo ka bartay khibrad weyn iyo sirta ganacsiga.

Lacagtii uu aruursaday carruurnimadiisii ayuu ku billaabay hantida uu haysto, taasi waxay muujinaysaa in ay muhiim tahay in qofku muruqiisa maalo, waxna kaydsado. Sannadkii 1942, Warren aabbihiis, Howard, waxaa loo doortay aqalka wakiilada ee Dowladda dhexe, taasi oo keentay in ay usoo guuraan magaalada Fredricksburg ee Virginia. Tani waxay siisay fursad cusub oo uu ku samaysan karo ganacsi.

Isla xilligaas waxaa jirta arrin uu sameeyay Warren saaxiibkiis oo ay isku bartayn iskuulka, taas oo ahayd in uu soo iibsaday khalab, wuxuu ku soo gatay labaatan iyo shan doollar, wuxuu ka sii iibiyay dukaan, isaga oo kaga gaday labaatan iyo siddeed doollar. Warren, kuma cusbayn hawshaas maxaayeelay wuxuu ahaa qof ku xeeldheer ganacsigaas oo kale. Durbadiiba, wuxuu billaabay in uu soo iibsado saddex khalab, wuxuu u iib geeyay xaafado kala duwan, isaga oo ka macaashay.

Ganacsigaas wuxuu ku sii dhex jiray wax badan ilaa markii dambe uu ka gaaray heersare. Wuxuu noqday mid ka mida dadka dunida ugu taajirsan, dadka reer Nebraska ay ugu naanaysaan Gorgorkii Omah. Sannadkii 2008, waxaa jirtay qiimayn uu sameeyay wargeyska Forbes oo ah wargeys falanqeeya maalqabeenada caalamka, waxay ku sheegayn Warren in uu kaalinta labaad kaga jiro maalqabeenada dunida, sidoo kale uu kaalinta shan iyo tobanaad ka galay dadka dunida

ugu awoodda iyo saamaynta badan. Wuxuu leeyahay oraah caan ah oo oranaysa “*Kuma keeni kartid cunug hal bil xitaa haddii aad hesho naag leh uur sagaal bilood.*”

**CARLOS SLIM HELU** Waa hal-abuure ganacsi, waana maalgeliye ka soo jeeda dalka maksiko (Maxico). Dadka reer maksiko waxay ugu naanaysaan ‘Warren Buffetkii Maxico’ waayo waa shakhsi ku xeeldheer ganacsiga, waa aasaasaha shirkadda Telmex iyo America Movil-waa labada shirkadood ee ugu ballaaran ee bixiya adeega war-isgaarsiinta dalka.

Wuxuu dhashay 28 janaayo 1940kii, kuna dhashay magaalada Maxico city. Waxbarashadiisa heer koowaad wuxuu ku soo qaatay jaamacadda Nacional Autonomia de Mexico. Wuxuu ka mid yahay dadka dunida ugu taajirsan, uguna caansan. Hantidiisa waxaa lagu qiyaasaa 86.3 bilyan<sup>24</sup> oo doollar.

Yaraantiisii wuxuu ahaa qof jecel ganacsiga, wuxuu la shaqeyn jiray aabbihis oo ganacsade ahaa, wuxuu mushaar ahaan u qaadan jiray laba boqol oo lacagta Maxico ah. Sidoo kale, wuxuu aabbihis ka bartay xirfado ganacsi oo kala duwan, taasi waxay ku dhiirrigelisay in uu billaabo dhaqangelinta xirfadahii uu aabbihii ka bartay.

Dhowr bilood ka dib wuxuu guursaday Soumaya Domit oo ay jaamacadda isku barteyn. Waxaa u billaabatay nolol cusub waayo noloshiisa

---

<sup>24</sup> Tiraddan waxaa laga soo xigtay wargeyska:  
<http://www.forbes.com/profile/carlos-slim-helu>

waxaa ku soo biiray Soumaya oo ahayd gabar firfircoon oo hawlkar ah isaga oo fursaddaasi ka faa'ideysanaya ayuu billaabay in uu sii horumariyo ganacsigiisa. Wuxuu soo iibsaday shirkado kala duwan oo mid walba adeegyo gaar ah bixiso sida dhismaha, macdanta iyo war-iswaarsiiinta.

Sannadkii 1982, waxaa dhulka galay dhaqaalahii dalka Meksiko, fursaddaasi waxaa ka faa'ideystay Carlos Slim isaga oo soo wada iibsaday dhammaan saamiyadii shirkadadii musalifay ama fashilmay, sidoo kale wuxuu heshiis ganacsi la galay shirkado badan oo caalami ah. Waxay ahayd markii ugu horreysay ee uu ka soo muuqday saaxada ganacsiga dunida.

Sideedaba fursadda mar ayay ku soo maraysaa oo ay albaabka kuu soo garaacaysaa, marka haddii aadan ka faa'ideysan waa guuldarro. Gu'gii 1988, wuxuu ku biiray koox ganacsato ah oo ka shaqeysata birta sida Kubarta iyo Allumuuniyada, isla sannadkaas wuxuu dowladda Meksiko kala wareegay shirkadda ugu ballaaran ee bixisa adeega war-iswaarsiiinta. Sannadkii 2005, wuxuu maalgashi ku sameeyey shirkadda duulimaadka ee Volaris Airline, sidoo kale sannadkii 2007 wuxuu maaalgashi labaad ku sameeyay shirkadda Cigatam Tobacco.

Si kastaba, Carlos Slim Helu keli muusan ahayn ganacsade balse wuxuu kaloo ahaa qof jecel caawinta dadka dhibaateysan, isaga oo aasaasay saddex urur samafal oo kala ah: *Fundación Carlos Slim Helú*, *Fundación Telmex*, iyo *Fundación del Centro Histórico de la Ciudad de México A.C.* Intooda badan waxay xoogga saaraan dhanka waxbarashada, caafimaadka iyo dhaqanka.

Ugu dambeyn, wuxuu noqday ninka dunida ugu taajirsan, sidoo kale wuxuu ka mid yahay shakhsiyaadka ugu caansan saaxada ganacsiga.

**MARK ELLIOT ZUCKERBERG** Waa hal-abuure ganacsi, waa aasaasaha barta xiriirka bulshada ee faysbuug (Facebook), sidoo kale waxaa lagu tilmaamaa in uu yahay bilyoneerka ugu da'da yar dunida. Hantidiisa waxay gaaraysaa 71.6 bilyan<sup>25</sup> oo doollar. Wuxuu dhashay gu'gii 1984, kuna dhashay magaalada New York ee dalka maraykanka. Wuxuu ku biiray Jaamacadda Harvard laakiin ma dhammaysan.

Yaraantiisii wuxuu ahaa qof jecel kumbuyuutarka, sidoo kale wuxuu ahaa qof qora barnaamijyada kumbuyuutarka. Markii ugu horreysay wuxuu qoray barnaamij la dhaho Atari Basic oo uu ugu magac daray Zucknet. Barnaamijkaas waxaa isticmaali jiray aabbihis, wuxuu u adeegsan jiray xaruntiisa caafimaadka. Aabbihis Edward wuxuu maamule ka ahaa xarun caafimaad, sidoo kale hooyadiis Karen iyadana waxay ahayd dhaqatarad caafimaad.

Tijaabo ay sameeyeen isaga iyo saaxiibadiis waxay ku soo saareen barnaamij ciyaar ah, oo ku shaqeyn kara kumbuyuutarka. Markii ay hooyadii aragtay sida uu wiilkeeda u jecel yahay barashada kumbuyuutarka, waxay geysay iskuul lagu magacaabo Philips Exeter Academy.

Tani waxay fursad u siisay in uu sii horumariyo xirfaddiisa ku saabsan kumbuyuutarka. Isaga oo iskuulka dhiganaya ayuu soosaaray barnaamij lagu dhageysan karo heesaha, wuxuu ugu magac daray Synapse. Barnaamijkaas wuxuu soojiitay shirkado badan sida shirkadda Microsoft, AOL.

---

<sup>25</sup>Tiraddan waxaa laga soo xigtay wargeyska:

<http://www.forbes.com/profile/mark-zuckerberg>

Haddaba, markii uu ka soo qalinqortay iskuulka, islamarkiiba wuxuu iska soo qoray jaamacadda Harvard. Markii ay jaamacadda ogaatay in uu ahaa qofkii soosaaray barnaamijka synapse, waxay jamacadda u aqoonsatay in uu yahay horumariye softiweer, taasi waxay u noqotay fursad dahabi ah. Isla xillgaas wuxuu soosaaray laba barnaamij kale oo lagu kala magacaabo Coursematch iyo Facemash.

Waxaa jirtay khilaaf soo kala dhex galay isaga iyo maamulka jaamacadda, ilaa markii dambe laga ertey jaamacadda, sidaas ayuu kaga habsaamay waxbarashadii Harvard. Dhanka kale, ka hor inta uusan jaamacadda ka habsaamin waxaa jiray saddex arday oo ka mid ahaa ardayda jaamacadda, waxay la yaabeen barnaamijyadii uu ku soo kordhiyey jaamacadda muddadii yareyd ee uu joogay, waxay ka codsadeen in uu ka caawiyo barnaamij yar oo ujeedkiisu yahay in la helo bar isku xirta ardayda jaamacadda si ay macluumaad u wadaagaan.

Isaga iyo saddexdii arday waxay dunida ku soo kordhiyeen bar bulsho, taas oo qofka u sahlaysa in uu si fudud u la xiriiri karo asxaabtiisa ku kala nool daafaha dunida, waxay u bixiyeen Facebook.

### **Aasaaskii Shirkadda Facebook**

Sannadkii 2005 waxaa sii kordhaayey dadka adeegsada shirkadda Facebook oo gaaray shan milyan, taas oo soo deddejisay in ay soojiidato indhaha shirkadaha waaweyn, ee jeclaystay in ay xayeysiis ku dhex samaystaan. Waxaa ka mid ahaa shirkadahaas shirkadda weyn ee Accel oo maalgashi dhan toban iyo laba milyan oo doollar, ku samaysay shirkadda Facebook.

Waxaa suuqa ku soo biiray Facebook oo xilligaasi sii kordhayay saamaynta ay ku yeelanayso suuqa dunida. Mark, wuxuu yiri “Haddaad rabto in aad samayso adeeg kaas oo saameyn leh waxaad u baahan tahay in aad marka hore weynaato, hadda waxaan u malaynayaa in aynu weynaanay, oo aynu wax ka baranay khaladaadkeeni hore.” Sikastaba, wuxuu ku guulaystay abaalmarino kala duwan, sidoo kale wuxuu noqday wiilka gu’gii 2010, sida laga soo xigtay wargeyska Time. Isla sannadkaas wuxuu kaalinta soddon iyo shanaad ka galay dadka dunida ugu taajirsan.

Gu’gii 2012, wuxuu sameeyay isbeddel si uu shirkadda Facebook u horumariyo, wuxuu ku soo kordhiyay adeeg cusub oo internet ah sida adeega IPO, taasi waxay soo deddejisay in durbadiiba daqliga shirkadda sare u kaco. Wuxuu gaaray \$16 bilyan oo doollar.

Sannadkii 2012, wuxuu kaloo sameeyey isbeddel dhanka nolosha ah isaga oo guursaday Priscilla Chan oo ah gabar shiinees ah, laakiin waqti dheer saaxiibo ahaayeen. Wuxuu arooskooda ka dhacay magaalada quruxda badan ee San Fransisco dalka maraykanka.

**ALHAJI ALIKO DANGOTE** Waa hal-abuure ganacsi, waa aasaasaha shirkadda Dangote Group. Wuxuu dhashay 10 Abriil 1957, kuna dhashay Gobalka Kano dalka Naajeeriya. Waxbarashadiisa heerka koowaad, wuxuu ku qaatay jamaacadda Al-Azhar dalka Masar isaga oo ka qalinqortay cilmiga ganacsiga.

Sannadkii 2014, wargeyska Forbes wuxuu sameeyey qiimeyn ku saabsan maalqabeenada dunida, waxay sheegeyn in Dangote uu yahay shakhsiga sannadka 2014 ee qaaradda Afrika. Keli ma noqon shakhsiga sannadka, ee wuxuu kaloo noqday qofka ugu taajirsan qaaradda Afrika, sidoo kale wuxuu kaalinta saddex iyo labaatanaad kaga jiraa maalqabeenada caalamka. Hantidiisa waxaa lagu qiyaasaa 14.3<sup>26</sup> bilyan oo doollar.

Dangote, wuxuu leeyahay shirkado kala duwan, intooda badan waxay ka kala shaqeyaan waddamo kala duwan sida Benin, Cameron, Togo, Ghana, South Africa iyo Zambia. Wuxuu ka soojeeda qoys Muslim ah oo hanti iyo magac ku leh dalka Naajeeriya.

Yaraantiisii wuxuu ahaa qof xiiseeya ganacsiga, mar isaga oo ka hadlaya sida uu u jeclaa in uu noqdo ganacsade, wuxuu yiri “Waxaan xusuustaa markii aan iskuulka dhiganaayay waxaan soo iibsana jiray kartoomo yar yar oo sonkor ah ka dib waan sii iibin jiray si aan u uga helo macaash.”

Markii uu jaamacadda ka qalinqortay wuxuu dib ugu soo laabtay dalkiisa Naajeeriya. Wuxuu lacag ka

---

<sup>26</sup>Tiraddan waxaa laga soo xigtay wargeyska:  
<http://www.forbes.com/profile/aliko-dangote>

deynsaday adeerkiis Sanusi abdulkadir si uu yoolkiisa uga run sheego; macnaha si uu ganacsi u sameeyo, sidaas ayuuna ku soo galay saaxada ganacsig. Lacagtii yareyd ee uu ka deynsaday adeerkiis waxay u noqotay bar bilowga guushiisa. Isaga oo durbadiiba aasaasay shirkado kala duwan, wuxuu ugu magac daray Dangote Group.

Gu'gii 2012, wuxuu qaaday tallaabo weyn si uu u horumariyo ganacsigiisa, taas oo ahayd codsi uu u gudbiyay dowladda Naajeeriya. Codsigaasi wuxuu ahaa in qayb ka mida dekedda Apapa lagu wareejiyo shirkadiisa, waa laga aqbalay. Taasi waxay u sahashay in uu si fudud ku ballaariyo ganacsigiisa, sidoo kale wuxuu codsi la mid ah kii hore u diray baanka dhexe ee dowladda si canshuurta looga dhimo, waa laga oggolaaday.

Taasi waxay kaloo u fududeysay in shirkadahiisu ay si sahlan ula wareegtay suuqa gaar ahaan dhoofinta sonkorta, cusbada, bariiska, kalluunka, shamiintada iyo suufka. Sidoo kale, waxaa kordhay saamiga ay shirkadahiisu ku leeyihiin suuqa, wuxuu gaaray boqolkiiba toddobaatan.

Sannadkii 2009, wuxuu ku guulaystay abaalmarinta qofka ugu shaqo abuurka badan dalka Naajeeriya. Isla sannadkii 2011, wuxuu mar labaad ku guulaystay shakhsiga loogu tixgelin badan yahay Naajeeriya. Abaalmarintaasi waxaa guddoonsiiyey madaxweynihii hore Naajeeriya Mudane Good Luck Janothan. Mar isaga oo ka hadlaya arrinka shaqo abuurka wuxuu yiri “... *Haddaad I siiso shan biyan oo doollar waxaan ku maalgelin lahaa fursad walba oo taalla dalka.*”



**ZHOU QUNFEI** Waa hal-abuurad ganacsi, waa aasaasaha shirkadda ugu weyn ee samaysa shaashadda moobeelada ee lagu magacaabo Lens Technology. Hantideeda waxaa lagu qiyaasaa 8.8 bilyan <sup>27</sup> oo doollar. Tani waxay ka dhigtay gabadha ugu taajirsan dalka shiinaha, sidoo kale waxay ka mid tahay dumarka ugu awoodda badan dunida.

Waxay dhalatay sannadkii 1970kii, kuna dhalatay tuulo ku taalla gobalka Hunan dalka shiinaha. Waxay ku soo dhex barbaartay qoys sabool ah, iyada oo shan jir ah ayaa aabbahayd ka dhintay, dhimashadiisa waxay keentay in iskuulka ay ka baxdo ka dib iyada iyo hooyadeed waxay u soo guureen gobolka Guangdong.

Zhou markii ay soo hanaqaadday waxay ku biirtay jaamacadda Shenzhen balse iyada oo jaamacadda dhiganaysa ayay doorbidday in ay shaqeyso, waxay jaamacadda ka akhrisatay casharo kala duwan sida xisaabta iyo kumbuyuutarka.

Waxay shaqo ka heshay shirkad yar oo samaysa shaashadda saacadaha, waxay ahayd shakhsi ku fiican shaqadeeda isla markaana ahayd shaqaale aad u firfircoon. Saddex bilood ka dib markii ay shaqada bilowday ayay codsi u dirtay madaxa shirkadda iyada oo ka codsatay in la dalacsiyo.

Markasta hadafkeedu wuxuu ahaa in ay heer sare gaarto. Ka hor inta aysan ku soo biirin saaxada ganacsiga waxaa jiray shakhsiyaad ku dhiirrigeliyay in

---

<sup>27</sup>Tiraddan waxaa laga soo xigtay wargeyska:  
<http://www.forbes.com/profile/zhou-qunfei>

ay bilowdo ganacsi ay iyada u madax bannaan tahay, kuwaasi waxay kala ahaayeen ina abtigeed, walaasheed iyo walaalkeed. Ma kula tahay in ay ganacsigeeda ku bilowday lacag badan? Labaatan kun oo doollar oo ay dhigaal ahaan u kaydsatay ayay ku bilowday ganacsigeedii ugu horeeyay.

Sannadkii 2001, waxay dhigtay iskoor weyn waayo shirkaddeeda cusub ee Lens Technology, waxay ku guulaysatay heshiis ay la gashay shirkadda weyn ee TCL Corporation. Markii ay shirkaddeeda heshiis la saxiixatay shirkadda TCL, waxay tiri “Wixii ka dambeeyay heshiiskaas waxaan heshiisyo kale oo cusub la galay shirkado kale oo waaweyn.”

Shirkaddeeda Lens Technology oo ah shirkadda ugu weyn ee samaysa shaashadda moobeelada waxay aasaastay gu’gii 2003, maantana waa shirkad weyn oo awood badan ku leh suuqyada caalamka. Shirkaddeeda waxay macaamil la tahay oo ay adeegyo siisaa shirkadaha kala ah Apply, Samsung iyo Huawei.

Si kastaba, muddo dheer ayay ku qaadatay in shirkaddeeda ay faa’iido badan soosaarto balse ma quusan, mana aysan is-dhiibin. Laba jeer ayay iibisay gurigeeda si ay isaga bixiso mushaarka shaqaalaha, balse marnaba ma aysan go’aansan in ay albaabada u laabto shirkaddeeda oo aan faa’iido badan soosaarin xilligaa. Sheekaddeeda waxay dhiirrigelin u tahay qof walba oo doonaya in uu ganacsi abuuro. *Waxay tiri mar ay wareysi siisay TVga Gansu “Sirta ku jirta guushayda waxay tahay mar walba waxaan jeclaa in aan wax cusub barto.”*

# Tixraac

Brain Tracy. (2001). 21 Success Secrets of Self-made Millionaires. Berret-kochler Publishers, Sanfrancisco California.

Bobbury. (2003). The Success Formula. Samark Publishing, USA.

Shive Khera. (2014). You Can Win. Bloomsbury. India.

Mohammed Siibed. (2013). Himiladaada Hano. Siibed International, USA.

Napoleon Hill. (1928). The law of Success. Ralston University press, Meriden Conn. USA.

Napoleon Hill. (1937). Think and Grow rich. Ralston Society. USA.

Shive Khera. (2004). Freedom is not free. MacMillan Indian Ltd. India.

Gerry Robert. (2007). The Millionaire Mindset. Life Success Publishing. USA.

Mark Zuckerberg. [Internet] 2015. The Biography.com website, available from: <http://www.biography.com/people/mark-zuckerberg-507402> (Accessed 14 Dec. 2014).

Warren Buffett. [Internet] 2015. The Biography.com website, available from: <http://www.biography.com/people/warren-buffett-9230729> (Accessed 14 Dec. 2014).

Bill Gates. [Internet] 2015. The Biography.com website, available from: <http://www.biography.com/people/bill-gates-9307520> (Accessed 14 Dec. 2014).

Alhaji Dangote. Internet] 2015. The Wikipedia.org website, available from: <http://www.Wikipedia.org/AlikoDangote> (Accessed 14 Dec. 2014).

Sir Kashing Li. [Internet] 2015. The Wikipedia.org website, available from: <http://www.Wikipedia.org/Sirkashingli> (Accessed 14 Dec. 2014).

Carlos Slim Helu. [Internet] 2015. The Wikipedia.org website, available from: <http://www.Wikipedia.org/Sirkashingli> (Accessed 14 Dec. 2014).

Zhou Qunfei. [Internet] 2016. The Wikipedia.org website, available from: [https://en.wikipedia.org/wiki/Zhou\\_Qunfei](https://en.wikipedia.org/wiki/Zhou_Qunfei) (Accessed 10 July, 2016).

Nikitina A. 2006. 5 laws of success, the whitedovebooks.co.uk website, Available from: <http://whitedovebooks.co.uk> [Accessed 17 March, 2014].

<http://www.what-is-success.com/meaningofsuccess> (Accessed 31 Aug, 2015).



## **Xasan Mudane**

Waa aasaasaha BARAARUG LIBRARY.  
Wuxuu maqaallo badan ka qoray arrimaha Afrika  
iyo siyaasadda Soomaaliya. Gu’ga 2011-2014,  
wuxuu ka qalinqortay derajada heerka koowaad  
ee jaamacadda Somalia gaar ahaan kulliyadda  
Cilmiga Bulshada. Gu’ga 2016-2018, wuxuu ka  
qalinjebiyay derajada heerka labaad ee jaamacadda  
Istanbul Ticaret gaar ahaan kulliyadda Barashada  
Afrika iyo Xiriirka Caalamiga.